1 caawi inay fahmaan xiriirka u dhaxeeyo dadaalka iyo guusha: haddii ay ku dadaalaan dugsiga, inay guuleysanayaan.

2 Lahadal, la akhri, iyo la ciyaar carruurtaada, sida badan ee aad awoodid, ka bilow marka ay ilmo yihiin. Howlahaan waxay ka caawin karaa iyaga inay hormariyaan xirfadaha luuqada hadalka iyo akhrinta oo u soo jeedi afkaaro cusub iyo cilmi, taas oo badelkeeda ku caawineyso inay ku guuleystaan dugsiga. Kala hadal iyaga nololahooda iyo danooyinka. La wadaag sheekooyinka noloshaada. Laakhriiyaga maalin walba!

3 Ka qeybgali qoyskaaga balaaran. Weydii dhammaan dadka daryeelo carruurtaada—eedooyinka, adeerada, awoowda/ayeyda, ina adeerta, waaladiinta diinta, gabdhaha yaryar, dariska, iyo saaxibada—si aad ugu dhiirageli sid carruurtaada inay ku dadaalandugsiga oo muujiyaan jaceylkooda waxbarashada.

4 Xadid waqtiga shaashada. U sameey xadeynada waqtiga canugaaga ku istimcaalo kumbiyuutarka iyo qalabyada korontada, daawashada telefeshanka, ciyaarida geemamka video-ga, iyo fariin qoraalka—haddii ay kula joogaan, ama ay la joogaan daryeelaha canuga, ama kaligood yihiin. Carruurta ka hooseyso da'da labo waa inaysan daawanin telefeshinka gabi ahaanba. Waqtiga shaashada waa in waxbarasho ahaan diirada loo saaraa oo ay ka caawisaa ardayda inay xoojiyaan ama ballaariyaan fursadahooda waxbarashada. Ka hooseeyo waqtiga "shaashada" waxay la micna noqon kartaa jimicsiga, ciyaarta jilitaanka ah iyo akhrinta.

5 Tusi hab dhaqan wanaagsan oo dhinaca dugsiga iyo waxbarashada. U muuji xiiseyntaada sida carruurtaada ay ku sameynayaan dugsiga. Isku day weydiinta su'aalo fudud sida "Saaxibkaa qaaliga ah ma joogay dugsiga maanta? Miyaad ku sameysay wax cusub dugsiga?" Sidoo kale weydii su'aalaha aanan laheyn "haa" ama "maya" ka jawaab, sida, "Maxaad ku sameysay fanka maanta?" Haddii aad awoodid, hel qaabab looga qeybgalo dugsiga canugaaga. Carruurta yar, waxay aadaan dhabarka boorsadooda habeenka si aad u aragtid shaqada ay sameeyeen iyo si aad u raadisid ogeysiimo muhiim ah ee macalinkooda ka imaaneyso. Ardayda da'weynta ah, la soco in cunugaaga uu ku socdo wadadii uu kula kulmi lahaa heerka fasal adoo jadwal u sameeya kulamada seddexdii biloodba mar lataliyaha hagitaankooda.

6 Xaqiiji inay carruurtaada sameeyaan layliga. Kormeer layliga canugaada habeen walba. Weydii inay sharaxaan waxa ay baranayaan. Xaqajiishaqooyinka ay dhameystiranyihiin. Haddii ay suurtogal tahay, hel meel dagan oo u leh iftiin wanaagsan carruurtaada si ay ugu bartaan, oo u diyaari waqti maqrib walba oo layliga ah. Dami telefeshinka inta lagu jiro waqtiga layliga. Haddii carruurtaada ay inta badan dhahaan inaysan jirin layliga loo xilsaaray, la hubi macalinka. Weydii haddii macalinka u isticmaalayi Bogga Qoyska SIS ama websaydyada kale si aad u wadaagtid shaqooyinka iyo macluumaad kale, oo iska diiwaangeli si markaas aad u raacdid hormarka canugaaga.

7 Ku caawi carruurtaada maamulida waqtiga iyo hay'ada. Iska hubi inay haystaan buugga qoraalka ama galalka oo maado walba ah. Isku day inay haysatid waraaq, qalin geed, iyo saadadka kale ee dugsiga. Sii iyaga tallooyinka ee sida loo qaato qoraalo cad oo hoos ku qor dhammaan shaqooyinka dugsiga. Aasaas waqtiga la dajiyay maalinta walba oo sameynta layliga. Carruurta waxay inta badan diirada saaraan wanaaga layliga nasiinyo kaddib iyo jimicsiga jirka qaarkood—laakiin haka tagin illaa jiifka ka hor. Caadi ahaan waxaa wanaagsan in carruurta ay sameeyaan shaqooyinka ugu adag marka koowaad, ka hor inta aysan daalin. Si kastaba ahaatee, mararka qaar waxay caawisaa in diirada la saaro iyada oo lagu bilaabayo wax sahlan.

8 Xaqajii carruurtaada helaan hurdo ku fillan. Carruurta, iyo xitaa qaangaarada, waxay u baahanyihiin ugu yaraan sagaal saacadood hurdo ah habeen walba si ay ugu wanaagsanaadaan dugsiga. Sida waafaqsan Machadyada Caafimaadka Qaranka, canug aan helin hurdo ku filan wuxuu qabaa dhibaatada xoog saarida iyo ka jawaabida dhaqsada ah, oo wuxuu qabi karaa dhibaatooyin badan oo dabeecada ah. Sameynta waqtiga jiifka oo joogto ah waa qaab kale oo sahlan lagu dhiirageli yo waxbarashada.

Waxaa habeeyay colorincolorado.org (illo wanaagsan, oo af Ingiriis ah iyo Isbaanish)

Wixii fikrado dheeraad oo ah caawinta canugaada guriga, weydii macalinka.

### Pie R Squared (Afar-gees)

**Caawinta xisaabta oo bilaash ah ka bilow aasaasyada illaa xisaabinta ardayda dugsiga barbaarinta–fasalka 12**

**Isniinta–Khamiis**
**gudaha hoolka Dhismaha Bolling**
**2300 Washington Street, Roxbury**
**ku xiga xarunta MBTA ee Dudley**
**Ciwaanka: 314piersquared@gmail.com**
**Waalidiinta iyo ardayda ayaa iska diiwaangelin kara meerinta khadka tooska ah.**
**piersquared.org**



### Ma ogtahay...

**Jaamacada Waalidiinta BPS inay ku bixiso kulamo deegaanka dugsiyada, ururrada bulshada iyo maktabadahaba iyagoo ka hadlaya mowduucyo kala duwan ka bilow ka caawinta shaqaqda guri ilmahaaga, carruurnimada hore iyo gudubka dugsiga, STEM iyo ka badan.**

**Wixii macluumaadka dheeraad ah: 617-635-7750**

**bostonpublicschools.org/parentuniversity**

**parentuniversity@ bostonpublicschools.org**

Iskaashiga Qoyska/Dugsiga

# Iskaashiga Qoyska/Dugsiga: Xiriirka Guriga (Socota.)

## Tallooyinka Xisaabta ee Waalidiinta

- ☑ Weydii canugaaga, "Sidee ayaad ku garatay?" iyo "Maxaad ogaatay?" si aad ka fahamtoiyo aad balaarineysid fikirka canugaaga. Dhageyso afkaaraha canugaaga oo ku dhiirageli iyaga si aad u aragtid qaladaha sida qeyb ka ah nidaamka.
- ☑ Isticmaal howsha guriga iyo fursadaha maalin walba si aad ilmahaaga u geliso fekerka xisaabta. Fursadaha maalinlaha ah waxaa ka mid noqon kara:
  - ▶ *La talin iyo Isbarbardhigid:* Weydii su'aalaha sida, "Imisa taraakyo ayaad aragtaa?" "Imisa qof ayaa naga horeyso oo saf ah?" "Ma gelin kartaa toban weelal oo yoogad ah dambiisha?" "Maku jiraan tufaaxyo ama bambeelmo baaquliga?"
  - ▶ *Ku darida iyo Kala goynta:* Weydii su'aalaha ku dhiiragelinayo carruurta inay ka qeybgalaan ku darida iyo ka jarida ee xaaladaha maalin walba: "Waxaad heysataa 6 buskud iyo kadib waxaad cuntay 2 buskud. Imisa buskud ayaa kuu hartay?"
  - ▶ *Ku dhufushada iyo Kala jarida:* Weydii su'aalaha sida "Haddii ay ku jirto baakida 6 xabo oo juus ah, imisa xabo juus ayaa ku jiro 3 baakid?"
  - ▶ *Joometriga:* Weydii canugaaga inu sharaxo oo is barbardhigo qaababka adiga oo lugeynayo.
  - ▶ *Cabirida:* Isticmaal mastarad ama qalab kaloo xisaabin ah si aad u heshid dhirirka sheeyada kala duwan ee gurigaaga. Canugaaga ha is barbardhigo baaxada sheeyadaan.
  - ▶ *Jajabyada:* "Haddii helitaankaan u yeero ¼ koob sonkor ah oo aan rabno inaan labo jibaarno helitaanka, inta sonkor ah ee aan u baahannahay?"
- ☑ Baro sida guriga loogu caawiyo adoo isticmaalaya ilahaan shabakadda:
  - ▶ Khariiradaha Waalidka Muhiimada Guud Heerarka Gobolka ee Xisaabta, **www.cgcs.org/Page/244**
  - ▶ Hagayaasha qoyska oo ay ku jiraan xisaabta: **www.doe.mass.edu/highstandards**
  - ▶ Hagayaasha Waalidiinta ee Guusha Ardayda oo sidoo kale ku jirto xisaabta: **www.pta.org/home/family-resources/Parents-Guides-to-Student-Saiding**
  - ▶ Caawinta shaqada guriga iyo xiriiriyeyaal badan oo ku saabsan ilaha: **figurethis.nctm.org/fc/family_corner.htm**
  - ▶ Fiidiyowyo loogu talagalay qoysaska ay ka muuqdaan barayaasha Boston oo ka hadlaya Muhiimada Guud Heerarka Gobolka ee Xisaabta: **nctm.org/standards-and-positions/common-core-state-standards/teaching-and-learning-mathematics-with-the-common-core/**
- ☑ La xiriir macalinka si aad u baratid haddii canugaaga uu ka shaqeynayo heerka fasalka iyo waxa qoyska ku sameyn karo guriga si looga caawiyo sare u qaadida hormarka waxbarashada. Dugsiyo badan waxay u hayaan leeyihiin Habeenada Xisaabta oo waalidiinta ay wax uga bartaan qaabka dugsiga ee tilmaamaha xisaabta.

## Tooyinka Akhrinta ee Waalidiinta

- ☑ Ku ciyaar xarfaha alifbeetada kuna carbi dhawaaqa xaraf shaqsiyeed carruurta aadka u yar. Isticmaal dhawaqyada, xeesaha, tilmaamaha, erayada u eg inay dhisaan luuqada iyo isticmaalka luuqada. La baashaal luuqada!
- ☑ Kor ugu aqri cunuggaaga maalin walba.
- ☑ Canugaaga oo aqrinayo, tilmaan hingaada iyo naqshadaha dhawaqa sida mukulaasha, taabashada, koofiyad.
- ☑ Ka tilmaan erayada daabacan gurigaaga iyo meelaha kale ee canugaaga aad geysid.
- ☑ U ogolow inay carruurta yar u aqriyaan si dhawaq dheer habeen walba (xittaa buuggaagta majaajilada waa caadi), oo si dhawaq dheer ugu aqri canugaaga, oo af Ingiriis ah ama luuqada guriga loogu hadlo.
- ☑ Dooro meel dagan, oo aan carqalad laheyn, ee canugaaga sameeyo shaqooyinka akhrinta habeenka.
- ☑ U ogolaanshaha canugaaga inuu arko inaad aqrisid waxay kicineysaa dareenkiisa.
- ☑ Weydii canugaaga su'aalaha ku saabsan dabeecadaha iyo dhacdooyinka sheekada la akhriyay. Weydii sababta ay ugu maleyso in sifada lagu matalay qaabka gaarkood. Weydii inay taageerto jawaabta lagu siiyay macluumaad ka imaaneyso sheekada.
- ☑ Geey canugaaga maktabada ama dukaanka buuggaagta inta badan ee aad awoodo. Ku caawi inuu codsado kaarka Maktabada Bulshada Boston—waa bilaash!
- ☑ Ku dhiirageli canugaaga inuu aqriyo buuggaag badan oo kala duwan iyo qoraalada onleenka ee baraa waaya aragnimada iyo fursadaha laga yaabo inuu canugaaga ka fakerayo.
- ☑ Eeg haddii cunugaada uu aqrinayo buug kuxiran filim (taxanaha Harry Potter, tusaale ahaan) oo isbarbar dhig oo kala-duw akhriska iyo laqabsiga filimka.
- ☑ Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu wax qoro badanaa adoo xafidaya joornaalka ama xusuus qor maleyntooda, fikradaha, ama xiisaha.

## Maxaan ugu aqriyaa canugeyga?

Carruurta way jacelyihiin markii waalidkooda ama, canug weyn, ama qof kaloo weyn u aqrinayo iyaga–iyadoo ah hawl muhiim ah ee lagu caawinayo carruurta inay noqdaan kuwa jecel akhrinta

**Gabadheyda waxay ku aqrin kartaa buugaagta lafsadeeda. Miyaan weli u aqriyaa iyada?**

Haa! Wax u aqrinta cunugaada waxay sare u qaadeysaa xirfadaha dhageysiga qoto dheer iyo fahamka, qaasatan buugaag aad ugu adag inay aqristaan kaligood.

**Sideen ugu doortaa cunnugayga buugaag wanaagsan?**

Tixgeli xiiseynta ilmahaaga ee xulashada buugaagta. Dooro buugag kuwaas oo dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan xiiso leh oo u soo bandhig fursado wax looga barto adduunkooda kala geddisan Maktabadaadu sidoo kale wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho buugaagta carruurta lagu abaalmariyo.

**Maxay tahay inuu canugeyga aqriyo?**

Carruurta waa inay aqriyaan qoraalada: sheekooyinka, aan sheekada aheyn, qiyaaliga, taariiq nololeedka, heesaha xanaanada, qoraalada mustaqbalka, qorkiisa, iyo saboolnimada. Tallooyinka jadwalka joogtada ah ee maktabada. Maktabadda waa illo cajiib ah ee lagu caawinayo carruurtaada inay helaan buuggaag ay jeclaanayaan.

# Xeerka Dalacsiinta iyo Qiimeynta
# Xeerka Dalacsiinta Boston Public Schools

Boston Public Schools (BPS) waxaa ka go'an hubinta in qalinjabin walba ay tahay ardayga nolosha dheer, shaqaalaha wax soo saarka leh, muwaadinka masuulka, iyo ka qeybqaataha fikirka leh ee bulshooyinkeena kala duwan. Macalin walba, maamulaha, waalidka/masuulka, iyo qofka weyn ee ku lugleh nololaha ardayda BPS waxay wadaagaan masuuliyada lagu caawinayo dhammaan ardayda waxay buuxiyaan filashooyinkaan.

Xeerka Dalacsiinta wuxuu xoojiyaa filashooyinka iyo masuuliyadaha lagu dajiyay Heerarka Waxbarashada Magaaladda oo dhan ee BPS. Xeerka Dalacsiinta:

- wuxuu qeexaa filashooyinka aan haysano ee dhammaan ardayda iyo xeeladaha ee dugsiyada ay u isticmaalayaan inay ku caawiso guushooda
- waxay hubisaa dalacsiinada in la helay oo ay ku saleysantahay guusha waxbarashada
- waxay yareysaa sida badan ee suurtogalka ah baahida ardayda ay ku celiso fasalka
- waxay hubisaa in ardayda ay bilaabaaan sannad dugsiyeedka dugsi walba oo ay la jirto xirfadaha iyo cilmiga ay uga baahanyihiin inay sameeyaan shaqada heerka fasalka, iyo in qalin jabinta si wanaagsan loogu diyaariyay waxbarashada dugsiga sareeyo, nolosha qofka weyn, iyo shaqada
- waxay hubisaa in ardayda ay u diyaar gareysanyihiin inay baasaan Nidaamka Qiimeynta Dhameystiran ee Massachusetts (MCAS), imtixaan loogu baahanyahay qalinjebinta
- waxay aasaastaan nidaamka ku taageero ardayda oo dalbado shaqo adag oo iyaga ka timid
- aqoonsataa in ardayda ay wax ku barato jawiyo kala duwan iyo wacitaanada qaabdhismeedka hay'ada ee ka jawaabo kala duwanaanshaha ardayga, iyo
- wuxuu qeexaa qaababka macalimta, maamulayaasha, ardayda, iyo waalidiinta  ay xisaabtan leeyihiin.

## Sharuudaha Dalacsiinta ee Dhammaan Fasalada

Ardayda waa inay buuxiyaan dhoor sharuudo si loogu dalacsiiyo fasalka xiggo. Dhammaan ardayda waa inay helaan buundooyinka baasitaanka ee koorsooyinka qaarkood oo joogteeyaa ka qeybgal wanaagsan.

Dugsiyada waxay aasaasi karaan sharuudaha dalacsiinta ee dhaaftaa kuwa ku qoran boggaga 18–23. Gollaha Aaga Dugsiga waa inay anisixiyaan sharuudahaan dheeraadka ah.

Boston Public Schools waxay eegayaan sharuudaheeda qalinjabinta si markaas si wanaagsan loogu waafajiyo iyaga Waaxda Massachusetts ee filashooyinka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (DESE) iyo Barnaamijka Dugsiga Sare Muhiimka ah ee Massachusetts ee Daraasada. Fadlan fiiri bogga 23.

## Ardayda Ingiriiska

Ardayda ku jira barnaamijyada ardayda Ingiriis Baradka (EL) waa inay buuxiyaan sharuudaha dalacsiinta iyo qalinjabinta. Si kastaba, ardayda EL-ka ma aha in la reebo haddii sababta kaliya ee aan loo baasin imtixaamada loo baahanyahay ay tahay aqoon la'aanta luuqada Ingiriiska. Ardayda waxay geli karaan labada luuqad (eray ku eray) qaamuusyada inta lagu jiro dhammaan qiimeynada la heereeyay markii laga reebo kuwa qiimeynayo xirfadaha luuqada Ingiriiska iyo cilmiga. Ardayda Ingirisiiska dhigta ee kujira sanadkoodii koobaad ee ay dugsiga Maraykanka kuyaala iskaqoreen lagama doonaayo inay qaataan imtaxaanka MCAS ELA marba haday kaqaybgalaan Imtaxaanka Sanad laha ah ee Aqoonta Afka Ingiriisiga lagana qaado ardayda Ingiriiska barta.Ardayda Ingiriisi Baradka ah, sida dhammaan ardayda, waa inay buuxiyaan shuruudaha degmada ee qalin-jabinta iyo gudubka.

English Learners, like all students, must meet district requirements for graduation and promotion. Haddii ardaygu ku galo BPS fasal dugsiga sare, waxaa si weyn lagula talinayaa in qoysasku ay soo gudbiyaan waraaqda dugsigoodii hore (dhibcahooda0 si ay BPS u go'aamin karto haddii waxbarashadoodii hore loogu tixgalin  lahaa shuruudaha qalin-jabinta.

## Ardayda leh Curyaannimada

Ardayda qaba curyaannimada waxaa laga filanayaa inay buuxiso sharuudaha dalacsiinta iyo qalinjabinta. Barnaamijka Waxbarashada Ardayda La gaareeyay (IEP) ama Qeybta Qorshaha 504 wuxuu sharaxayaa sharuudaha taagan ee ah in ardayga qaadanayo imtixaamada la gaareeyay ee maado walba ee balansan qiimeynta, ama haddii ardayga u baahanyahay qiimeyn kale. Qiimeynta kale waxaa loogu talo galay tiro aad u yar ee ardayda leh curyaannimo weyn ee aan u suurtogaleynin inay qaataan imtixaamada heerka MCAS, xittaa oo ay la jirto hoy. Qorshaha 504 ee ardayga wuxuu sharaxayaa waxa, haddii wax jiraan, hoyga imtixaanka ee loo baahanayo.

### Buundooyinka Baasitaanka ee Koorsooyinka

Booska macalimiinta buundooyinka ay siiyeen ardayga ee xaqiiqo dhoor ah, oo ay ku jiraan:

- buundooyinka imtixaamada fasalka
- dhameystirka badeecada loo baahanyahay–tusaale ahaan, buugga wargelinta ama mashruuca sayniska. Xeerka Dalacsiinta wuxuu dhahayaa fasalada ardayga ee badeecooyinkaan waxaa loo xisaabinayaa ugu yaraan boqolkiiba 20% ee dhammaadka sannadka fasaladooda
- shaqooyinka layliga
- ka qeybqaadashada wadahadalada fasalka iyo howlaha
- buuggaagta-qoraalka
- imtixaanada Magaaladda oo dhan oo af Ingiriis, xisaabta, taariiqda/cilmiga bulshada iyo sayniska/cilmiga farsamada.

baasitaanka fasalka oo koorso walba ah, imtixaanka fasalka, ama shaqada waa 60% ama ka sareyso.

### Ku haynta Dabagalka Hormarka

- Waalidiinta  waxay ogeysiin karaan wax ku saabsan hormarka carruurtooda oo illaa:
- Dhinaca Ardeyda af Ingiriisiga Baradka ah, waalidiinta waxay helayaan warbixinta dhammaadka sanadka ee ku saabsan horumarka ay sameeyeen ilmahooda dhinaca barashada Ingiriisiga.  Haddii ilmahaagu aanu sameynin horumar, degmada ayaa looga baahan yahay inay kugu wargaliso ikhtiyaarkaaga (waxa kuu furan) iyo ilaha loo baahan yahay si loo taageero ilmahaaga. Tani waxay u baahan kartaa kulan lala yeesho macallinka iyo maamulaha. Aad bay muhiim u tahay in aad akhriso oo aad ka jawaabto waraaqda laguu soo diro.

Sare u qaadida iyo Qiimeynta

# Xeerka Dalacsiinta iyo Ka qeybgalka Dugsiga

Intaa waxaa dheer buuxinta sharuudaha waxbarashada, ardayga waa inuu buuxiyaa sharciyada gobolka iyo sharuudaha BPS oo ka qeybgalka dugsiga ah. Ka qeybgalka cajiibka ah iyo guusha dugsiga waxay ku socdaan gacan ku gacan. Ardayda sida joogtada ah u maqan—la waayay 10% ama in ka badan oo maalmaha dugsiga ah wakhti kasta oo la siinayo—waxay u badan tahay inay dib uga dhacaan fasalladooda oo ay ku adkaato inay ku sii socdaan wadada tacliinta muddada dheer. Intaas waxaa sii dheer, ardayda sida joogtada ah u xaadira waxay u badan tahay inay muujiyaan aqoonta ay u leeyihiin MCAS.

### Xeerka Ka qeybgalka BPS

1. Ardayga waa inuu ka qeybgalaa dugsiga ugu yaraan maalin barkeeda si loogu diiwaaniyo inuu "joogay." La hubi maamulaha ama madaxa dugsiga si aad u ogaatid waxa maalin barkeeda ay tahay. Dugsiyada ugu badan, waa:
   - 3 saacadood oo dugsiga hoose
   - 3 saacadood iyo 5 daqiiqado oo dugsiga dhexe
   - 3 saacadood iyo 10 toban daqiiqo oo dugsiga sare.
2. Ardayda timaado bilowga maalinta waa inay raacaan nidaamyada soo daahitaanka dugsiga si markaas loogu tixgeliyo inay joogeen maalinta.
   - Fadlan ogow in Guddiga Dugsiyada Boston ay ansixiyeen dib-u-habeyn lagu sameeyay nidaamka ka-qeybgalka ee dhaqan-galka sannad-dugsiyeedka 2021-2022. Isbedelada muhiimka ah waxaa ka mid ah:
     - Dugsiyadu mar dambe uma rogi karaan tacdiyada maqnaanshaha, oo ay ku jiraan dugsiyada sare.
     - Si loo fududeeyo qiimeynta ku saleysan aqoonta ee degmada oo dhan, dugsiyadu mar dambe ma sii meeleyn karaan darajooyinka "Amaah La'aan(NC)" ee ardayda. Tilmaamaha soo socda ayaa la bixiyay oo ku saabsan soo kabashada dhibcaha ardayda:
       - Ka gudubka darajooyinka waa inay ahaadaan kuwo ku saleysan karti, taasoo saameyn ku yeelan karta ka qeybgalka shaqada dartiis ama howlihii iskuulka, laakiin waa inaan lagu xirin kaliya ka qeybgalka ama kaqeybgalka.
       - Waa lama huraan in dugsiyadu ay goor hore la shaqeeyaan oo inta badan ardayda halista ugu jirta inay ku dhacaan fasalka.
       - Beddel ahaan, dugsiyadu waxay u calaamadeyn karaan arday "aan dhammaystirnayn" fasalka si ay awood ugu yeeshaan soo kabashada barashada sinnaanta.
       - Xaaladaha oo dhan, ardayga aan helin fasalka ku-gudubka waa in la siiyaa fursad iyo mas'uuliyad uu si siman ugu soo ceshado wixii lumay waxbarashadii ama u dhammaystiro shaqadii ka maqnayd muddadii sixitaanka si uu u kasbado ka gudubka fasalka.

### Kaladir Hore

Waa muhiim in canugaaga dugsiga ku jiro muddada maalinta dugsiga. Ka ceyrinta hore waa inuu dhacaa kaliya dhacdada degdega, iyo qoraal waa in la siiyaa maamulada dugsiga si loo xaqiijiyo oo loo ansixiyo sababta ka ceyrinta hore.

### Maqnaashaha Laga cudur daartay

Maqnaanshaha qaarkood waa laga cudurdaari karaa, taasoo la micno ah inaan loo tixgelin doonin maxaa yeelay waxay la xiriirtaa u diritaanka maxkamadda joojinta Kormeeraha Imaatinka sida uu qabo Sharciga Guud ee Massachusetts (M.G.L. c.119). Si kastaba ha noqotee, waxaa muhiim ah in la fahmo in dhammaan waqtiga waxbaridda la seegay ay leedahay awood ay si xun ugu saameyso natiijooyinka ardayda. Intaas waxaa sii dheer, maqnaanshaha oo dhan waxaa lagu darayaa sida ay ula xiriiraan maqnaanshaha joogtada ah, iyadoo aan loo eegin haddii maqnaanshaha cudurdaar laga leeyahay ama aan cudurdaar lahayn. Maqnaanshaha waa laga cudurdaaranayaa, ardayda waa inay keenaa qoraalka kadib maalin walba ay maqanyihiin.

- Qoraalka waa inuu ku daraa taariiqda maqnaanshaha, sababta maqnaanshaha, lambarka taleefonka ee waalidka ama masuulka, iyo saxiixa waalidka ama masuulka.
- Qoraalka waa in la bixiyaa marka lagu soo noqdo dugsiga, ugu dambayn toddobada maalmood ee dugsiga maqnaanshaha ka dib.
- Maqnaashooyinka laga cudur daartay waxaa ku jiro:
  - jirrada ama dhaawaca ka hor istaago ardayga ka qeybgalka dugsiga.
    - Haddii jirrada ama isbitaal dhigistu ay keento maqnaansho saddex maalmood ama in ka badan oo isku xigta, qoraal ka socda daryeel caafimaad oo diiwaangelinaya dhibaatada caafimaad ama isbitaal dhigista waa in lagu lifaaqaa qoraalka waalidka / daryeelaha.
    - Waalidiinta/daryeelayaasha lagama filayo inay warqad kahelaan bixiyaha xanaanada caafimaadka jirro kayar seddex maalmood.
    - Shuruudahaan waxaa lagu hagaajin karaa iyadoo lagu saleynayo hagitaan caafimaad oo gaar ah. La xiriir kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga wixii su'aalo ama isbeddel ah ee ku saabsan nidaamkan iyadoo lagu saleynayo xaalado gaar ah.
  - dhimashada qoyska u dhow (waalidka, walaalaha, awowga/ayeyda, eedada, adeerka, ina adeerka; fadlan keen kobiga barnaamijka tacsida) ama dhibaato kaloo weyn ama shaqaaqado qoyska ah
  - Ka joojinta Ardayda waa in loo calaamadeeyaa inay ganaax yihiin. Kiisaska ka joojinta, dugsigu wuxuu ardayga siinayaa fursad uu ku joogteeyo joogitaanka tacliimeed ee dugsiga iyadoo la siinayo liistada shaqooyinka iyo adeegyada kale ee u suurtogelin kara ardayga inuu u isticmaalo waqtiga ka maqnaanshaha dugsiga wax soo saar leh.
  - Ardayda loo qoondeeyay Succeed Boston waxuu dugsiga u qoondaynaya shaqo meeleyn ah waxaana loo calaamadeyn doonaa inay ganaaxeen.
  - ka qeybgalada maxkamada Ardaydu waa inay keenaan caddeyn muujineysa waxa looga baahan yahay imaatinka maxkamadda.
  - baaritaanada caafimaadka ama cilmi nafsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga. Waalidka waa inuu tusiyaa cadeynta (sida qoraalka ka imaaneyso xarunta caafimaadka) in baaritaanada aan la balamin karin dugsiga kadib
  - booqashooyinka dugsiyada waxbarashada gaarka ah ee dacwadaha qaarkood ee ardayda qabta curyaannimada
  - Xaalado Kale: Waqti ka waqti, xaaladaha dugsiga, waalidka/daryeelaha, iyo ardayguba ay yar yahiin ama aynan lahayn xakameyn waxay sababi karaan maqnaansho (tusaale ahaan, gaadiid aan shaqeyneyn inta lagu jiro cimilada xun) Maqnaanshahani waa la cudurdaaran karaa. Hogaamiyaha dugsiga ayaa go'aamin kara in ardayda ay saameysay lagu calaamadin doono maqnaansho cudurdaar ah.
  - xaaladaha kale aan caadiga aheyn ee ay ansixiyeen Gollaha Aaga Dugsiga.
  - Fasaxyo dhaqameedka iyo fasaxyo diimeedka.
- Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan maqnaanshaha cudurdaarka ah waxaa laga heli karaa Wareegtada Kormeeraha guud ee imaanshaha (ACA-18).
- Absences that do not meet the above criteria will be considered unexcused. Dhammaan xaaladaha maqnaanshaha ardayga, ardayda waa in la siiyaa fursad ay si siman ugu soo ceshan karaan wixii ka lumay shaqadooda ama luminta waxbarashadooda inta lagu jiro xilliga sixitaanka.

### Waa maxay Maqnaashaha Laga cudur daartay?

Waalidiinta qaarkood waxay u moodaan in maqnaasho walba laga cudur daaran karo haddiiba waalidiinta ogeysiin soo diraan. Tani dhab ma ahan. Halkaan waa dhoor tusaalooyinka ee maqnaashaha aan laga cudur daraan—xitaa haddii waalidka soo diro ogeysiin:

Maqnaanshaha soo noqnoqda ee jirrada ama dhaawaca dartiis iyada oo aan warqad laga helin bixiyaha daryeelka caafimaadka oo lagu xaqiijinayo in ardaygu aad u jiran yahay ama u dhaawacan yahay inuu aado dugsiga. Ardayda maqnaan doonta 14 maalmood ama ka badan inta lagu jiro sanad dugsiyeed jirada ama dhaawaca dartiis waa in loo gudbiyaa Barnaamijka Tilmaamaha Guriga iyo Isbitaalka (eeg bogga 25).

- ardayga u baahan xanaanada
- ogoynta fasalka (oo ay ku jiraan imaanshaha iyo ka tigitaanka dhismaha xili hore)
- fasaxa qoyska inta lagu jiro xilli dugsigu uu furan yahay

# Xeerka Dalacsiinta iyo Ka qeybgalka Dugsiga

- safarka ku socdo wadanka hooyo ee laga badiyay wax dhaafsan fasaxa dugsiga
- kordhinta fasaxa diinta ama dhaqanka ee dhaafsan maalinta loogu talogalay ama maalmaha kaleendarka dugsiga.

Marwalboo suurtogal ah, waalidiinta  waa inay la eegaan maamulaha ka hor inta aan loo ogolaan canuga inuu dugsiga ka qanaado haddii aysan hubin maqnaanshaha in laga cudur daaranayo. Macalimiinta ma lahan ogolaanshaha ah in ardayga uga cudur daartaan dugsiga.

Ardayda waa in la siiyaa fursad iyo masuuliyad ay si siman ugu soo ceshadaan wixii lumay waxbarashadii ama ay ka dhigaan shaqadii ka maqnayd muddadii sixitaanka si ay u kasbadaanka gudubka fasalka.

Ardayda qaba lix ama ka badan ee maqnaashooyin aan laga cudur daaran waxaa soo gudbinayo macalinka ama maamulaha/madax dugsiga ee Kooxda Taageerada Ardayda dugsiga (SST). SST waxay dib u eegeysaa dacwada oo kala shaqeyso qoyska inay hormariyaan qorshaha lagu caawinayo ardayga inuu hormariyo ka qeybgalka.

➲ Wixii ka qeybgal buuxo iyo Xeerka Waqti illaalinta, fadlan booqo **bostonpublicschools.org/domain/1884** and click the Academics folder. Xeerka waa **ACA-18.**

### Waqti illaalinta

Ardayda timaado kadib bilowga maalinta dugsiga way soo daaheen. Waa inay raacaan nidaamyada soo daahitaanka aasaasan si markaas loogu tigeliyo inay joogeen maalinta. Dhammaan ardayda waxaa laga filanayaaa inay imaadaan dugsiga waqtigiisa maalin walba. Waa xeerka Guddiga Dugsiga Boston (la ansixiyay Maajo 24, 2006) wuxuu sheegaya in ardayda soo daahdo waxaa qasab ah in loo ogolaado dhismaha dugsiga iyo ma ahan in laga reebo.

Waa muhiim in la xasuusto in sharuuda ah in ardayda soo daahdo laga diiwaangeliyo dugsiga aanan simmin nasiinyada sharciyada ee daboolayo ka qeybgalka ama soo daahitaanka.

### Kormeerayaasha Xaadirinta

Xiriirinta shaqaalaha dugsiga ku saleysan, kormeerayaasha imaatinka BPS ayaa baaro iyo inay bixiyaan ka hortag iyo ka-dhexgalka taageerida si wax looga qabto dhibaatooyinka imaanshaha joogtada ah Waxay ka shaqeeyaan bulshada, booqdaan guryaha, oo la taliyo ardayda iyo qoysaskooda. Markii ay muhiim tahay, kormeerayaasha ka qeybgalka ayaa xareeyo oo matalaa dacwadaha daran ee Maxkamada Dalaanta Boston.

## Taageertaa Ardayda U baahan Caawin Dheeraad ah in Sare loogu qaado

Xiliga dhammaadka Sebteembar, dugsi walba waa inuu siiyo waalidiinta magaca iyo lambarka taleefonka ee shaqaalaha dugsiga (intaa waxaa dheer macalinka canugaaga) kaas oo iyaga ay wici karaan haddii ay qabaan walaacyada ku saabsan hormarka canuga.

Bartamaha buddada buundeyn walba, dugsiga waa inuu soo diraa “ogeysiimada” waalidiinta  ardayda ee halista ugu jiray dhacitaanka. Jadwalka muddada buundeynta waxay ku jirtaa gudaha gadaasha galka Jaheyntaan.

Xiliga bartamaha Oktoobarta, macalimiinta waa inay aqoonsadaan ardayda halista ugu jiro inaysan buuxin sharuudaha heerarka heerka fasalka. Waa inay ku ogeysiiyaan waalidiinta  qoraal ahaan dhibaatada. Dugsiga wuxuu tixgelin karaa kala duwanaanshaha dooqyada lagu caawinayo in ardayga guuleysto, sida:

- meerinta inta lagu jiro ama dugsiga kadib
- badelka jadwalka ama macalinka
- gudbinta bulshada ee adeegyada taageerada ku saleysan.

Xiliga dhammaadka teeram 2, dugsiyada waa inay soo diraan waalidiinta  ogeysiin qoran ee ardayda ku jirta halista ah in la celiyo. Ka bilow Febraayo illaa Juun, dugsiyada waa inay joogteeyaan xiriirka qoraalka ah ee waalidiinta as si ay u soo ogeysiiyaan hormarka canugooda. Koobiyada waraaqahaan waa in feel lagu hayaa.

## Qorshaha Aqoonta Waxbarashada

Ka qeybgalka ardayda dugsiga sare ee aan buuxin ama dhaafin heerka waxqabadka aqoonta (uguyaraan 472 imtixaanka jiilka xiga ama u dhigma 240 dhaxalka fasalka 10 MCAS ee Farshaxanka Luqadda Ingiriisiga iyo / ama uguyaraan 486 imtixaanka jiilka xiga ama u dhigma 240 fasalka 10 imtixaanka xisaabta MCAS) waa inuu lahaadaa Qorshaha Aqoonta Waxbarashada (EPP) si looga caawiyo inay gaaraan aqoon. Madaxa dugsiga ayaa masuul ka ah u xilsaarida shaqaalaha ee lagu naqshadeynayo, lagu fullinayo, oo lagu xiriiranayo EPPs. EPP waxaa ku jiro:

- Dib u eegida kartiyada ardayga iyo daciifnimada ku saleysan MCAS iyo natiijooyinka qiimeynta kale, shaqada koorsada, fasalada, iyo tallada macalinka;
- Koorsooyinka ardayga waa inay qaataan oo si guul ah u dhameystiraan fasalada 11 iyo 12 ee meelaha mawduuca laxariira; iyo
- Sharaxaada qiimeynta ardayga wuxuu qaadaneysaa sannad walba si loo go’aansado haddii isaga ama iyada ay hormar sameyneyso oo dhinaca aqoonta ah.

Ardayda leh EPPs waa inay buuxiyaan sharuudaha EPP iyo buuxiyaan ama dhaafaan Baahiyada Hormarinta marinka (buundada daboolan oo ugu yaraan ah 220) ee ELA iyo fasalka Xisaabaha 10 imtixaanada MCAS (ama lagu abaalmariyaa Racfaanka waxqabadka MCAS oo arinta maadadaas) si markaas looga qalinjabiyo.

Macluumaad dheeri ah ee EPP: **www.doe.mass.edu/ccte/ccr/epp/**

Fadlan weydii madaxa dugsiga ilmahaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan EPP.

## Dadajinta Machadyada

Dadajinta Waxabarshooyinka waxay dhacdaa inta lagu jiro isbuucyada fasaxa Febraayo iyo Abriil. Waxay siiyaan waxbarasho degdeg ah ardayda ku jirto fasalada 3–12 kuwa inta badan u baahan taageero dheeraad ah ee ELA iyo xisaabta dugsiyada waxqabadka hoose ee degmada.

## Machadyada Waxbarashada Kuleelaha

Ardayda ku jirto fasalada K-12 waxaa lagu casuumayaa inay ka qeybgalaan Machadyada Waxnbarashada Kuleelaha sida ku saleysan mudnaanadaan:

1. Ardayda aanan weli buuxin BPS cabirada, ama cida halis ugu jirto haddii aan lagu dalacsiineyn fasalka xigo
2. Ardayda ka faa’ido karto waaaya aragnimada adag ee kuleelaha si aad ugu sameysid faa’idooyin oo u diyaar ah sannadka xiggo
3. Ardayda sida macquulka ah u sameyn karto faa’ioonka waxbarashada ku fillan oo shan isbuuc oo sare loogu qaadayo fasalka xigo.
4. Ardayda aan u qalmin ESY iyo in aaney ka diiwaan gashaneyn barnaamijka degmada ee EL-ka.

## Dib u soo celinta Deynta ee Dugsiga Sare

Ardayda fasalada 9-12 ee ku dhacay maadada koorsooyinka hal ama ka badan oo aan ka maqneyn in ka badan 30 maalmood inta lagu jiray sannad dugsiyeedka joogtada ah baa laga yaabaa in lagu qoro Akadeemiyadda Waxbarashada Xagaaga. Barnaamijku wuxuu siiyaa

# Taageertaa Ardayda U baahan Caawin Dheeraad ah in Sare loogu qaado

ardayda fursada looga soo kabsanayo buundada koorsada si uu u helo buundooyinka oo dhinaca dalacsiinta iyo qalinjabinta. Dhammaan koorsooyinka ugu weyn waa la bixiyay. Ardayda sidoo kale waxay geli karaan koorsooyinka onleenka, taas oo u ogolaato ardayda inay dib u qaataan koorsooyinka ay ka dhaceen. Ardayda waxay qaadan karaan illaa labo koorsooyinka oo qofka ahaan ama onleenka ah.

## Ku celinta Fasalka

Ururka Qaranka ee Dugsiga Cilmu-nafsiga wuxuu leeyahay in dib u dhigida cunuga "ay u egtahay in aysan wax ka qaban dhibaatooyinka canugga soo foodsaarayo," iyo in la hormariyo ardeyga "hadaan la helin taageero dheeri ah umana muuqato xal wax ku ool ah sidoo kale." Guud ahaan, daraasaduhu waxay muujiyeen in caruurta la ilaaliyo aysan ku fiicnayn waqtiga. Haddii go'aanka la gaadho in ardayga lagu sii hayo, waa muhiim inaannu dejino waxa loo qaban doono si ka duwan inta lagu jiro fasalka lagu celinayo. Hagahan hoos ku qoran wuxuu tilmaamayaa habka go'aan gaarista ee ku saabsan kor u qaadista ama sii heynta ardayda.

Haysashada waa in la tixgeliyaa oo keliya marka ay jirto caddayn la'aanta "buuxinta ama dhaafidda heerarka muhiimka ah;" go'aamada waa in lagu saleeyaa caddeyn. Si loo tixgeliyo haynta, waa inay jirtaa caddeyn waxqabadyo kale ah:

1. Ardayga waa inuu dib u eegis ku sameeyaa Kooxda Guusha Ardayga ee ku saleysan dugsiga iyagoo adeegsanaya shuruudaha bartilmaameed iyo waxqabadka tacliimeed ee hadda ardayga.
2. Caddayn cad, qorshaha faragelinta macallinka oo lagu daro isbaarooyinka lala leeyahay qoyska si loo hubiyo isgaarsiinta waqtigeeda iyo joogteynta
3. Kor u qaadida waxay ku xirnaan kartaa ka-qaybgalka iyo dhammaystirka barnaamijyada xagaaga.
4. Hogaamiyaha dugsiga wuxuu yeelan doonaa saxiixa ugu dambeeya (kadib markuu lahadlo dhamaan daneeyayaasha).

## Wadooyinka Kale ee Dibloomada Dugsiga Sare

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay bixiyaan dhawr barnmaaijyo oo ay ku siiyaan ardayda da'da weyn iyo kuwa wali kujira da'ad dugsiga ee ka tagay waxbarashada fursada labaad oolagu helayo dibloomada dugsiga sare.

- Waxbarashada Dadka weyn iyo Adeegyada Bulshada .......617-635-9300
- websaydka BPS: **bostonpublicschools.org/adulted**
- Xarunta Dib uga qeybgalinta (oo ardayda ka dhacay oo rabaan inay ku laabtaan) .........................................................................617-635-2273

# Qiimeynta: Cabirida Hormarka Ardayga iyo Gaaritaanka

Barashadu waa hawl socota. Sannad dugsiyeedka oo dhan, macallimiintu waxay ardayda ku qiimeeyaan wixii ay soo barteen iyo waxa ay sameyn karaan si ay sida ugu wanaagsan ula kulmaan baahiyaha arday kasta. Qiimeyntu waxay u adeegi kartaa ujeedooyin kala duwan, iyadoo kuxiran waqtiga maamulka iyo nooca qiimeynta. Qiimeynta waxaa ka mid ah imtixaannada warqada-iyo-qalin-geedka, imtixaannada ku saleysan kumbuyuutarka, warbixinnada afka iyo qoraalka, waxqabadka, iyo mashaariicda.

- lba, fiiri bogga 18 (dugsigA barbaaarinta–fasalka 5), bogga 20 (fasalada 6–8), iyo bogga 22 (fasalada 9-12).
- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan waxqabadka ilmahaaga, weydii macalinka ama Maamulaha
- Kalandarka qiimeynta ee 2021-2022: **bostonpublicschools.org/page/4753**
- Su'aalaha guud ee ku saabsan qiimaynta: **bostonpublicschools.org/mcas**

## MCAS

Arday kasta oo dhigta fasalada 3-10 oo dhigta dugsi dadweyne ee Massachusetts wuxuu galaa qiimeynta manhajka guud ee gobolka oo dhan, **MCAS (Nidaamka Qiimaynta Buuxda ee Massachusetts)**. Maaddooyinka imtixaanka MCAS waxay ku kala duwan yihiin heerka fasalka waxaana ka mida xisaabta, iyo sayniska iyo teknoolajiyadda / injineernimada (STE).

Jiilka Cusub ee Qiimaynta MCAS 2.0 waxaa loogu talagalay in lagu saadaaliyo u-diyaar ahaanta ardayga ee kuleejka iyo inuu u lasocdo heerarka manhajka gobolka Massachusetts. Imtixaannada waxaa loogu talagalay in lagu qaato kombiyuutarka, laakiin warqadaha iyo qalin qorista ayaa sidoo kale la heli karaa.

Macalimiinta , waalidiinta , iyo ardayda waxay isticmaalaan natiijooyinka imtixaanka ee:

- la soco hormarka ardayga
- aqoonso awooda, daciifnimada, iyo nusqaamaha manhajka iyo waxbarida
- uruurinta macluumaadka loo adeegsan karo hagaajinta waxqabadka ardayda
- aqoons ardayda laga yaabo inay u baahdaan taageero tacliimeed oo dheeri ah
- aqoonso kobaca tacliinta ee ay ardaydu ka sameeyeen min hal fasal ilaa kan xiga.

Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare ee Massachusetts (DESE) waxay isticmaashaa natiijooyinka MCAS iyo xogta kale ee lagu go'aansanayo haddii dugsiga degmooyinka ay buuxinayaan heerarka sare loogu qaadayo waxqabadka waxbarashada ardayga. Intaa waxaa dheer, wargelinada DESE ee hormarka iyo waxqabadka dugsiyada iyo degmooyinka sida ku saleysan natiijooyinka MCAS. Ka fiiri bogga 53 wixii macluumaad dheeraad ah.

## Sharuuda Qalinjabinta MCAS

Si looga qalinjabiyo dugsiga sare, ardayda waa inay ka helaan Hufnaanta Kartida ee ELA, Xisaabaha, iyo Sayniska iyo Cilmiga farsamada/ Injineernimada (STE) sidoo kale buuxiyan sharuudaha shaqada koorsada iyo soo xaadirka. [Si aad u kasbato CD, ardayda dugsiga sare waa inay ku guuleystaan dhibco miisaan oo ugu yaraan 240 ah "dhaxalka" fasalka 10 ee imtixaanka MCAS ELA iyo Xisaabta (ama dhibcaha 472 ee "jiilka dambe" ELA iyo dhibcaha 486 imtixaanka Xisaabta ee "jiilka soo socda"); oo aad kasbato dhibco miisaan ah ugu yaraan 220 imtixaanka MCAS STE ee "dhaxalka" dugsiga sare mid ka mid ah afar maaddo (Bayoolaji, Kimistariga, Hordhaca Fiisigiska, ama Teknolojiyada / Injineeriyada). Ardayda hela dhibcaha u dhexeeya 220–238 ee fasalka 10 ELA iyo Xisaabta waa inay si guul leh u

# Cabirida Hormarka Ardayga iyo Gaaritaanka

dhammaystiraan Qorshaha Aqoonta Waxbarashada (EPP).] Si aad u hesho Hufnaanta Kartida ee ELA iyo/ama Xisaabaha, ardayga waa inuu gaaraa heerka waxqabad wanaagsan ama sare ee imtixaanada MCAS ee fasalka 10. Ardayda keenta heerka waxqabad oo wali u baahan in la kobciyo dhina ELA iyo / ama xisaabtu waa inay sidoo kale buuxiyaan shuruudaha Qorshaha Aqoonta Waxbarashada (EPP), oo ah qorshe khaas ah oo ay ku jiraan shaqo koorso dheeri ah iyo qayb qiimeyn ah. Si aad uga heshid CD gudaha STE, ardayga waa inuu gaaraa heerka waxqabadka ee Sare u qaadida Baahiyada ee hal ka mid ah imtixaanka Sayniska dugsiga sare MCAS (Bayaaloji, Fiisikis, Jimistari, ama Cilmiga farsamada/Injineernimada).

## Habka Go'aaminta Kartida Wax laga beddelay

Xaaladaha degdega ah ee COVID-19 awgood, Guddiga Dugsiyada Hoose iyo Sare (BESE) waxay u codeeyeen in si ku meelgaar ah wax looga beddelo shuruudaha Go'aanka Aqoonta(CD) ee looga baahan yahay ardayda dugsiga sare qaarkood ee aan ka gudbin imtixaanka MCAS. Isbedelkan, ardayda qaarkood waxay kasban karaan CD-kooda iyada oo loo marayo dhameystirka guusha ee koorsada dugsiga sare ee khuseysa, sida ku cad shuruudaha hoose:

Ardayda fasalada 2020 - 2022, CD-ga waxaa lagu bixin doonaa maaddo kasta sida soo socota:

farshaxanka luuqada Ingiriiska iyo xisaabta luqadda Ingiriisiga - marka la caddeeyo degmada in ardaygu kasbaday buundo buuxda oo ah koorso ku habboon oo la jaanqaadaysa qaab-dhismeedka manhajka ku habboon ee maaddadaas oo uu muujiyey kartida maaddadaas.

Sayniska iyo Teknolojiyada / Injineerinka - marka shahaadada degmada laga helo in ardaygu ku kasbaday koorso maadada la xiriirta isla markaana muujiyey karti mid ka mid ah afarta maaddood ee sayniska (Bayoolaji, Kimistariga, Fiisigiska hordhaca, ama Teknolojiyadda / Injineeriyadda) intii ay ku jireen dugsiga sare. shaqo.

Ardayda ku jirta fasalka 2023, CD-ga Sayniska iyo Teknolojiyada / Injineerinka waa la siin doonaa marka la muujiyo in ardaygu uu kasbaday buundo maaddo la xiriirta isla markaana muujiyey karti uu ka qaatay mid ka mid ah afarta maaddood ee sayniska (Bayoolaji, Chemistry, Hordhac Fiisigis, ama Teknolojiyad / Injineerin) intii ay ku jireen xirfadooda dugsiga sare.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka CD-ga wax laga beddelay, fadlan la xiriir Madaxa Iskuulka ama Lataliyaha Taageerada Ardayga ee dugsiga ilmahaaga.

## MCAS Performance Appeals

Ardayda aan baasin imtixaanada dugsiga sare MCAS waqtiga koowaad laga yaabo inuu dib u qaato xittaa kadib markay ka tagaan dugsiga sare. Haddii ardayga qaatay imtixaamada ELA iyo/ama Xisaabaha MCAS ugu yaraan sadex jeer ama ka qeybqaatay Qiimeynta Kale ee MCAS labo jeer oo aan baasin, ardayga wuxuu u qalmi karaa inuu helo Codsiga NatiijadaELA iyo/ama Xisaabaha MCAS oo ku xareeyo matalaadiisa/matalaadeeda. Safmarka COVID dartiis, ardayda fasalada 2021 iyo 2022 waxaa laga dhaafi karaa shuruudda racfaanka ee ah qaadashada ELA iyo / ama Xisaabta MCAS ugu yaraan seddex jeer haddii ay qaateen imtixaanadan MCAS ugu yaraan laba jeer.

Si aad ugu qalantid Sayniska Codsiga NatiijadaMCAS, ardayga waa inuu qaataa imtixaanka Sayniska dugsiga sare MCAS ugu yaraan hal waqti (ama dhameystiray Qiimeynta Kale ee MCAS hal jeer) iyo waa inuu hadda ka diiwaangashanyahay fasalka Sayniska ama dhameystiray fasalka 12.

Wixii sharaxaadaha nidaamka iyo sharuudaha u qalmida, booqo websaydka BPS.

La hubi madaxa dugsiga si aad u aragtagtid haddii canugaaga u qalmo in uu ku xareysto racfaan Waaxda Waxbarashada Dugsiga hoose iyo Sare ee Massachusetts.

### Macluumaadka dheeraadka ah oo ku saabsan MCAS

- **bostonpublicschools.org/mcas**
- **www.doe.mass.edu/mcas**
- **www.doe.mass.edu/mcas** > test questions through 2021

## ACCESS loogu talagalay ELL-ka

Sida uu dhigayo sharciga federaaliga iyo gobolka, dhammaan ardayda ah Bartayaalka Luqadda Ingiriisiga ee fasalada K2-12 baa lagu qiimeeyaa sannad kasta imtixaanka ACCESS ee ELL-ka (Qiimaynta Fahamka iyo Isgaadhsiinta Ingiriisiga ee Gobol ilaa Gobol ee Barashada Luqadda Ingiriisiga). Qiimeyntani wuxuu cabbirtaa aqoonta ardeyga ee luqada Ingiriisiga dhinaca dhageysiga, hadalka, akhriska iyo qorista. Waalidiinta Ardayda Barteyaalka Af Ingiriisiga waxaa lagu wargeliyaa horumarka cunugooda iney gaareen aqoonta Ingiriisiga sannad kasta.

## Su'aalaha Marwalba La isweydiiyo

**Ardayda oo dhan miyay qaataan MCAS?**
Haa, ardayda oo dhan ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha Massachusetts ee kujira fasalada la imtixaamo waa inay ka qeyb qaataan imtixaanka MCAS. Tani waxaa ku jirto dugsiyada tijaabada ama jaatarka. Intaa waxaa dheer, ardayda waxbarashada gaarka ah ee ku jiro dugsiyada gaarka ah ee ay maalgeliyeen BPS waa in la imtixaamaa.

**Sidee ayaan ku ogaadaa buundooyinka canugeyga ee 2019 MCAS?**
Waalidiinta waxay ka helayaan warbaxinta natiijada MCAS ee canugooda email ahaan ama ka helaan dugsiga. Natiijooyinka gu'ga 2021 MCAS waa in la soo diraa deyrta 2021.

**Ka waran haddii canugeyga uu ku jiro waxbarashada gaarka ah?**
Dhammaan ardayda waxbarashada gaarka ah waxaa looga baahanyahay inay qaataan imtixaamada, laakin ardayda IEP ama Kooxyada Qeybta 504 waxay sameyn karaan go'aamada la xiriiro imtixaanka ku haboon hoyga. Hoyga imtixaanka waa kale qaabka imtixaan loo bixiyo ama qaabka ardayga uga jawaabo su'aalaha imtixaanka ee la siinayo ardayda fursada lagu muujinayo cilmiga iyo xirfadaha. Nidaamyada waa in si cad ah loogu sheegaa Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee ardayga (IEP) ama Qeybta Qorshaha 504. Ardayda waxbarashada gaarka ah ee u baahan qiimeyn kale waxay qaadanayaan imtixaanada kale MCAS (MCAS-Alt).

**Ka waran haddii canugeyga uu yahay arday Ingiriis ah?**
Dhammaan ardeyda waa inay kaqaybqaataan dhammaan imtixaanada MCAS ee loo qorsheeyey fasalada. Midka ka reeban ee khuseeyaa ardayda ku jira sanadkooda ugu horeeya ay dhiganayaan dugsiyo Maraykan, kuwaas oo imtixaankoodu ELA MCAS waa ikhtiyaari.

Intaa waxaa dheer, dhammaan ardayda Ingiriis baradka ah ee fasalada K2-12 iyada oo aan loo eegin tirada sanadaha inta ay dhiganayeen dugsiyada Maraykanka, waa inay qaataan qiimeynta aqoonta luuqada Ingiriisiga ee sanadlaha ah, Imtixaanka Qiimaynta Fahamka iyo Xiriirka Ingiriisiga-Gobol-ka Gobol ee Bartayaasha Ingiriisiga ( ACCESS ee ELL-ka.) Imtixaanka ACCESS ee ELL-ka wuxuu u kuuro galaa horumarka ardayda ee helitaanka Ingiriisi tacliineedka ee dhincayada akhriska, qorista, dhageysiga, iyo hadalka.



# Dulmarka Sharuudaha Dalacsiinta Elementary School (Grades 1–5)*

**Si looga dalacsiyo Fasalka 5, ardaygu waa inuu…**

- baasay farshaxanka luuqada Ingiriiska (ELA)/Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL) sannad walba
- baasay xisaabta sannad walba
- qaato sayniska iyo taariikhda sannad walbo
- baasay guud ahaan sadex markii laga saaro afar fasal ee sayniska iyo taariikhda ee fasalada 4-5
- qaado waxbarashada jirka sannad walba
- ku qaado waxbarashada caafimaadka/HIV ee fasalka 4
- dhameystir 90 saacadood ee waxbarashada fanka la xiriiro sannad walba (isku celcelis 30 daqiiqo maalintiiba).

*Gollaha Aaga Dugsiga wuxuu u codeyn karaa inuu aasaaso koorsada iyo u imtixaamo sharuudaha dhaafa kuwa ku qoran boggaan.

## Qiimeynta ee Ardayda Ku qaataan Dugsiga Hoose

| Qiimeynta | Fasalada | Ujeedada |
|---|---|---|
| Baaritaanada Qiimeynta Dhammaan Qeybta | 2–5 | Qiimaynta casharadii lasoo baray 4-6 asbuuc ee lasoodhaafay oo maado kasta ah |
| LAP-D (imtaxaanka)<br>EVT<br>MAP Fluency Reading | K0-K2<br>K1<br>K2–2 | La soco oo u fiirso horumarinta xirfadaha da'da ku habboon<br>Waxay cabbiraysaa eraybixin qeexan iyo soocelin erey<br>Akhrinta faseexnimada iyo fahamka ugu yaraan 3 jeer sanadkii |
| Jiilka Cusub ee MCAS 2.0 | 3<br>4<br>5 | ELA iyo xisaabta<br>ELA iyo xisaabta<br>ELA, xisaabta, iyo sayniska iyo tignoolojiyada/farsamada |
| ACCESS loogu talagalay ELL-ka | K2–5 | Akhrinta luuqada Ingiriiska, qoraalka, hadalka iyo xirfadaha dhageysiga ee ardayda luuqada Ingiriiska |
| Qiimeynta Qaranka ee Hormarka Waxbarashada (NAEP) | 4 | Cabbiraadda waxa ardayda Mareykanka ay yaqaanaan oo ay ku sameyn karaan maadooyin kala duwan (oo la siiyo 2dii sanaba mar) |
| Qiimeynta Ku meelgaarka BPS | 2-5 | ELA iyo heerka xisaabta darajada aqoonta |
| Kobaca Akhriska MAP | 3-5 | Shaashadda guud ee akhriska oo bixisa cabbiraadda koritaanka (inta udhaxeysa labada maamul qiimeyn) |

## Tallooyinka Layliga

Shaqa-guriyeedka (ama Xiriirrada Guriga ee K ilaa 2) waa hab muhiim ah oo lagu kobciyo iskaashiga u dhexeeya guriga iyo dugsiga. Intaa waxa dheer, waxay kor u qaadaysaa xirfadaha iyo fikradaha laga sameeyay dugsiga waxayna ku dhiirigeliyaan horumarinta is-dhowrka iyo mas'uulnimada shakhsi ahaaneed.

**Xannaanada:** Toddobaad kasta caruurtu waxay guriga ku qaataan liiska la soo jeediyo ee Hawlaha Xiriiryada Guriyeynta si ay ula qabtaan qoysaskooda. Hawlahani waxay ku saleysan yihiin fikradaha iyo xirfadaha carruurta ay ku barteen fasalka. Qoysasku waxay doortaan ugu yaraan saddex wax-qabadyo oo ka mida liiska si ay u dhamaystiraan inta lagu jiro todobaadka.

**Waqtiga isku celceliska ee lagu taliyay:**

30 daqiiqo maalintii (Akhrinta: 20 daqiiqo, waxqabadyo kale 10 daqiiqo)

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: **www.bpsearlylearning.org/our-curricula**

**FASALADA 1–2**: Toddobaad kasta caruurtu waxay guriga u qaataan Xaashida waxqabadka Guriga ama waraaqda waxqabadka kale ee la xidhiidha cutubka waxbarashada, casharrada khaaska ah ee fasalka ee toddobaadka, halbeegyada khuseeya (ELA, Xisaab, Taariikhda iyo Cilmiga Bulshada, Sayniska iyo injineernimada) iyo xirfadaha loo baahan yahay.

**Waqtiga isku celceliska ee lagu taliyay:**

30 daqiiqo maalintii (Akhrinta: 20 daqiiqo, waxqabadyo kale 10 daqiiqo)

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: **www.bpsearlylearning.org/our-curricula**

**FASALADA 3–5:** Shaqa-guriyeedku waa inuu culays saaraa shaqada maaddooyinka waaweyn oo waa inay ku kala duwanaataa qaabka. Tusaale ahaan, waxaa ku jiri kara layliyo hadal iyo qoraal ah, barashada, nasiino-akhrinta , shaqada qorista ah iyo diyaarinta warbixinnada.

**Waqtiga isku celceliska ee lagu taliyay:**

30-60 daqiiqo maalintii

# Sharuudaha Dalacsiinta Dugsiga hoose: Xanaanada–Fasalka 5

| | | |
|---|---|---|
| **K0–K2** | Ma jiraan sharuudaha dalacsiinta ee ardayda Xannaanada. | |
| **Fasalka 1** | Si loogu dalacsiiyo fasalka 2, ardayda waa inay buuxisaa labadaan sharuud:<br>❶ ELA ama Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL)<br>❷ Hesho darajo ku aflaxeysa xisaabta.. | |
| **Fasalka 2** | Si loogu hormariyo fasalka 3, ardayda waa inay buuxisaa labadaan sharuud:<br>❶ ELA ama Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL)<br>❷ Hesho darajo ku aflaxeysa xisaabta. | |
| **Fasalka 3** | Si loogu hormariyo fasalka 4, ardayda waa inay buuxisaa labadaan sharuud:<br>❶ ELA ama Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL)<br>❷ Hesho darajo ku aflaxeysa xisaabta.. | ▶ baasin ELA/ESL iyo xisaabta ma baasaan imtixaanka aqrinta ee ku helayo ka qeybgalka "Aan dhameystirneyn" waa inuu ka qeybgalaa Machadyada Waxbarashada Kuleelaha haddii la casuumo. Haddii aysan ku baasin labada koorso iyo imtixaanka akhrinta dhammaadka Machadyada Waxbarashada Kuleelaha, waxay ku celinayaan fasalka 3..<br>▶ Haddii ay ka gudbaan akhriska oo ay ka gudbaan shaqada koorsada xisaabta laakiin aan ku aflaxin imtixaanka xisaabta dhammaadka Akadeemiyada Barashada Xagaaga, waxaa loo gudbin doonaa fasalka 4-aad waxayna heli doonaan kaalmo dheeraad ah xagga xisaabta. |
| **Fasalka 4** | Si loogu dalacsiiyo fasalka 5, ardayda waa inay buuxiyaan dhammaan sadexdaan sharuudo:<br>❶ ELA ama Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL)<br>❷ Hesho darajo ku aflaxeysa xisaabta.<br>❸ Hesho darajo ku gudubtay sayniska ama taariikhda | |
| **Fasalka 5** | Si loogu dalacsiiyo fasalka 6, ardayda waa inay buuxiyaan dhammaan sharuudahaan:<br>❶ ELA ama Ingiriiska sida luuqada labaad (ESL)<br>❷ Hesho darajo ku aflaxeysa xisaabta.<br>❸ (a) iyo taariikhda, haddii kaliya mid ka mid ah maadooyinkaan horey loogu baasay fasalka 4; *AMA*<br>(b) Hel buundada baasida ee sayniska ama taariikhda, haddii labada maadooyinkaan lagu baasay fasalka 4. | |

Sare u qaadida iyo Qiimeynta



# Dulmarka Sharuudaha Dalacsiinta Dugsiga Dhexe (Fasalada 6-8)*

**Si loogu dalacsiiyo dugsiga dhexe, ardayga waa inuu ku…**

- ku baas shan markii laga reebo lis koorso oo farshaxanka luuqada Ingiriiska (ELA)/Ingiris sida Luuqada Labaad (ESL) iyo xisaabaha
- ku baas toban markii laga reebo labo iyo toban koorso ee sayniska, taariikhda, xisaabta, iyo ELA/ESL
- buuxi sadexda simistar ee waxbarashada farshaxanka
- buuxi sadexda simistar ee waxbarashada waxbarashada jirka
- buuxi labo oo ah simistar waxbarashada caafimaadka.

*Gollaha Aaga Dugsiga wuxuu u codeyn karaa inuu aasaaso koorsada iyo u imtixaamo sharuudaha dhaafa kuwa ku qoran boggaan.

## Tallooyinka Layliga

Macalimiinta Boston Public Schools waxay aaminsanyihiin in markii ardayga ku isticmaalo waqti shaqooyinka layliga ay tahay wax ku ool ah, waxay aad ugu badanyihiin inay gaaraan guusha waxbarashada. Layliga wuxuu dhisaa shaqada fasalka wuxuuna ku dhiirageliyaaa hormarinta anshaxa iyo masuuliyada shaqsiga. Sidoo kale waa ilo muhiim ah oo sare luugu qaadayo iskaashiga u dhaxeeyo guriga iyo dugsiga.

Arday walba oo ku jira dugsiga dhexe ee BPS ee fasalada 6–8 waa inay eeyihiin layliyada shaqada guriga maalin walboo dugsi. Macalimiinta maadooyinka ugu weyn aagaga waa inay xiriiriyaan shaqooyinka layliga. Maadooyinka qaarkood waa inay ku jadwalaysan yihiin habeeno qaar qaarkood si markaas tirada guud ee shaqooyinka guriga ay is waafaqsantahay maqrib walba oo waxaa lagu buuxin karaa waqtigaan la filanayo. Layliga waa inay ahaataa xaqiiqda kaarka wargelinta buundada ardayga.

**Waqtiga isku celceliska ee lagu taliyay:**

2 saac maalintii

## Qiimeynta ee Ardayda Ku qaataan Dugsiga Dhexe

| Qiimeynta | Fasalada | Ujeedada |
|---|---|---|
| Baaritaanada Qiimeynta Dhammaan Qeybta | 6–8 | Qiimaynta casharadii lasoo baray 4-6 asbuuc ee lasoodhaafay oo maado kasta ah |
| Qiimeynta Ku meelgaarka BPS | 6-8 | ELA iyo heerka xisaabta darajada aqoonta |
| Kobaca MAP | 6-8 | Shaashadda guud ee akhriska oo bixisa cabbiraadda koritaanka (inta udhaxeysa labada maamul qiimeyn) |
| Tijaabada Aqbalaadyada Imtixaanka Dugsiga | 6 and 8 | TBD |
| Jiilka Cusub ee MCAS 2.0 | 6–7<br>8 | ELA iyo xisaabta<br>ELA, xisaabta, iyo sayniska iyo tignoolojiyada/ farsamada |
| ACCESS loogu talagalay ELL-ka | 6-8 | Akhrinta luuqada Ingiriiska, qoraalka, hadalka iyo xirfadaha dhageysiga ee ardayda luuqada Ingiriiska |
| Qiimeynta Qaranka ee Hormarka Waxbarashada (NAEP) | 8 | Cabbiraadda waxa ardayda Mareykanka ay yaqaanaan oo ay ku sameyn karaan maadooyin kala duwan (oo la siiyo 2-dii sanaba mar) |

# Sharuudaha Dalacsiinta Dugsiga Dhexe: Fasalada 6–8

| | | |
|---|---|---|
| **Fasalka 6** | Si laguugu dalacsiiyo fasalka 7, ardayda waa inay helaan buundada guud ee baasida sadex koorso ee aagaga maadada xigto: ELA/ESL, xisaabta, sayniska, iyo taariikhda /cilmiga bulshada.<br>• Si ay ugu gudbaan xisaabta, ardaydu waa inay ka gudbaan qiimeynta xisaabta ee sannadka dhammaadka ama qiimeynta xisaabta ee dhammaadka xagaaga. | ▶ Ardayda aan ka gudbin labada ELA / ESL iyo xisaabta waa inay xaadiraan Akadeemiyada Barashada Xagaaga.<br>▶ Ardayda aanan baasin ELA/ESL iyo xisaabta dhammaadka Machadyada Waxbarashada Kuleelaha waxay ku dhacayaan koorsooyinka ee sannadka iyo waa inay ku celisaa. |
| **Fasalka 7** | Si laguugu dalacsiiyo fasalka 8, ardayda waa inay helaan buundada baasida ee guud ahaan lixaad koorso ee aagaga maadada xigto ee fasalada 6 iyo 7: ELA/ESL, xisaabta, sayniska, iyo taariikhda/sayniska bulshada.<br>Koorsooyinka waa inay ku jiraan ugu yaraan:<br>• koorsooyinka xisaabta ee saddexda ELA/ESL<br>• hal koorso oo saynis ah<br>• hal taariikhda/sayniska bulshada | ▶ Ardayda aan ka gudbin labada ELA / ESL iyo xisaabta waa inay xaadiraan Akadeemiyada Barashada Xagaaga.<br>▶ Ardaydu waxay kasban doonaan dhibco koorsada kaliya haddii ay xaadiraan Akadeemiyada Barashada Xagaaga oo ay ka gudbaan shaqada koorsada loo baahan yahay. Ardayda aan ka qeybgalin way ka dhacayaan koorsooyinka. |
| **Fasalka 8** | Si laguugu dalacsiiyo fasalka 9, ardayda waa inay helaan buundada baasida ee guud ahaan tobanaad koorso ee aagaga maadada xigto ee fasalada 6, 7 iyo 8: ELA/ESL, xisaabta, sayniska, iyo taariikhda/sayniska bulshada.<br>Koorsooyinka waa inay ku jiraan ugu yaraan:<br>• shan ELA/ESL + koorsooyinka xisaabta<br>• labo koorso saynis ah<br>• labo taariikhda/sayniska bulshada koorssoyinka | ▶ Ardayda aan ka gudbin labada ELA / ESL iyo xisaabta waa inay xaadiraan Akadeemiyada Barashada Xagaaga.<br>▶ Ardaydu waxay kasban doonaan dhibco koorsooyinka keliya haddii ay galaan Akadeemiyada Barashada Xagaaga oo ay ka gudbaan shaqada koorsada loo baahan yahay. Ardayda aan ka qeybgalin way ka dhacayaan koorsooyinka.<br>▶ Ardayda aan buuxin shuruudaha koorsada fasalka 8-dhamaadka dhamaadka Akadeemiyada Barashada Xagaaga waa la hayn doonaa. Ardayda horay looga celiyay dugsiga dhexe waa la celin karaa markale kaliya kadib eegida dacwada ee maamulaha, macalimiinta, shaqaalaha taageerada, iyo waalidka. |



# Sharuudaha Dalacsiinta iyo Qalinjabinta Dugsiga Sare *

Sida waafaqsan dalacsiinta dugsiga sare ee BPS iyo xeerka qalin jabinta, ardayda waxay raacaan "qariirada wadada dalacsiinta" ee qalinjabinta ay ku hormariyeen la taliyayaasha, macalimiinta, jaheeyayaasha, iyo xubnaha qoyska.

Dugsi sare ee walboo BPS wuxuu raacaa mid ka mid ah qaababka wadada ee u diyaariso ardayda oo dhan kulliyada, tababarka boostada dugsiga sare, iyo abaalmarinta shaqooyinka. Dhammaan qaababka wadooyinka waxay u ogolaanayaan dabacsanaanta qaarkood sida goorta ardayda ay ka qaataan koorsooyinka qaarkood. Tusaale ahaan, hal arday wuxuu qaadan karaa Taariikhda Mareykanka 1 ee fasalka 10, iyada oo arday kale qaadan karo fasalka 11. Ardayda qaarkood waxay u baahanayaan afar sanno oo lagu buuxinayo dhammaan sharuudaha qalinjabinta.

Markii aad dooraneysid dugsi sare, ardayda iyo qoysaska waa inay hubisaa inay wax badan ka barato qaababka wadooyinka ee dugsiga u raaco dhinaca dibloomada dugsiga sare BPS.

*Sharuudaha qalinjabinta dib u eegid bay hadda ku jirtaa.

## Tallooyinka Layliga

Macalimiinta Boston Public Schools waxay aaminsanyihiin in markii ardayga ku isticmaalo waqti shaqooyinka layli wax ku ool ah, waxay aad ugu badanyihiin inay waxbarasho ahaan ku guuleystaan. Layliga wuxuu dhisaa shaqada fasalka oo ku dhiiorgelisaa ardaygga inuu hormariyo is edbinta iyo masuuliyada shaqsiga. Waxay sidoo kale sare u qaadaa iskaashiga u dhaxeeyo guriga iyo dugsiga.

Layliga wuxuu siiyaa ardayda fursado ay ku sii wadaan inay sahamiyaan nuxurka casharka maalinta, diyaarinta casharada maalinta xigto, iyo/ama howlaha qoto dheereynayo fahamka ardayga. Dugsiga waa inuu lahaadaa qorshaha layliga ee ku haboon manhajka dugsiga.

Macalimiinta waa inay xiriiriyaan shaqooyinka si markaas ardayda aysan u laheyn layli badan ee habeen walboo la siiyay. Wixii degdega, dugsiga wuxuu u xilsaari karaa akhrinta iyo qoraalka maalin walba; xisaabta iyo taariikhda ee Isniinta, Arbacada, iyo Jimcaha; iyo sayniska luuqada caalamka ee Tallaadada iyo Qamiista. Layliga wuxuu sameeyaa buundada kaarka wargelinta.

**Waqtiga isku celceliska ee lagu taliyay:**

2½ saacad maalintiiba

## Qiimaynta ay Ardaydu Ka Qaadi Karaan Dugsiga Sare

| Qiimeynta | Fasalada | Ujeedada |
|---|---|---|
| BPS Dhammaadka-Qiimeynta-Koorsada | 9-12 | Qiimaynta casharadii lasoo baray 4-6 asbuuc ee lasoodhaafay oo maado kasta ah |
| MCAS 2.0<br>ELA iyo xisaabta | 10 | ELA (fahamka akhriska, halabuurka, iyo fahamka luqadda iyo suugaanta) iyo Xisaabta (Tirada iyo Qiyamka, Aljabra iyo Waxqabadyada, Joometri, iyo Tirakoobka iyo Suurtagalnimada) |
| Imtaxaanada kuceliska ah ee MCAS: ELA iyo xisaabta | 10-12 | ELA iyo Xisaab (haddaan hore loogu gudbin, ardaydu waxay dib ugu noqdaan imtixaan si ay u gaaraan dhibco uqalma / Horumar ama Baahi u Leh) |
| MCAS 2.0<br>Bayoolaji ama Fiisigis Hordhac ah | 9 | (Haddii lagu qoro koorsooyinkan) Ardaydu waa inay ka gudbaan hal imtixaan saynis si ay u qalin jabiyaan. |
| Dhaxalka MCAS<br>Kimistiriga iyo Teknolojiyada/ Injineernka | 9 | (Haddii lagu qoro koorsooyinkan) Ardaydu waa inay ka gudbaan hal imtixaan saynis si ay u qalin jabiyaan. |
| Dhaxalka MCAS<br>Sayniska iyo Teknolojiyada/ Injineernka | 10 iyo 11-12 | (Haddaan hore loo gudbin) Ardayda qaadata cilmiga bayoolajiga, kimistariga, fiisigiska hordhaca ah, iyo injineernimada teknolojiyadda. Ardaydu waa inay ka gudbaan hal imtixaan saynis si ay u qalin jabiyaan. |
| ACCESS loogu talagalay ELL-ka | 9-12 | Akhrinta, qoraalka, ku hadalka, iyo xirfadaha dhageysiga oo Ingiriis ee ardayda luuqada Ingiriiska |
| Hordhaca SAT (PSAT) | 10-11 | Dhaqanka ee SATs; wuxuu qiimeeyaa xisaabta iyo akhrinta / qoraalka ku saleysan caddeynta; buundooyinka loogu magac daray Aqoonyahannada Mudnaanta Qaranka |
| Dugsiga SAT Da<br>Qiimeynta ACT™ | 11-12 | Waxaa u adeegsaday kulleejooyinka iyo jaamacadaha badankood si ay u gaaraan go'aannada gelitaanka. SAT Maalinta Dugsiga waxay qiimeeyaan xisaabta iyo akhrinta / qorista caddeynta ku saleysan (ACT: waxay tijaabisaa Ingiriisiga, aqrinta, xisaabta, iyo sayniska) |
| Qiimeynta Qaranka ee Hormarka Waxbarashada (NAEP) | 12 | Cabbiraadda waxa ardayda Mareykanka ay yaqaanaan oo ay ku sameyn karaan maaddooyin kala duwan (oo la siiyo 2-dii sano ee kasta dhawr dugsi oo muunad ah) |
| STAMP Qiimeynta | 12 | Qiimeynta, kartida lagu soo bandhigayo fikir la falanqeeyay oo qoraal ahaan (to qualify for the state Seal of Biliteracy) |
| Qiimeynta Ku meelgaarka BPS | 9-11 | ELA iyo heerka xisaabta darajada aqoonta |
| Kobaca MAP | 9-11 | Shaashadda guud ee akhriska oo bixisa cabbiraadda koritaanka (inta udhaxeysa labada maamul qiimeyn) |

# Sharuudaha Qalinjabinta Dugsiga Sare

Boston Public Schools waxay eegayaan shuruudahooda qalinjabinta si markaas si wanaagsan loogu waafajiyo iyaga Waaxda Massachusetts ee filashooyinka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (DESE) iyo Barnaamijka Dugsiga Sare Muhiimka ah ee Massachusetts ee Daraasada. (www.doe.mass.edu/ccte). (doe.mass.edu/ccr/masscore) Ardayda aan buundeynin ugu yaraan 240 ee buundada MCAS 10 xisaabta iyo ELA waa in la qaataa oo la baasaa shaqada koorsada ee maadooyinkaan fasalada 11 iyo 12.

| | |
|---|---|
| Wadada I | • Samee oo ka gudub afar Ingiriis (ama ESL) koorsooyin ah<br>• Samee oo ka gudub seddex koorso taariikhda, oo ay ku jiraan Taariikhda Mareykanka 1 & 2<br>• Qaado oo ku aflax afar xisaabeed isku dhafan oo isugu xigta Xisaabta I, Xisaabta 2, Xisaabta 3, ama sida caadiga ah oo ay isugu xigaan Aljebra I, Joomatari, iyo Aljebra II oo leh doorasho sanadka 4aad oo ah PreCalculus, Calculus, Tirakoobka, ama Xisaab Sare oo isku jirta oo ah Tirsiimo.<br>• Samee oo ka gudub saddex koorso sayniska shaybaarka, oo ay ku jiraan ugu yaraan laba ka mid ah kuwan soo socda: bayoolaji, kimistari, fiisikis<br>• Samee oo ka gudub laba sano oo isla koorsooyinka luqadda adduunka ah (ama laba koorso oo dheeri ah oo ESL ah)<br>• Samee oo ka gudub laba koorso oo simistarka arshaxanada ah<br>• Samee oo ka gudub afar koorso oo simistar ah oo ku saabsan waxbarashada jimicsiga<br>• Samee oo ka gudub hal semester ee koorsada caafimaadka<br>• Samee oo ka gudub hal semester ee koorsada kumbuyuutarada ah<br>• Kasbo Go'aaminta Aqoonta (CD) ee MCAS ELA, xisaabta, iyo sayniska & teknolojiyada / injineernimada (eeg bogga 17) |
| Wadada II | • Samee oo ka gudub afar koorso oo bini aadam ah, oo buuxiya heerarka hadda ee Ingiriisiga iyo Taariikhda Mareykanka 1 & 2<br>• Samee oo ka gudub afar xisaabeed isku dhafan oo isugu xigta Xisaabta I, Xisaabta 2, Xisaabta 3, ama sida caadiga ah oo ay isugu xigaan Aljebra I, Joomatari, iyo Aljebra II oo leh doorasho sanadka 4aad oo ah PreCalculus, Calculus, Tirakoobka, ama Xisaab Sare oo isku jirta oo ah Tirsiimo.<br>• Samee oo ka gudub saddex koorso sayniska shaybaarka, oo ay ku jiraan ugu yaraan laba ka mid ah kuwan soo socda: bayoolaji, kimistari, fiisikis<br>• Samee oo ka gudub laba sano oo isla koorsooyinka luuqadda adduunka ah<br>• Samee oo ka gudub laba koorso oo simistarka farshaxanada ah<br>• Samee oo ka gudub afar koorso oo simistar ah oo ku saabsan waxbarashada jimicsiga<br>• Samee oo ka gudub hal semester ee koorsada caafimaadka<br>• Samee oo ka gudub hal semester ee koorsada kumbuyuutarada ah<br>• Kasbo Go'aaminta Aqoonta (CD) ee MCAS ELA, xisaabta, iyo sayniska & teknolojiyada / injineernimada (eeg bogga 17) |
| Wadada III | • Dugsiga wuxuu hormarin karaa liiskooda gaarka ah ee koorsooyinka loo baahanyahay ee buuxiyaa heerarka gobolka oo waxaa ansixiyo Boston Public Schools. Wadada dugsiyada III hadeer ay ku jiraan dugsiyada imtixaanka, qaar ka mid ah dugsiyada darawalnimada diyaarada, dugsiyada jaatarka Horace Mann, Dugsiga Sare Shaqada Cilmiga farsamada Madison, iyo barnaamijyada Waxbarashada Kale. |

*Goleyaasha Goobta Dugsigu way u codeyn karaan inay dejiyaan koorso iyo shuruudaha imtixaanka ee ka sarreeya kuwa kor ku xusan.

## Su'aalo iyo Jawaabo ku saabsan Nidaamka Qalinjebinta Dugsiga Sare

### Haddii ardayda ku dhacaan qaar ka mid ah koorsooyinka,ma inay ku celiyaan baa sannadka oo dhan?

Maya.Dib ayay ugu qaadan karaan koorsooyinkaas qaababka xiggo: inta lagu jiro kuleelaha, inta lagu jiro sannadka waxbarashada, ama onleenka (fiiri bogga 15-16)—laakin horay ayay uga dhaqaaqi karaan maadooyinka ay baaseen. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri la taliyaha jaheynta dugsigaaga.

Ardayda sannadka afaraad waxay sidoo kale leeyihiin helitaanka qalinjabinta guud degmada oo dhan bisha Agosto haddii seegaan qalinjabinta dugsigooda.

### Haddii ardayga qaato koorsooyin ka duwan ee sannadaha ka duwan ee gudaha wadooyinka, goorma ayay qaadanayaan Fasalka 10 MCAS?

Ardaydu waa inay kaqaybqaataan imtixaanada MCAS ee kaliya ee fasalka ay ku jiraan. Ardayda fasalka 10 waa inay qaataan imtixaanada ELA iyo Xisaabta iyo mid ka mid ah afarta imtixaan ee STE haddii aysan ka qayb galin ee STE ee fasalka 9aad. Kuwa keliya ee ka duwan waa ardayda ELka ah ee fasalka 10-aad ee ku jira sannadkooda koowaad Iskuul Maraykan ah, kuwaasoo imtixaanka ELA uu yahay ikhtiyaari.

### Waa maxay Barnaamijka Daraasada MassCore?

MassCore waa barnaamijka gobolka ku taliyay, barnaamijka adag ee waxbarashada tilmaanto shaqada koorsada dugsiga sare iyo filashada kulliyada iyo koorsada shaqada. 4 sanno oo Ingiriis ah; 4 sanno oo xisaabo ah; 3 sanno sheybaarka ku saleysan Sayniska; 3 sanno ee Taariikhda/Sayniska Bulshada; 2 sanno oo isku luuqada caalamka; 1 sanno Farshaxanka; 5 sannoo dheereaad ah ee koorsooyinka "ugu muhiimsan" ee maadooyin walboo kore, waxbarashada ganacsiga, waxbarashada shaqada iyo cilmiga farsamada, caafimaadka, ama cilmiga farsamada. Fursadaha waxbarashada dheeraadka ah sida koorsooyinka Meeleynka Hormarsan, diiwaangelinta labada, mashruuca ardayda afarta sanno, koorsooyinka onleenka ee dugsiga sare ama buundada kulliyada, iyo adeega- ama waxbarashada shaqada ku saleysan waa lagu taliyay. Ardayda dhameystirtay barnaamijka MassCore ee waxbarashada si wanaagsan ayay ugu diyaarsanyihiin kulliyada iyo shaqada.

### Kaas oo ardayda iyo qoyskooda ay weydiiyaan wax ku saabsan Xeerka Qalinjabinta Dugsiga Sare?

➲ Waaxda Jaheynta Dugsigaaga

➲ Waaxda Jaheynta BPS....................................................617-635-8030

Sare u qaadida iyo Qiimeynta

# Barnaamijyada Gaarka ah

## Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Ardayga

Ardayda qabta curyaannimada waxay leeyihiin xaquuq badan iyo ilaalin sida waafaqsan sharciga faderaalka iyo gobolka. Sida ku qeexan Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA), dhammaan carruurta naafada ah waxay xaq u leeyihiin waxbarasho guud oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay in lagu daboolo baahidooda shakhsi ahaaneed una diyaarineysa waxbarasho dheeri ah, shaqo iyo nolol madaxbannaan. Ardayda naafada ah waa in wax lagu baraa fasalada leh ardayda aan naafada ahayn sida ugu macquulsan.

Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah wuxuu ardayda naafada ah u siiyaa goobo kala duwan:

- **Isku daridda buuxda:** Ardayda waxaa wax lala baraa ardayda aan laheyn baahiyada gaarka ah oo boqolkiiba 80% maalinta dugsiga ama ka badan gudaha fasalka waxbarashada guud
- **Isku daridda qeybta ah:** Ardayda waxay ku qaadan karaan 60% maalinta dugsiga banaanka fasalka waxbarashada guud
- **Goobta sida waxku oolka ah loo gooniyeeyay:** Ardayda waxay ku isticmaashaa in kabadan 60% maalinta dugsiga banaanka fasalka waxbarashada guud
- Ardayda qaarkood ee leh heerarka sareeyo ee baahida waxay ka diiwaangashanyihiin dugsiyada qaarkood ee bulshada ama maalin gaar ah ama goobaha xadeysan oo helaa dhammaan waxbarashadooda iyo adeegyada dugsiyadaan waxbarashada gaarka ah. BPS waxay leedahay sadex maalin dugsi ah ee ardayda qaba curyaannimada ee qaba heerarka sare ee baahida:
  - Dugsiga Horace Mann ee loogu talagalay ardayda naafada maqalka ah
  - Dugsiga Carter ee loogu talagalay ardayda naafada badan
  - Dugsiyada McKinley ee loogu talagalay ardayda naafada ka ah xagga dareenka.
- Adeegyada la xiriira: Tooska iyo/ama adeegyada waxbarashada gaarka ah ee wadatashiga oo u gaar ah aragga iyo/ama maqal la'aanta.

Haddii aad tuhunsan tahay in ilmahaagu uu ku adkaado inuu iskuulku horumar ka gaaro naafonimo awgeed, waxaad xaq u leedahay inaad codsato qiimeynta ilmahaaga si loo ogaado haddii isaga ama iyada laxaadkiisu dhimman yahay iyo haddii naafanimadu saameyn ku yeelanayso helitaankooda guud ee waxbarasho. Weydii maamulaha / madaxa dugsiga ama Isuduwaha Waxbarashada Khaaska ah (COSE) ee dugsigaaga wixii war dheeraad ah.

### Macluumaad Dheeraad ah

➲ Waxbarashada Gaarka ah................................................617-635-8599
**bostonpublicschools.org/Special-ed**

➲ Waaxda Dugsiga hoose ee Massachusetts iyo Waxbarashada Dugsiga sare, **www.doe.mass.edu/ell/**

# Ardayda Ingiriiska

Boston Public Schools (BPS) wuxuu sameeyay waxbarasho tayo sareyso oo ardayda Ingiriiska mudnaan sareyso. BPS waxay siisaa dooqyo kala duwan iyo adeegyo lagu caawinayo ardayda inay bartaan Ingiriiska waxbarashada sida ay u baran karaan suugaanta, qoraalka, xisaabta, sayniska, waxbarashada taariikhda/bulshada, farshaxanada, waxbarashada jirka, iyo maadooyinka kale. Hadafkeena waa bixinta waxbarasho ka jawaabto dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan oo ay la jirto taageerada loogu baahanyahay in lagu hubiyo in dhammaan ardaydeena Ingiriiska leeyihiin gelitaan simman ee fursadaha sare u qaado barashada luuqada, hadalka labada luuqad, akhrinta labada luuqad iyo barasho waarta.

### Yaa ah Ardaga Ingiriiska?

Ardayda Ingiriiska (ELs) waa ardayda ku hadasha luuqadaha aan aheyn Ingiriiska, iyo taas oo si ku fillan aan ugu wanaagsaneyn Ingiriis waxbarasho u ku sameeyo fasalka casharada ee Ingiriiska aan haysan taageerada luuqada. In ka badan 17,000 arday ee BPS (31% ee dhammaan ardayda BPS) waxaa lagu tilmaamay sida ardayda Ingiriiska.

### Sidee ayaa loogu meeleeyay ardayda adeegyada EL?

Waaladka/masuulka canug walba ee gelayo BPS markii ugu horeysay waa inuu buuxiyaa sahanka luuqadaa wadanka xiliga diiwaangelinta. Haddii sahanka uu tilmaamo in canuga laga yaabo inuu u qalmo adeegyada EL, degmada waa inay qiimeysaa waxbarashada aqoonta Ingiriiska oo afar dhinac ah: dhageysiga, ku hadlida, akhrinta, iyo qoraalka. Waalidiinta iyo masuulada carruurta u qlaantaa adeegyada EL ee leh xaquuqda sharciga lagu soo ogeysiinayo dooqyada iyo faa'idooyinka adeegyada EL ee lagu heli karo qaab ay fahmi karaan (ee la xiriiro dhexaad iyo luuqad) iyo kadib si aad u dooratid dooqa iyaga ay (waalidka ama masuulka) aaminsanyahay ku haboonaanta ugu wanaagsan ee canugooda u baahanyahay. Dhibaato malahan dugsiga canugaaga ka diiwaangashanyahay, isaga/iyada waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegyada. Waalidiinta ardayda luuqada Ingiriiska sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay "u doortaan" adeegyada EL carruurtooda oo ay u xilsaaraan carruurtaada Ingiriis kaliya, fasalka waxbarashada guud.

### Dooqyadee barnaamijka ayaa loo heli karaa ardayda Ingiriiska ee Boston Public Schools?

Sida waafaqsan sharciga gobolka, dhammaan ELs waxay heli karaan inay u helaan sida waxbarashada Ingiriiska Luuqada Labaad (ESL), taas oo loo naqshadeeyay inay barto Ingiriiska ELs. Macalimiinta oo dhan ee ELs ee baraa maadooyinka waxbarashada ugu muhiimsan (sida xisaabta, waxbarashada bulshada, iyo sayniska) waa inay lahaadaan tababar gooni ahoo qabtaa SEI (Waxbarashada Ingiriiska Lagu daboolay) Teegrida waxaa dheer shatigooda waxbarida. Macallimiinta bixiya waxbarista af-hooyo waa inay lahaadaan tababar isla markaana yeeshaan Aqoonsiga Waxbarashada Labada-luqadood (BEE).

BPS waxay bixisaa barnaaijyada xigo si ay u taagerto ardayda Ingiriiska:

- **ESL-ka Waxbarashada Guud ama Waxbarashada Gaarka.** Barnaamijkaan, arday kasta oo leh ELD 1-5 kaasoo laga qoray dugsi aan lahayn barnaamijka SEI ayaa helaaya casharo ESL ah oo gaar ah. Ardayda qaar ee kujira ELD 4-5, ayaa sidoo kale heli kara barnaamijka ESL oo casri ah markay dhiganayaan koorsadooda luuqada Ingoiriiska. Dhamaan ardayda ELD 1-5 ee kujira Barnaamijka Waxbarashada Guud ayaa helaaya casharo uu udhigaayo macalin lagusoo doortay barnaamijka SEI.
- **Waxbarashada Ingiriiska Luuqada Gooniga ah Lagu daboolay (SEI).** Barnaamijkaan, Kobcinta luuqada Ingiriisiga ayaa lagu baranayaa casharada maalintii oo dhan ayadoo la adeegsanaayo xeelado lagu doonaayo in lagu kordhiyo casharada kuwo sidii hore uga fahan fiican ardayda ELs ee kujira ELD 1-3. Casharka waxaa lagu dhigayaa Ingirtiisi, ayadoo luuqadooda hooyo loogu caawinayo ardayda. Ardayda fasalka kujira waa ardayda Ingiriiska ee ku hadlaa isla luuqad

# Ardayda Ingiriiska

dhaladka, oo qabaan Hormarinta Luuqada Ingiriiska (ELD) Heerarka 1 illaa 3. Waxbarashada la daboolay waxaa loogu talo galay inay ka dhigta waxbarashada aagaga tusmada heerka fasalka waxbarashada meel ay geli karaan ardayda EL. BPS waxay leedahay barnaamijyada SEI oo Spanish, Haytiyaan Keriool, Keb Ferdiyaan Keriool, Fiitnaamiis, Shiinees, iyo goobo badan.

- **Waxbarashada Labada Luuqad.** Xiligaan marka lagaaro, BPS waxay bixisaa barnaamijyada labada luuqadood ee Isbaanishka iyo Haitian Creole. Barnaamijyada Labada Luuqadood kubaxa, fasalada ardayda ayaa kakooban ardayda luuqada Ingiriiska kudhashay iyo ardayda kuhadla luuqada labaad (tusaale, Isbaanish, Haitian Creole).. Dhamaan ardayda ayaa barta akhriska, qorista, hadalka iyo fahanka labada luqadoodba oo uu dhigaayo macalin u qalma si ay uxaqiijiyaan in caruurtu Ingiriisika si heer sare ah ubartaan. Ardayda Barata Ingiriisiga ee ku jira barnaamijyada labada luuqadood sidoo kale waxay ka helaan barasho luqadeed macallin u qalma si loo hubiyo inay ku fiicnaanayaan Ingiriisiga.
- **Tababarka Luuqada High Intensity (HILT) oo Ardayda Ka Xadeysan Waxbarashada Rasmiga ah ama Carqalowday (SLIFE).** BPS waxay ugu talineysaa barnaamijkaan ardayda da'dooda ah 8 ama ka weyn kaas oo ah qof ku cusub Mareykanka, kaas oo ku leh farbarashada yar ama aan ku laheyn luuqadooda hooyo, iyo kaas oo waxbarashadiisa rasmiga ah ay ku xadeysneyd ama ay carqaladeysay wadankooda asalka ah.

Barnaamijyada HILT, ardayda wxaay helayaan:

- Luuqad Ingiriisiga tacliimeed oo xoog leh iyo horumarin farbarasho
- Barashada afka hooyo oo loogu talagalay inay ka caawiso inay bartaan akhriska, qorista, xisaabta, sayniska, iyo taariikhda / cilmiga bulshada, marka la heli karo
- Fasallo dheeri ah sida farsamada, farshaxanka, iyo jimicsiga jirka.

- **Iskuulada aan lahayn barnaamijyada EL, arday kasta oo leh ELD 1-5 wuxuu ka heli doonaa waxbarid cad oo ESL ah macallimiin khibrad leh leh iyo barista xafidan si ay uga dhigaan casharro tacliineed asaasiga ah iyo heer tacliineed ee fasalka kuwa ay fududahay in ay u fahmaan Hadii aad jeceshahay inaad diiddo mid ka mid ah barnaamijyada ama adeegyadda bartaha luqadda Ingiriisiga fadlan samee wakhti si aad ula kulanto maamulaha dugsiga ilmahaaga kaasoo kuu sharxi doona fursadahaaga iyo xuquuqdaada.** Kulankan ka dib, haddii aad weli jeceshahay inaad diido adeegyada, codsigaagu wuxaa si rasmi ah loogu gudbin doonaa oo uu ansixinaya Xafiiska Barteyaalka Af Ingiriisiga.

Sharciga gobolka cusub ee loo yaqaan "LOOK Act" wuxuu u ogolaanayaa in dabacsanaanta degmada si ay fuliso barnaamijyo luqadeed oo cusub oo loogu talagalay ardeyda af Ingiriisiga baraneysa waxayna cadeyneysaa muhimadda luuqadda hooyo ee ardayga. Xeerka LOOK wuxuu sidoo kale u oggol yahay waalidiinta 20 arday ama in ka badan ay codsadaan in degmadu hirgaliso barnaamij khaas ah oo barashada luqadda. Degmadu waa inay ka jawaabtaa codsigaan 90 maalmood gudahood. Fadlan la soo xiriir Xafiiska Barteyaalka Af Ingiriisiga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan fursadahaan cusub.

### Macluumaad dheeraad ah ee Barashada Ingiriiska

- ➲ Xafiiska BPS ee Ardayda Luuqada Ingiriiska ............ 617-635-9435 **oell@bostonpublicschools.org**
- ➲ Qiimeynta Dadka-cusub ee BPS iyo Xarunta Latalinta .................... 617-635-1565
- ➲ Waaxda Dugsiga hoose ee Massachusetts iyo Waxbarashada Dugsiga sare,.................................................... **www.doe.mass.edu/ele**

## Qiimeynta Dadka cusub iyo Xarunta La talinta

617-635-1565

Bolling Building, 2300 Washington St., Roxbury

nacc@bostonpublicschools.org

Imtixaanka Luqada ee ardayda diiwaangelinta Dugsiyada Dadweynaha Boston ee darajooyinka K2-12 si loo go'aamiyo in ay ka faa'iideysanayaan adeegyada Barashada Luqadda Ingiriisiga.

NACC waxay siisaa adeegyada soo socda qoysaska iyo ardayda:

- ☑ Imtixaanka luuqada ee luuqada dhaladka iyo Ingiriiska
- ☑ La talinta waxbarashada iyo shaqada
- ☑ Jaheynta BPS iyo adeegyada magaaladda
- ☑ Macluumaadta iyo illaha qoysaska

**NACC Saacadaha Howlgalka**

- Agoosto-Juun
  Isniin-Jimce: 9 subaxnimo - 5:00 galabnimo
- Julaay
  Isniinta, Talaado, Khamiis: 9:30 subaxnimo - 6:00 galabnimo

# Ardayda Guri la'aantu kudhacday

Ardayda si ku meel gaar ah guri la'aan u ah oo u baahan waaya aragnimada waxbarashada dugsiga oo xasiloon. Shabakada Illaha WaxbarashadaHoy la'aanta BPS (HERN) waxay siisaa ilo kala duwan iyo taageero ardayda la soo deristay hoy la'aanta.

- ➲ Shabakada Illaha Waxbarashada Guri la'aanta.......... 617-635-8037

# Wax ugu dhigista Guriga iyo Isbitaalka

Boston Public Schools wixii siiyaa waxbarashada guriga iyo isbitaalka ardayda ah inay joogaan guriga ama boobta isbitaalka, ama isku darka labadaba, oo ugu yaraan 14 maalmood oo dugsi ah ee sannad dugsiyeed walba. Ka hor inta uu ardayga helin adeegyadaan, dhaqtarka shatiyeysan waa inuu buuxiyaa foomka gobolka, oo laga heli karo kalkaalisada dugsiga canugaaga.

- ➲ Macluumaad Dheeri ah Taageerada Ardayga.............. 617-635-6633

# Waxbarashada Guriga

Waalidiinta ku nool Boston oo doonaya inay carruurtooda guriga wax ugu dhigaan waa inay usoo gudbiyaan arjiga xafiiska BPS ee Fursadaha Waxbarashada La Ballaariyey si loogu ansixiyo. Waa inay muujiyaan in soo jeedintooda waxkubarista guriga ay raacayaan Tilmaamaha Waxbarashada Guriga ee Massachusetts oo ay buuxinayaan shuruudaha saacadaha Manhajka Gobolka ee heerarka fasalka. Waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah oo guriga wax ugu dhiga waa inay soo gudbiyaan qiimeynta dhamaadka sanadka sannad kasta. Oggolaansho guri-dhigashada waxaa la siiyaa markii la helo codsiga.

- ➲ Fursadaha Barashada ee Ballaariyey.............................. 617-635-8880

# Barnaamijyada Gaarka ah

## Waxbarashada Sida Kale

Boston Public Schools waxay bixiyaan barnaamijyada waxbarashada badelo kala duwan leh iyo adeegyada dugsiga dhexe iyo ardayda dugsiga sare ee aan ku guuleysaneynin goobta dugsiga caadiga ah. Barnaamijyada wuxuu bixiyaa taageero degdeg ah iyo qaabab kala duwan ee waxbarashada. Waa muhiim in la ogaado in arday walba ee codsadaa barnaamij gooni ah waxaa lagu meeleynayaa barnaamijka.

Barnaamijyada qaar ayaa ah:

- Xarunta Dib uga qeybgalinta BPS (REC) waxay ku caawisaa ardayda ka baxday dugsiga sare (ama ku fakarayo inuu ka baxo) inuu ku dhameeyo dugsiga sare oo sii joogteeyo waxbarashadooda iyo diyaarinta shaqada ee dhaafsan dugsiga sare.
- Boston Adult Technical Academy (BATA) waxay u adeegtaa ardayda da'dooda ah 18–22 ee loo tixgeliyay inay ka weynyihiin da'da fasalkooda. Qaar ka mid ah ardaydaan waa ardayda Ingiriiska.
- Barnaamijka Farogelinta Dardargelinta ah ee Dugsiga Sare ee Excel
- Charlestown Diploma Plus waxay u adeegtaa dhammaan ardayda ka imaaneyso dugsiyada sare ee BPS ee aan ku guuleysan barnaamijyada joogtada ahee u baahan waxbarasho awood adag ku saleysan oo ay taageereen dhaqanka waxbarashada gaarka ah.
- Aagga Egleston
- Community Academy (fasalada 9-12) wuxuu ka diiwaangeliyaa ardayda u baahan waxbarashada yar ee bulshada qaabeysan, wanaagsan oo ay la jirto diirad saarida dabeecada iyo ka qeybgal wanaagsan oo dugsiga ah.
- Boston Day and Evening Academy (BDEA)
- Dugsiga Sare ee Dadka Waaweyn ee Bartamaha Boston wuxuu siiyaa labadaba dibloomada iyo Imtixaanka Udhigma Dugsiga Sare (HiSET) Ardayda iyo/ama qoyskooda waxay dooran karaan barnaamijyadaan haddii ay qabeen waaya aragnimada dugsiga oo xun ama haddii ay rabaan inay qaadaan waddo ka duwan ee dhinaca dibloomada dugsiga.

BPS waxay siisaa barnaamijyo dheeraad ah sida qeyb ka ah Iskaashiga Dugsiga Sare ee Boston, iskaashiga hay'adaha bulshada ku saleysan:

- Boston Collaborative High School waxay siisaa waxbarashada aan dhaqanka aheyn iyo barnaamijka wareega sannadka ardayda ka weyn da'da oo ay la jirto diirada hormarinta shaqada.
- EDCO High School waxaa loogu talo galay ardayda da'da ka weyn, buundada ka hoosmaray, oo u baahan waxbarashada yar ee bulshada la gaareeyay.
- Ostiguy High School waxaa loogu talo galay ardayda ka soo kabsanayo xadgudubka maandooriyaha.
- Otro Camino waa barnaamij barasho duwan oo loogu talagalay ardeyda af Ingiriisiga baraneysa.
- LogOn Academies waxay ku bixisaa waxbarashada aan dhaqanka aheyn iyo wadooyinka waxbarashada dugsiga sare dhaafsan illaa isku darka onleenka iyo waxbarashada fasalka (oo loo yaqaan "waxbarashada laisku qasay"). Tani waa waxbarashada kumbiyuutarka aadka u daran ee ardayda si madax banaan u shaqeyn karo oo ku qanacsan waxbarashada onleenka.
- St. Mary's School waxaa loogu talo galay ardayda waalidnimada filanayo ama waalidka ah iyada oo la isticmaalayo onleenka iyo galka waxbarashada.

### Macluumaad dheeraad ah Waxbarashada Kaduwan

➲ Xarunta Dib uga qeybgalinta 617-635-2273

➲ Macluumaadta GED ........ **doe.mass.edu/hse**

## Fasalka Shaqada Hormarsan iyo Wanaagsan Dadka oo dhan

Fasalka Shaqada La hormariyay (AWC) waa barnaamij waqti buuxo ee ardayda fasalada 4, 5, iyo 6, oo ku yaalo qaar ka mid ah dugsiga hoose, dhexe, iyo dugsiyada K-8 ee ku yaalo Magaaladda oo dhan. Barnaamijka AWC wuxuu daboolaa isla mowduuca sida waxbarashada guud; si kastaba, maado walba waxaa loo bartay qoto dheer weyn, ee booska la dadajiyay oo waxay u baahantahay dhameystirka shaqada fasalo badan iyo layliga oo ardayga ah. Barnaamijyada AWC ee ugu badan waxaa loo kooxeeyay fasal ugu adeego ardayda AWC si gaar ah.

**AWC sanadka 2022 iyo Wixii ka dambeeya**: BPS waxay bilaabeen koox shaqo si ay u qiimeeyaan hoos u dhaca isqorista barnaamijka AWC, helitaanka sinnaanta ee dhammaan ardayda, iyo siyaasadaha gelitaanka. Kooxdan shaqeysa waxay tixgelin doontaa xeeladaha lagu hormarinayo sinaanta jinsiyada markay horumarinayaan soona jeedinayaan tilmaamo cusub ee Kormeeraha Guud iyo Guddiga Dugsiga si ay u eegaan una tixgeliyaan Isbeddel kasta oo lagu sameeyo nidaamka ogolaanshaha wuxuu dhaqan galayaa sanad dugsiyeedka 2022-23. Degmadu waxay sii wadi doontaa kaqeybgalka qoysaska, hogaamiyaasha iskuulka, barayaasha, iyo la-hawlgalayaasha bulshada wadahadalada ku saabsan mustaqbalka barnaamijka AWC.

BPS waxay sanad dugsiyeedkan ka bixisaa Horumarinta Dhamaan (EFA) 16 dugsi hoose iyo dhexe. EFA waxay siisaa dugsiyo badan khayraad loogu talagalay inay kor u qaadaan xoogganaanta iyo in ay kordhiyaan fursadaha ardayda oo idil fasalada 3-6. Macallimiinta dugsiyada EFA waxay helaan tababar joogto ah iyo horumarin xirfadeed si ay u bixiyaan waxbarid adag oo dhaqan ahaan ku haboon. Ardaydu waxay helaan waxkaqabad farabadan (sida akhriska, xisaabta) iyo kobcin (sida koorsooyinka luqada iyo STEM, u diyaarinata imtixaanka ISEE) kuwaas oo ka caawiya inay horumariyaan xirfadaha u muhiimka ah ee loogu baahan yahay guusha mustaqbalka.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka ama nidaamka doorashada, fadlan kala xiriir xafiisyada xiggo wixii macluumaad dheeraad ah:

➲ **Su'aalaha ku saabsan barnaamijyada**
Manhajka iyo Waxbarashada 617-635-9202

➲ **Su'aalaha ku saabsan foomamka dooqa dugsiga iyo i-meelada onleenka ah**
Adeegyada Soodhawaynta 617-635-9512

➲ **Su'aalaha ku saabsan iktiyaarada**
Soo wac Xarunta walboo Soo dhaweynta BPS (bogga 5)

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo liiska dugsiyada ay ku bixinayaan barnaamijyadaan, booqo:

➲ **bostonpublicschools.org/AWC**

# Dugsiyada Imtixaanka

Boston halkaan waa sadex dugsiyo imtixaamo ee ku jiro gudaha BPS oo fasalada 7-12

**Boston Latin School**, la aasaasay 1635, waa dugsiga ugu duqsan Mareykanka, oo u adeego bulshooyinka dhaqaale ahaan iyo dhaqan ahaan kala duwan. BLS waxay raadisaa inay sababeyso ardaydeeda ee waxbarashada heerka sare sida diyaarinta waxbarashada kulliyada oo lagu guuleysto, muwaaadinka masuulka ka ah ama ka qeybgalo, iyo abaalmarinayo nolosha.

**Boston Latin Academy** waxaa ardayda la siiyaa manhaj adag oo leh jawi uu ku jiro kobcin iyo si shakhsiyadeed. Waxaa intaa dheer, dugsigu waa mid ka mid ah kuwa ugu kala duwan ee gobolka marka la eego jinsiyadda, dhaqanka, iyo luqadda, oo ku muujiya ardayda waayo-aragnimo ah oo u eg miraha dhabta ah.

**The John D. O'Bryant School of Mathematics and Science** waa bartayaaasha bulshada kala duwan, taageero leh ee ka qeybgalaa adkaanta iyo Fahamka Sayniska, Cilmi farsamada, Injineernimada, iyo Barnaamijka Xisaabaha ee lagu daray Bani'aadamnimada. Dugsigeena imtixaanka u diyaargarowga kulliyada wuxuu u ogolaanayaa ardaydeena inay gaaraan filashadooda oo noqdaan hogaamiyayaasha toosin lahaa jaheynta bulshada.

Dhammaan sadexda dugsiyo waxay ogolaadaan ardayda cusub ee galeyso fasalada 7 iyo 9. O'Bryant sidoo kale wuxuu u ogolaadaa tiro xadidan ee ardayda cusub fasalka 10. Dugsiyadaan waxay ka midyihiin dugsiyada bulshada sida sareyso u shaqeyneyso ee wadanka. Waxay siiyaan ardayda u diyaargarowga kulliyada iyo manhajka heerka sare, fursadaha ciyaaraha, ka qeybqaadashada farshaxanada, howlaha kooxda ardayda, kumeelgaarada iyo boosaska hogaannimada, iyo iskaashiga ee ay la jirto aaga kulliyadaha iyo ganacsiyada.

➲ Macluumaad dheeri ah oo laxiriira nidaamka aqbalida sedexda dugsi imtixaan, booqo ........................ **bostonpublicschools.org/exam**

## Daganaanshaha Codsadayaasha Dugsiga Imtixaanka

Si markaas loo codsado oo looga qeybgalo imtixaanka dugsiga, labadaba ardayga iyo waalidka/masuulka waa inuu ku noolaadaa Magaaladda Boston.

Haddii ardayga looga saaro xadgudubka daganaanshaha, isaga/iyada uguma laaban karaan dugsiga imtixaanka gudaha isla sannad dugsiyeedka. Ardayda waa inay dib u codsataa fasalka gelitaanka xiggo oo usuurtogashaa inay cadeeyaan daganaanshaha Boston.

## Ka bixida Dugsiga Imtixaanka

- Ardayda dugsiga imtixaanka ee rabaan inay u guuraan BPS dugsiga aan imtixaanka aheyn wuxuu codsan karaa wareejinta ilaa dhamaadka Nufeembar.
- Dugsiga imtixaanka waa inuu sameeyaa wareysiga ka bixitaanka oo siiyaa ardayga warqada ka bixitaanka. Ardaygaan waa inuu keenaa warqadaan marka uu xareynayo codsiga wareejinta ee Xarunta Soo dhweynta BPS.
- Ardayda ka beddesha dugsiga imtixaanka laga yaabo inay usuurtogasho inay dib ugu galaan dugsiga inta lagu jiro isla sanad dugsiyeedka haddii uu oggolaado madaxa dugsiga.

Macluumaad badan oo ku saabsan Dugsiyada Imtixaanka

➲ Adeegyada Soodhawaynta ............................................ 617-635-9512

➲ **bostonpublicschools.org/exam**

➲ Soo wac Xarunta walboo Soo dhaweynta BPS (bogga 5)

➲ Ka fiiri bogga 44 wixii dheeraad ah ee sharuuda daganaanshaha

# Xirfadaha iyo Waxbarashada Farsamada (CTE)

BPS waxay soo bandhigaan fursado badan oo CTE ah si loogu oggolaado ardayda inay u tartamaan abaalmarinta shaqooyinka wax ka badan 25 goobood. CTE waxay siisaa gacan-qabad barasho oo dhista aqoon tacliimeed iyo mid farsamo, xirfadaha xalinta dhibaatooyinka, xirfadaha shaqaalaynta, iyo xirfadaha shaqo ee gaarka ah ee u horseeda aqoonsiga warshadaha. Hadafkeenu waa in arday kasta oo CTE ah uu leeyahay aqoon adag, farsamo, iyo xirfado xirfadeed markuu qalin jabinayo si uu u helo fursado adag oo dugsiga sare kadib ah, oo ay ku jiraan labo iyo afarta shahaado jaamacadeed, shahaadooyin, iyo barnaamijyo tababar farsamo iyo xirfad barasho.

Ardayda BPS waxay ka dooran karaan 40 Wado oo loo maro saddex nooc oo ah Xirfadaha iyo barnaamijyadaWaxbarashada Farsamada. Cutubka 74 barnaamijyada laga bixiyo Dugsiga Sare ee Farsamada Gacanta Madison Park, Dugsiga Sare ee Ingiriiska, Dugsiga Farshaxanka Boston, Akadeemida Boston Green , iyo Akadeemida Kennedy ee Xirfadaha Caafimaadka. Barnaamijyadani waxay la kulmaan qeexitaanka waxbarashada farsamada gacanta ee ku jirta Massachusetts Sharciga Guud Cutubka 74aad iyo Xeerka Perkins waxaana ansixiyay Waaxda Dugsiyada Hoose iyo Sare.

- **Jidka aan ahayn Cutubka 74 CTE Pathways** waxaa lagu bixiyaa dugsiyada sare ee Boston oo dhammaystiran, oo ay ku jiraan Boston International, East Boston, Jeremiah E. Burke, John D. O'Bryant, New Mission, iyo TechBoston Academy. Barnaamijyadani waxay la kulmaan qeexitaanka waxbarashada farsamada gacanta ee ku jirta Xeerka Perkins waxaana oggolaaday BPS.
- **Innovation Pathway CTE Pathways** oo lagu bixiyo Dearborn STEM Academy iyo Excel High School waxaa ansixiyay Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare waxaana ka mid ah shaqooyinka koorsada heerka kuliyada ah.

### Codsiyada xirfadeed ee degmada ka baxsan

Codsiyada waxbarista ardayda aan deganeyn ee codsiyada meelaynta ka baxsan degmada waa in lagu soo diraa emayl ama boosto loo dirayaa Agaasimaha Fulinta ee Xirfadaha iyo Tacliinta Farsamada kahor Abriil 1, 2022, si loo tixgeliyo deyrta soo socota. Ardayda sahaminaysa ikhtiyaarkan waa inay la xiriiraan Xafiiska Shaqada iyo Waxbarashada Farsamada si ay uga caawiyaan hawshan.

Dhammaan shakhsiyaadka, oo ay ku jiraan kuwa xubno ka ah dad gaar ah, waxaa la siiyaa fursad loo siman yahay ee barnaamijyada waxbarashada shaqada / xirfadaha-farsamada, adeegyada, iyo waxqabadyada oo looma takoorin iyadoo lagu saleynayo xaaladdooda xubinnimo ee dad gaar ah ama jinsi, midab, jinsi , asal qaran, naafonimo, diin, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, ama aqoonta luqadda Ingiriisiga. Perkins Sections 122 & 134, Shuruucda Waxbarashada Farsamada Gacanta 603 CMR 4.03(4) (6) (7), M.G.L.c.76,Qeybta 5.

Macluumaad Dheeraad ah oo kusaabsan dariiqa gaarka ah ee dugsiga ay bixiyaan

➲ **bostonpublicschools.org/cte**

Barnaamijyada Gaarka ah

# Adeegyada Ardayda

## Caafimaadka iyo Fayo qabka

Marka ay ardaydu caafimaad qabaan, waxay u badan tahay inay noqdaan waxbartayaal guuleysta. Dugsiyadu inay ku guulaystaan inay wax baraan ardaydooda, waa inay sidoo kale daryeelaan caafimaadka, bulshaynimada, iyo dareenka ardeyga. Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay si firfircoon u boorriyaan fayoobaanta jidhaka, bulshanimada, iyo fayoqabka dareenka dhammaan ardayda si ay u taageeraan koritaankkoda caafimaad qaba iyo u diyaar ahaantooda inay wax bartaan. BPS waa:

- hormarinta aqoonta ardeyga ee jirdhisnaanta iyo caafimaadka
- hormarinta daryeelka caafimaadka ee dugsiga ku saleysan
- sare u qaadista dhaqamo caafimaad qaba
- aasaasida jawiga iyo cimilada dugsi caafimaad qaba

Xeerka Fayo qabka Degmada ee BPS (**HWD-01**) waa qorshaha loogu caawinayo dugsiyada qorshahaan. Xeerka waxaa ku jiro waxbarashada caafimaadka dhameystiran, cuntada iyo cabitaanada caafimaadan, jawiyada badbaadada oo taageerada leh, jawiyada caafimaadka jirka, adeegyada caafimaadka, aqoonta dhaqanka, waxbarashada jirka, iyo howsha jirka. Macluumaad badan: **bostonpublicschools.org/hwd**

## Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka

Waaxda Adeeyada caafimaadka Habdhaqanka ayaa leh aqoonyahanno cilminafsiga oo jooga dhammaan dugsiyada BPS iyo shaqaale dhanka bulshada ah oo kashaqeeya arimaha bulshada. Waaxda Caafimaadka Habdhaqanka ayaa barnaamijyo joogto ah oo dhanka caafimaadka ah ayna kujiraan adeegyada kahortaga halista iyo kuwo caawimaada. Waxaa siidheer, kooxda caafimaadka habdhaqanka ayaa ah kooxda gurmadka dhibaatooyinka waalida ee degmada sidaas aweedna kacaawiya dugsiyada iyo ardayda markay arin dhimirka ah sowajahdo. Hadaad donayso inaad dhakhtarka dhimirka kala hadasho cunugaaga, fadlan wac dugsiga cunugaaga. Dhammaan dugsiyadu waxay leeyihiin shaqaale bulsheed oo dugsiga ku saleysan kuwaas oo diyaar u ah inay taageeraan ilmahaaga. Dugsiyo badan ayaa sameeya iskaashi dhanka caafimaadka dhimirka ah oo lagu caawinaayo ardayda iyo bulshada dugsiga. Hadaad doonayso in cunugaaga lasiiyo adegyada talo bixinta, fadlan tag dugsga si aad wax uga ogaato caafimaadka dhimirka ee ay bixiyaan.

Macluumaad dheeri ah: Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka, booqo cbhmboston.com ama **bostonpublicschools.org/behavioral-health** ama wac Andria Amador, Sr. Dir. ee Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka, 617-635-9676

## Succeed Boston

Succeed Boston @ Xarunta La-talinta & Farogelinta (Ku-guuleysiga) waxay u adeegtaa arday badan oo BPS ah khadka tooska ah iyo shaqsi ahaan iyadoo siineysa la-talin, dhisid xirfad bulsho-shucuur, iyo dhaqamo soo celin ah. Succeed waxay leedahay saddex barnaamij oo kala duwan:

1. Barnaamijka muddada-gaaban ee loogu talagalay ardayda ku jirta fasallada 6-12 wuxuu siiyaa adeegyo ardayda ku lug yeelatay xadgudubyada Xeerka Anshaxa ee saameynaya caafimaadka jireed ama maskaxeed ee mid kale oo sababi kara ganaax. Barnaamijku wuxuu taageeraa horumarinta xirfadaha bulshada iyo shucuurta ee kordhiya awooda ardayda ee qiimeynta halista, tixgelinta cawaaqibka, iyo hagaajinta waxyeelada.
2. Barnaamijka iskaa-wax-u-qabso ee hal maalin iyo ka-hortagga waxbarashada waxaa loogu talagalay ardayda dhigata fasallada 1-12 ee ka faa'iideysan kara barashada xoogsheegashada, eexda, maareynta xanaaqa, xallinta khilaafaadka, xuduudaha, amniga internetka, xiriirka caafimaadka leh, iyo daroogada iyo aalkolada waxbarashada iyo ka hortagga.
3. Barnaamijka Isticmaalka Maandooriyaha (SUP) waa barnaamij iskaa wax u qabso ah oo loogu talagalay ardayda isticmaasha daroogada ama qamriga ay walaac ka qabaan. Barnaamijkan wuxuu bixiyaa waxbarasho ku saabsan saameynta daroogada, waxyaabaha la cuni karo, uumiga, iyo aalkolada wuxuuna ardayda siiyaa habab kale oo ay kula tacaalaan diiqadda iyo isku xirnaanta ilaha dibadda, haddii loo baahdo. Haddii aad jeclaan lahayd in ardaygaagu uu ka qayb galo aqoon isweydaarsi iskaa wax u qabso ah,, fadlan wac dugsiga ardaygaaga.

### Wixii Macluumaad Dheeraad ah

- ➲ **succeedboston.org**
- ➲ Jodie Elgee, Agaasimaha Sare........................................617-635-8123

## Adeegyada Caafimaadka

Adeegyada kalkaalisada waa laga heli karaa dhamaan dugsiyadeena. Haddii aad u baahantahay inaad la hadashid kalkaalisada dugsiga, fadlan soo wac xafiiska dugsiga.

Dhammaan kalkaalisada dugsiga way shatiyeysanyihiin si ay ugu dhaqmaan Massachusetts oo waxay ku shahaadeysanyihiin Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare. Masuuliyadaha kalkaalisada dugsiga waxaa ku jiro:

- qiimeynta iyo maamulida baahiyada caafimaadka oo ardayda oo dhan ah
- aqoonsanayo oo ku maamulayo ardayda baahiyada caafimadka gaarka ah
- la shaqeynayo kooxdyada kale ee dugsiga ku saleysan si ay u siiyaan jawiyo badbaado oo caafimaadan
- kormeerayo oo maamulayo daawooyinka iyo nidaamyada caafimaad sida uu sharaxay bixiyaha daryeelka koowaad ee ardayga ama taqasuska caafimaad
- bixinayo gargaarka koowaad iyo daryeel degdega
- ku caawinayo qoysaska inay helaan caymiska caafimaadka oo helaan bixiyaha daryeelka caafimaad
- maamulayo xakameynta cudurada faafaa
- dugsiyada sare, waxay kala shaqeeyaan shaqaalaha kale Kooxda Helitaanka Kondhmoka si loo siiyo helitaanka kondhomyada iyo la talinta wax soo saarka caafimaadka.

Waxaad ku caawin kartaa daryeelka kalkaalisada dugsiga canugaaga adiga oo:

- hubinayo inay kalkaalisada ogtahay haddii canugaaga qabo wax jirada raagta ama daran (sonkorta, cudurka unugyada dhiigga cas, neefta, qalalka iwm.) ama u baahanyahay adeegyada kalkaalinta marka uu dugsiga joogo, marka si aan u siino hoy ku haboon
- xiriirinayo kalkaalisada haddii daawada ama baahiyada caafimaadka isbadelaan
- Bixinta cadaynta marka lasoo galo, taasoo muujinaysa baaritaanada jirka oo wata dhammaan tallaallada oo dhameystiran (Baaritaanku waa inuu noqdaa mid lasameeyay 12 bilood gudahood)
- cusbooneysiinta macluumaadta xiriirka degdega canugaaga ee feelka dugsiga si markaas dugsiga uu marwalba kuula soo xiriiro
- siinta kalkaalsiada ogolaanshaha oo qoraal ahaan si looga hadlo baahiyada daryeelkaaga caafimaad iyo bixiyaha daryeelkaa caafimaadka canugaaga. (Ka fiiri foomamka: **bostonpublicschools.org/healthservices**.)

# Tallaalada

Sida waafaqsan sharciga gobolka, ardayda waa in laga tallaalaa cuduro qaarkood ka hor inta aysan galin dugsiga. Boston Public Schools waxay u baahantahay in ardayda ay lahaadaan tallaadada loo cusbooneysiiyo gelitaanka dugsiga xiliga ay iska diiwaangeliyeen dugsiga. Sharciga Massachusetts, ardayga aan keenin waraaqaha heerka tallaalka hadda (oo ay ku jiraan taariikhda tallaal kasta) waxaa la weydiinayaa inuu ka tago dugsiga illaa ardayga si buuxdo loo tallaalo.

Waraaqaha tallaalka aad ayay muhiim u tahay. Waalidiinta ayaa masuul ka ah joogteynta tallaalada hadda iyo ogeysiinta kalkaalisada dugsiga markii canugooda helo tallaalada dheeraadka ah. Kalkaalisada dugsiga ayaa si joogta ah u eego diiwaanada tallaalka.

### Tallaalada loo Baahan Yahay In la iska Diiwaangaliyo Tloogu talagalay 2021-2022 Sannad Dugsiyeedka

(Fiiro gaar ah: shuruudaha waa sannadkaan kaliya.)

| | K0/K1 (da'aha 3-4) | K2 (da'aha 4–5) | Fasallada 1-6 | Fasallada 7–12 |
|---|---|---|---|---|
| Cagaarshowga B | 3 kuuraha* | 3 kuuraha* | 3 kuuraha* | 3 kuuraha* |
| DTaP/DTP/ DT/Td | ≥ 4 kuuraha DTaP/DTP | 5 kuuraha DTaP/ DTP | ≥4 kuuraha DTaP/DTP ama ≥3 kuuraha Td | 4 kuuraha DTaP/ DTP or ≥3 kuuraha Td |
| Tdap | - | - | - | 1 kuuraha |
| Dabeysha | 3 kuuraha | 3-4 kuuraha^ | 3-4 kuuraha^ | 3-4 kuuraha^ |
| Hargabka | 1-4 kuuraha | - | - | - |
| MMR | 1 kuuraha* | 2 kuuraha* | 2 kuuraha* | 2 kuuraha* |
| Busbuska | 1 kuuraha* | 2 kuuraha* | 2 kuuraha* | 2 kuuraha* |
| MenACWY (Meningococcal conjugate) | - | - | - | 1 qaadasho gr7 1 qaadasho ≥ da'da 16 (xoojiyaha) |
| Ifilada | 1 qaadasho sannadkii | 1 qaadasho sannadkii | 1 qaadasho sannadkii | 1 qaadasho sannadkii |

^ Kuurada ugu dambeysa waa in la qaataa sanadguurada dhalashada ee 4aad ama ka dib iyo ≥ 6 bilood ka dib kuuradiii hore, ama kuuro dheeraad ah ayaa loo baahan yahay

* ama warqad rasmi ah oo ku saabsan cudur

- Wixii macluumaad dheeraad ah, tag: www.mass.gov/service-details/school-immunizations. La xiriir Adeegyada Caafimaadka BPS ee 617-635-6788 haddii aad qabtid su'aalo.
- Intaa waxaa dheer, waxaan si xoogan kugula talineynaa in ilmahaaga laga eego Halista Qaaxada xilliga baaritaanka sanadlaha ah..
- Tallaalka Meningococcal loogama baahna gelitaanka dugsiga. Si kastaba ha ahaatee, Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Massachusetts waxay kula talineysaa hal kuuro tallaalka meningococcal carruurta da'doodu u dhaxayso 11-12 iyo marka ay gelayaan dugsiga sare (da'da 15).
- Marka laga reebo xaalad deg-deg ah ama faafka, ardaydu waxay bilaabi karaan dugsi haddii waalid ama mas'uuka ay keenaan warqad qoraal ah (1)ka socota dhakhtarka in ilmahoodu aan loo tallaalin sababo caafimaad, ama (2) in ilmaha aan la tallaalin sabab waxa uu u rumeysan yahay diintiisa.

# Baaritaanada Jirka

Iyada oo waalidiinta leeyihiin masuuliyada ugu dambeyso ee caafimaadka canugooda, ardayga ayaa masuul ka ah badbaadada iyo fayo qabka ardayda iyada oo dugsiga joogo. Xeerka sharciga gobolka, ardayda ku cusub nidaamka dugsiga waa inay ku keenaan natoojooyinka baaritaanka jirka oo dhameystiran gudaha hal sano kahr intaysan dugsiga galin. Haddii canugaaga ku cusub yahay dugsiga, waxaa waajib ku ah inay keenaan koobiga tallaalada iyo baaritaanka jirka kalkaalisada maalinta koowaad ee dugsiga, xitaa inkastoo aad ku siin kartid diiwaangelinta. MacluumaadMacluumadtaan waxay muhiim u tahay inay siiso ardayda daryeelka caafimaadka ugu wanaagsan inta lagu jiro maalinta dugsiga. Dhammaan ardayda joogteyneyso waa inay haystaan baaritaanka jirka ee fasalada 4, 6, iyo 9.

## Baadhitaanada Jirka ee Ardayda Ciyaartoyda ah

Ardeyda ciyaartoyda ah waa inay ku gudbaan baaritaan jirka ah saddex iyo toban (13) bilood gudahood kahor bilawga xilli ciyaareed kasta. Fadlan ogow in bixiyeyaasha daryeel caafimaad oo badani u baahan yihiin ugu yaraan laba toddobaad si ay u soo saaraan diiwaanada.

# Ku qaadashada Daawo Dugsiga

Kiisaska intooda badan, kaliya kalkaaliyaha caafimaad ee dugsigu baa maamuli karaa daawada ardayda dugsiga. Hase yeeshee, waxaa jira saddex xaaladood oo qof kale oo aan ahayn kalkaalisadu ay ku siin karaan daaweyn arday ah:

- Markuu ardaygu safar gaaban aadayo, kalkaalisadu waxay u xilsaarin kartaa oo u tababari kartaa qof weyn oo kale si ay u maamulaan daawooyinka (daawooyinka).
- Ardayda khatarta ugu jirta dareen-xasaasiyadeed ee nafta halis gelin karta daaweynta degdega ah, sida Epi Pen, baa waxaa siin kara shaqaalaha dugsiga. Kalkaalisada ayaa mas'uul ka ah tababarka iyo kormeerida dhammaan dadka ku lugta leh bixinta daawada.
- Qaar ka mid ah ardeyda ayaa qaadan kara dawadooda, sida tan neefta. Si taas loo oggolaado, waalidku waa inuu la xiriiraa kalkaaliyaha caafimaad ee iskuulka si uu u qorsheeyo Qorshaha Is-Daaweeynta.

Si loo maamulo daawooyinka takhtarku qoro, kalkaalisadu waa inay haysaa amar ka yimid bixiyaha xanaanada caafimaadka ardayga iyo fasax waalid / wakiil oo saxi ixan. Daawooyinka aan takhtarku qoreynin ("Marfashka saaran") sida Tylenol ama Motrin ayaa lagu siin karaa amarrada ay bixiyaan takhtarka BPS iyo sidoo kale waxay u baahan yihiin fasax waalid. Weydii kalkaaliyaha dugsiga ilmahaaga foomka ogolaanshaha. Waalidiintu waa inay keenaan dawooyinka dhakhtarku qoro, waana inay ku jiraan galkoodii asaasiga ah ee farmashiyaha. Had iyo jeer u sheeg kalkaalisada dugsiga haddii uu dhakhtarku bedelay nooca daawada ama qiyaasta. Foomamka oggolaanshaha daaweynta, oo ay saxiixeen bixiyaha xanaanada cunugga iyo ilaaliyaha sharciga ah, waa in loo keenaa kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga. Sidoo kale, kalkaalisada sii qorshe daaweyn ah ee xaaladaha caafimaad ee joogtada ah (xasaasiyadda cuntada, neefta, qalalaasaha, unugyada sickle cell, iwm).

# Caymiska Caafimaadka

Caymiska caafimaadku waxaa heli karaa ilmo kasta oo deggan Massachusetts. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska iyo daryeelka caafimaadka, wac Khadka Caafimaadka Duqa, 617-534-5050. Haddii aad caymis leedahay, fadlan buuxi foomka Cusboonaysiinta Macluumaadka Ardayda oo laga heli karo bostonpublicschools.org/familyguide.

# Baadhitaanka Caafimaadka iyo Barnaamijyada Kale

Kalkaalisada kalkaalisada caafimaadka ee dhowr arimood oo caafimaad ah, laga bilaabo maqalka iyo aragtida isticmaalka walaxda.

Cilladaha baaritaanka ee dhererka, miisaanka, ilkaha, maqalka, aragtida,

# Caafimaadka iyo Fayo qabka

iyo qallajisku waxay ku kala duwan yihiin fasalka. Haddii aysan waalidiintu rabin baaritaankan, waa inay ku muujiyaan qaybta Baaritaanka Caafimaadka ee Foomka Cusboonaysiinta Macluumaadka Ardayda, oo laga heli karo **bostonpublicschools.org/familyguide**.

- **Ogeysiinta Nidaamka Helitaanka Kondhomka**, oo ay ku jirto warqadda ka-noqoshada, ayaa la soo diri doonaa bilowga sanadka dhammaan ardayda cusub ee dugsiga sare. Waalidiinta iyo masuuliyiinta sharciga ah way ka dhaafi karaan carruurtooda helitaanka kondhomka adoo ku wargalinaya Madaxa Dugsiga ama kalkaaliyaha caafimaadka dugsiga qoraal ahaan mayl ah. Haddii aad bedesho maskaxdaada oo aad go'aan ku gaarto in ilmahaagu heli karo kodhamka bilaashka ah, imayl u dir Madaxa Dugsiga iyo kalkaalisada inta lagu jiro sanad dugsiyeedka si aad ugu wargeliso isbeddelkan.
- Haddii maamulaha dugsiga aaminsanyahay in ardayga laga yaabo inuu ardayga haysto qori, hub, shey halis ah, ama daroogo, ama haddii kale ka baqayo in baaritaanka ay wiiqeyso badbaadadiisa ama badbaadadeeda, maamulaha waa inuu ogeysiiyaa Booliska Dugsiga Boston iyo Waaxda Booliska Boston, iyo sarkaalka booliska waa inuu joogaa inta lagu jiro baaritaanka. Sarkaal booliis ah waa inuu goobjoog ahaadaa inta baaritaanka socdo.
- Shaqaalaha loo ogolaaday waa inuu raadiyaa kaliya ardayda isla jinsiga.
- Baaritaanka caadi ahaan waa inay ku xadeysnaataa aagagaas iyo sheeyada si macquul ah looga filan karo inay wataan sheeyada la saariyay, sida sanduuqa, jeebabka jaakada, ama boorsada dhabarka.

Dugsiyada qaarkood waxay isticmaalaan sheegayaasha birta sida qeyb ka ah qorshahooda badbaadada guud. Bulshada dugsiga, Gollaha Aaga Dugsiga, iyo maamulaha/madaxa dugsiga ayaa wada go'aansado haddii dugsiga isticmaalayo sheegayaasha birta. Xeerka waa ihnuu qoraal ahaadaa oo waa inay eegaan Xafiiska Sharciga BPS.

#### Macluumaad Dheeraad ah

- Booqo **bostonpublicschools.org/suptcirculars**
  - Baaritaanada Ardayga Fiir Wareegtada Koreemaraha guud SAF-01.
  - Bir qabatooyin: Fiir Wareegtada Koreemaraha guud SAF-07.
  - Xakamaynta Gelitaanka Iskuulka Fiir Wareegtada Koreemaraha guud SAF-12.

### Dugsiga Oo dhan ama Gurmadyada Bulshada

Dugsi walboo bulshada Boston wuxuu hayaa qorshaha tallabada haddii ay jirto masiibo ama gurmadka bulshada. Qorshaha diyaargarowga degdega dugsiga waxaa loo naqshadeeyay sifooyinka gaarka ah ee dugsigaas. Muhiim ayay u tahay Waalidiintawaalidiinta iyo masuulada inay ogaadaan inuu jiro qorshaha ee mid walba ee dugsiyada carruurtooda, gaar ahaan qorshaha lagula mideynayo waalidiinta iyo carruurtooda haddii laga bixiyey (qixiyey).

### "Nooca Badbaada"

Mararka qaarkood, oo ay la jirto iskaashiga Waaxda Booliska Boston, waxaan wedyiineynaa dugsiyada inay kordhiyaan heerkooda amniga sababtoo carqaladeynta suurtogalka ah ee xaafada. Cabirkaan firfircoon waxaa loo yaqaan "nooca badbaada."

Markii midaan dhacdo, waxay si sahlan ula micna tahay in martida aan loo ogoleyn dhismaha, ardayda iyo shaqaalaha looma ogolo inay ka tagaan, iyo cabirada jiray waa la xoojiyaa. Waxbarida iyo barashada way ka sii socotaa fasalka iyada oo aan laheyn (kuxiran heerka buuqa jira) marka amniga dheeraadka ah la hawlgeliyo. Waxaan rabnaa inaan u hubino qoysaskeena BPS in badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaha ay tahay mudnaanteena ugu sareyso marwalba. Marka qof walba ee dugsiga joogo wuu garanayaa nidaamka, dugsi kasta waxaa looga baahan yahay inuu dhameystiro laba leylis sanadkii.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan nidaamyadaan, fadlan la xiriiri kartaa maamulaha/madax dugsiga ee dugsiga canugaaga.

## Haddii Ay jiraan Degdega:

Ka soo wac **911** iyo/ama mid ka mid ah lambarada BPS:

- Badbaadada Dugsiga ........ 617-635-8000
- Gaadiidka ........ 617-635-9520

### Joogtey Cusbooneysiinta Macluumaadka Degdega Canugaaga!

**Hubi inuu dugsiga hayo macluumaadka HADEER!**

- ☑ Waalid/guriga mas'uulka, shaqada iyo lambarada taleefanka gacanta
- ☑ Cinwaanka imaylka
- ☑ Lambarka ugu wanaagsan ee adiga aad ku heshid wacitaanada taleefonka tooska ah (fiiri bogga 7)
- ☑ Cinwaanka hadda
- ☑ Qofka lala xiriirayo xaaladaha degdegga ah ee leh lambarka taleefanka iyo cinwaanka hadda (haddii waalidka aan lala xiriiri karin)
- ☑ Macluumaadka caymiska caafimaadka

**Wac dugsiga isla hadda haddii ay jiraan wax isbadelo ah**

### Ka Hortagga Xoog u sheegashada iyo Faragelinta

Dugsiyada Dadweynaha Boston uma dulqaadan doonaan dhaqan kasta oo sharci darro ah ama qas ah, oo ay ku jiraan xoogsheegashada dhammaan noocyada iyo noocyada loo geysto kuwa kale ee ku sugan dugsi kasta ama howlaha la xiriira dugsiga. Dugsiyada Dadweynaha Boston si dhakhso leh ayey u baari doonaan dhammaan warbixinnada iyo cabashooyinka xoogsheegashada waxayna qaadi doonaan tallaabo degdeg ah oo wax ku ool ah si loo joojiyo dhaqankaas oo looga hor tago soo noqnoqodkeeda. Ardayda ka welwelsan ama raba inay soo sheegaan xoogsheegashada waxay si kalsooni leh ula hadli karaan xubin shaqaalaha ka mid ah oo lagu kalsoon yahay ama soo wac Leenka Khadka Nabadda iyo Ka Hortagga Xoog u sheegashada 617-592-2378. Kheyraad dheeraad ah iyo taageero waxaa laga heli karaa **www.succeedboston.org** iyo Kormeeraha Guud ee Wareegtada SSS-18.

# Xaquuqda Takoor La'aanta iyo Madaniga

Fursdaa waxbarashada simman iyo sharciyada takoor la'aanta waxay illaaliyaan xuquuqda ardayda ee uga qeybqaato dhammaan howlaha ku saabsan waxbarashadooda. **Bayaanka Xeerka Takoor La'aanta** wuxuu bixiyaa:

> *Boston Public Schools... ma takooro barnaamijkooda, xarumaha, ama shaqada ama fursadaha waxbarashada ee ku saleysan jinsiga, midibka, da'da, diiwaanka dambiga (su'aalaha kaliya), curyaannimada, uurka, guri la'aanta,lab/dheddig aqoonsiga jinsiga, diinta, asalka dhalashada, isirka, dooqa galmada, hibbada, ama heerka milatariga, oo uma dulqaadato qaab walba ka aargoosi, cabsi gelinta eexda ku saleysan, hanjabaada ama dhibaateynta taas oo hoos uuu dhigaysa shafarta shaqsigaama soo dhaxgasho kartidooda ay ku bartaan ama shaqada.*

Hoos waxaad ka heli dontaa sharaxaad kooban ee xeerarka kala duwan ee ka soo horjeedo takoorida Boston Public Schools (BPS). Nuqulka dhammeystiran ka mid ah xeerarkaan, booqo **bostonpublicschools.org/suptcirculars**. Tirada Wareegtada Kormeeraha guud ee la xiriirto ayaa muuqdo kadib dulmarka xeerka hoose.

- **Haddii aad rumeysan tahay in adiga ama ilmahaagu aad la kulantay eex ku saleysan qawmiyad, jinsi, isir, ku jiheynta galmada, ama xubin ka ahaanshaha mid ka mid ah kooxaha la ilaaliyo ee kor ku xusan ama nooc kasta oo anshax xumo galmo ah, ama haddii aad qabtid su'aalaha la xiriiro xeerarka aan takoorka laheyn, fadlan kala xiriir Xafiiska Sinnaanta BPS ee 617-635-9650 ama bpsequity@bostonpublicschools.org.**
- **Ardayda iyo shaqaalaha ku xagudbaa xeerka takoor la'aanta waxay quseyn kartaa edbin, oo illaa iyo ka cayrinta (oo ardayda) ama ka joojinta (shaqaalaha).**

**Bayaanka Takoor La'aanta**. Boston Public Schools waxaa ka go'an inay joogteeyaan jawiga waxbarashada iyo goobta shaqada halka shaqsiyaadka oo dhammaan qowmiyad walba iyo waaya aragnimada laga soo dhaweeyo, lagu dhiirogeliyo, lagu daro, oo way ku kobcayaan. BPS waxaa lagu xaliyay in naceybka iyo ula dhaqanka kala duwan uusan marnaba wiiqeynin ardaydeena ama macaliinteena.

BPS uma dulqaadaneyso dabeecada takoorida, oo ay ku jiraan cabsi gelinta, hanjabaadaha, ama dhibaateynta shaqaalaha, ardayda, ama qof walboo kale ee booqdaa ama qeyb ka ah bulshadeena waxbarashada. Dhaqanka aargoosiga ah ee dhinaca dadka soo wargeliyay eexashada, takoorida, ama dabeecad aan ku habooneyn, oo caawiyay baaritaanka, ama leh haddii kale ku dhaqmay xaquuqdooda sida waafaqsan xeerkaan sidoo kale waa mamnuuc. **EQT-1**

**Takoorida/Dhibaateynta ee Ardayda**. Xeerkaan wuxuu mamnuucaa takoorida ama dhibaateynta ardayda, oo ay ku jiraan ula dhaqanka ardayda si ka duwan, iyada oo la isticmaalayo luuqad aflagaado ah ama tallaabooyin aasaasto cabsi gelin, hanjabaad, ama xadgudubka jawiga waxbarashada, ama diidmada oo ardayga loo ogolaanayo howsha sababtoo ah xubinnimada heerka illaalsan. Wareegtadaan waxay sheegtaa sida loo xareeyo cabashooyinka la xiriiro takoorida lagu eedeeyay oo ku saleysan lab/dheddig, midibka, da'da, curyaannimada, guri la'aanta, jinsiga/nin-naag, aqiinsiga jinsiga, aaminaada diinta, asalka dhalashada, isirka, aargoosiga, dookha galmada, hidaha, ama heerka milatariga. **EQT-2**

**Xeerka Dhaqan xumida Galmada**. Xeerkaan wuxuu sheegayaa in dhaqan xumida galmada, oo ay ku jiraan dhibaateynta galmada iyo weerarka galmada, aan loo dulqaadanaynin, haddii ay sameeyaan shaqaalaha, ardayda, xisbiyada sadexaad; iyo aargoosiga ka soo horjeedo qofka soo wargeliyay dhaqan xumida galmada ama la shaqeeyo baaritaanka sidoo kale looma dulqaadanayo. Dhaqan xumida galmada oo qaab walba ah loogama dulqaadanayo dhulka dugsiga , dhacdooyinka dugsiga maalgeliyay ama howlaha, iyo iyada oo u safrayo ama ka imaanaya dugsiga ama howlaha dugsiga maalgeliyay. Xeerkaan sidoo kale wuxuu sheegaysaa nidaamyada afaraad ee ardayda si ay u soo wargeliyaan weerarka galmada. **EQT-3** iyo **EQT-6**

**Takoor La'aanta Ardayda Ka soo horjeedo ee Ku saleysan Aqoonsiga Jinsiga**. Sharciga Massachusetts iyo Boston Public Schools waxay u baahanyihiin in fasalada oo dhan, barnaamijyada, howlaha, iyo dhaqamada shaqada ay xor ka ahaadaan takoorida ku saleysan jinsiga, dookha galmada, iyo aqoonsiga jinsiga. Wareegtadaan waxay u sheegaysaa jaheynada dugsiyada iyo shaqaalaha degmada si ay u aasaasaan dhaqan halka labeebka iyo ardayda aan xaqiijineynin jinsigooda inay badbaado dareemaan, la taageero, oo si buuxdo loogu daro, iyo si loo buuxiyo waajibaadyada dugsi walba si loo siiyo fursadaha waxbarashada dhammaan ardayda. **EQT-4**

**Takoor La'aanta Ardayda Ka soo horjeedo oo ay la jirto Curyaannimada**. BPS waxaa ka go'an xeerka takoor la'aanta ka soo horjeeda ardayda u qalanta ee qabta curyaannimada, sida waafaqsan Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta ee 1973, Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ee 1990, iyo Sharciga Takoorka Ka soo horjeedo ee Massachusetts (M.G.L. 151B). Ardayda lixaad la'a laga yaabo inaan laga saarin, loo diidin faa'idooyinka, ama loo diidin gelitaanka barnaamij ama howl walba oo ku saleysan kaliya curyaannimadooda. SPE-21

**Sharciga Duleynta**. Sharciga Massachusetts wuxuu ka dhigaa dambi in laga qeybgalo howlaha duleynta. Duleynta waxaa laga wadaa dhaqan walba ama qaab walba ee bilaabida hay'ada walboo arday ah, hadii bulsho ahaan ama ama hantida gaarka ah, oo si bareer ah ama aan taxadar laheyn halis u geliyaa caafimaadka jirka ama maskaxda arday walba ama qof kale. Xeerka BPS ee duleynta waxaa ku jiro ka tashiga waajibaadka sharciga ee qofka inaad ku soo wargelisid maamulada fullinta sharciga haddii isaga ama iyada ogtahay in qof ku duleynayo dhibanaha ama uu joogay goobta dambiga noocaas ah. **LGL-01**

### Macluumaad Dheeraad ah

- La xiriir shaqaalaha Sinnaanta ee 617-635-9650 **bpsequity@bostonpublicschools.org**
  - Assistant Superintendent of Equity
  - Director of Compliance, Title IX Coordinator
  - Dir. ee Tababarka & Hoyga,
  - Qeybta 504 Isku-duwaha
  - Maareeyaha Sinnaanta
  - LGBTQ + Maareeyaha Taageerada Ardayda

# Xeerka Anshaxa

Ardayda waxay u baahanyihiin jawi badbaado oo nidaamsan oo wax lagu baranayo. Si loo hubiyo tahn, dhammaan waxay raacaan **Xeerka Anshaxa BPS**. Dugsi walbo, macalimiinta iyo waalidiinta sidoo kale waxay hormariyeen oo ay raaceen **Sharciyada Dugsiga Ku** saleysan (kafiiri geeska). (Eeg dhinaca.) Dulmarka xeerka Anshaxa waxaa xigo dhoorka bog ee xiggo ee jaheyntaan. Waa inaad heshaa koobiga Sharciyada Dugsiga Ku saleysan ee dugsiga canugaaga ah iyo Tilmaamta. Labadoodaba aad ayay muhiim u yihiin. Waxaad ka arki kartaa Xeerka Anshaxa ee **bostonpublicschools.org/code-of-conduct**.

## Sharciyada Dugsiga Ku saleysan

Dugsi walba wuxuu leeyahaysharciyadiisa gaarka ah ee xadgudubyada aanan laga joojin karin—ee loo yaqaan sida "Sharciyada Dugsiga Ku saleysan"—ee ardaydooda laga filanayo inay raacaan. Hal dugsi oo dhexe, tusaale ahaan, ardayda waxaa la weydiin karaa inay u fadhiyaan si aamusnaan ah oo nidaamsan fasalkooda xigga. Dugsiga kaloo dhexe, ardayga waxaa loo ogolaan karaa inuu fasalka ku soo galo kooxyo yar.

Haddii ardayga jabiyo hal ama kuwa badan oo Sharciyada Dugsiga Ku saleysan, isaga ama iyada waxay quseyn kartaa anshaxa hormarka. Maamulaha wuxuu weydiin karaa ardayga inuu saxiixo heshiiska lagu badelayo dabeecadiisa ama dabeecadeeda, ama lagu joogteynayo ardayga kadib dugsiga oo haynta.

Sharciyada Dugsiga Ku saleysan waxaa qoray guddiga maamulayaasha, macalimiinta, iyo waalidiinta ee dugsi walba oo waxaa la eegaa gu' walba ee Gollaha Aaga Dugsiga. Dugsiyada dhexe iyo sare, ardayda sidoo kale waxay ku jiraan guddiga. Sharciyada Dugsiga Ku saleysan waa in la dhiggaa fasal walba oo guriga loola diraa ardayga Sebteembar walba.

# Xeerka Anshaxa BPS

Dugsi walba waa inuu sidoo kale raacaa Xeerka Anshaxa Boston Public Schools. Fuarah wuxuu qoraa sharciyada ah in ardayda oo dhan laga filanayo inay raacaan. Haddii sharciyada dugsiga ku saleysan qilaafo xeerka Anshaxa, Xeerka wuxuu quseynayaa.

Xeerka Anshaxu wuxuu xoojinayaa habab ka hortag iyo togan oo ay ka mid yihiin habab wax loo baro oo lagu soo celiyo. Dugsi walba wuxuu leeyahay nidaamka badan oo isku xirtaageerada ee bulshada ardayga, dareenka iyo baahiyada dabeecada. Ardayda waxay ka helaan waxbarasho bulshada iyo xirfadaha dareenka iyo filashooyinka cad oo illaa Waxqabadka Dabeecada Wanaagsan iyo nidaamka Taageerada.

Dhammaan isdhaxgalada hormarka iyo cawaaqiibta waxaa loogu talo galay inay sheegto sababaha dabaacada xun, xalinta qilaafyada, buuxinta baahiyada ardayga, iyo ku haynta ardayga dugsiga. Niyadda lagu saxay kor u qaadisyta xeerka waxay muujinaysaadhaqamada aan lagu dareynin ka hor inta aan la tixgelin ka reebida, marwalboo suurtogal ah. Sida waafaqsan Xeer Anshaxa, dhammaan jawaabaha anshaxa waa in loo isticmaalaa si ku haboon, cadaalad ah, iswaafaqsan, oo illaalisaa xaquuqda ardayga ee waqtiga waxbarashada marwalboo suurtogal ah.

Sharciyada Ku saleysan Dugsiga iyo Xeerka Anshaxa wuxuu quseeyaa dabeecada ardayga marka ay joogaan dugsiga, howlaha dugsiga maalgeliyay, iyo wadadooda u socodka iyo ka imaanshaha dugsiga (ee baska dugsiga, joogsiga baska, ee MBTA, iyo socodka).

Xagaaga 2021, Xeerka Anshaxa ee dib loo eegay ayaa la soo gabagabeyn doonaa lana soo bandhigi doonaa. Xeerka dib loo eegay ee 2021 wuxuu ahaan doonaa **bostonpublicschools.org/code-of-conduct**.

**Haday jiraan wax su'aalo ama walaacyo aad kaqabto Xeerka Anshaxa, gaar ahaana cayrinta degdega ah, hawsha socota, ama racfaanada kadhanka ah cayrinta/fiijinta, kala xariir Xafiiska Madaxa Maamulaha Guud ee Shaqooyinka oo nambarkiisu yahay 617-635-6755**.

## Yaysan Ku dhaafin Mudnaanada Dugsiga!

Ardayda waxay leeyihiin fursada looga qeybqaadanayo shaqooyinka iyo howlaha dugsiga oo badan, sida safarada dalxiiska, dabaaldagyada, waxqabadyada, maalmaha bandhigaya fasalka, riwaayadaha, iyo xafladaha qalinjabinta, ee kuwa kale kamidka ah. Ka qeybqaadashada howlo noocaan ah waxalagu helaya mudnaan —aan aheyn "xaq." Ku xadgudubka sharciyada dugsiga ama Xeerka Anshaxa, adiga oo ka qeybgalayo howlo sharci daro ah ee ka baxsan dugsiga, ardayga wuxuu lumin karaa mudnaanadaan. Maamulahaama madaxa dugsiga waxay leeyihiin maamulka lagu xadeynayo ama lagu diidayo ka qeybqaadashada ardayda ee shaqooyin gaar ah iyo howlo noocaas ah.

## Diidmada Gaadiidka

Haddii ardayga halis geliyo badbaadadiisa ama badbaadada gaarka ah ama badbaadada kuwa kale inta uu saaran yahay baska dugsiga ama ku meelgaarka bulshada, maamulaha ama madax dugsiga wuxuu u diidi karaa gaadiidka la siiyay ardayga. Ardayga waxaa laga joojinayaa oo kaliya wadada baska ay ka dhacdada arrinta.

Waxaa loo diidi karaa gaadiidka illaa sadex maalmood iyada oo aan jirin dhageysiga. Diidmada gaadiidka oo afar ama maalmo badan oo isku xigga , ama in ka badan lix maalmood ee muddada suuqgeynta, waxay u baahanyahay dhageysiga. Dhammaan fasalada, maamulaha ama madax dugsiga waa inuu soo ogeysiiyaa waalidiinta ka hor inta aan laga joojin ardayga baska. Ardayda waxaa laga filanayaa inuu dugsiga imaado maalmaha goortii isaga ama iyada aan loo ogoleyn baska illaa ardayga sidoo kale laga joojiyay dugsiga. Diidmada gaadiidka ee ardayga leh IEP ee u baahan adeegyada gaadiidka waxaa ilaalin kara xuquuqo iyo habab dheeri ah.

## Ka joojinta

Ka joojinta Waqti-Gaaban macnaheedu waa ardayga looma oggola inuu dhigto dugsiga maalmo kooban oo dugsi. Ardayga 15 sanno jirka ah ama ka hooseeyo, ka joojinta waqtiga gaaban waxay noqon kartaa illaa sadex maalmood dugsi oo saf ah. Ardayda 16 sanno jirka ah ama ka weyn, ka joojinta waxay noqon kartaa illaa maalmood dugsi ah isku xigto.

Fadlan ogow ardeyda fasalka K0-2 lagama ceyrin karo dugsiga. Ardeyda ku jirta fasallada 3-5 Xadgudubyada ka joojinta waxay ku kooban yihiin:

- haddii ardayga lagu eedeeyo inuu faraxumeeyey arday fasalka ka mid ah ama shaqaale; ama
- haddii ardayga lagu eedeeyo inuu haysto hub khatar ah; ama
- haddii ardayga lagu eedeeyo inuu haysto walax la kontoroolay; ama
- haddii ardayga lagu eedeeyo anshax xumo; ama

- haddii ardayga lagu eedeeyo xadgudub xuquuqda madaniga ah; ama
- haddii ardayga lagu eedeeyo xoogsheegasho soo noqnoqda.

**Ka joojinta muddada dheer** waa ka reebida dugsi in ka badan 10 maalmood isku xigto ama isku darka. Arday kasta oo laga joojiyo dugsiga in ka badan toban maalmood oo isku xigta, ha ahaado iskuulka ama dibedda, wuxuu fursad u helayaa inuu helo adeegyo waxbarasho iyo inuu horumar horumarineed ka sameeyo xagga la kulanka shuruudaha gobolka iyo deegaanka iyadoo loo marayo qorshaha adeegga waxbarashada ee dugsiga oo dhan. Inta lagu jiro muddada cayrinta ama cayrinta muddada-dheer, ardayda fasalka dhexe waxaa loo qoondeeyaa Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Muddada Dheer. Ardayda dugsiga sare waxaa loo qoondeeyay barnaamij kale oo dugsi sare ah. Markii muddada ganaaxa ardayga dhammaato, waxay ku laaban karaan isla iskuulka, haddii uu ogolaado hogaamiyaha iskuulka, ama waalidka/mas'uulka (ama ardayga 18 ama ka weyn) waxay aadi karaan Xarunta Soo-dhaweynta BPS si ay uga diiwaan geliyaan ardayga isqorista Dugsiyo Dadweynaha Boston ka duwan.

**Nidaamka Ka joojinta iyo Xaquuqda Sharciga**. Maamulaha ama madaxa dugsiga hortiisa ayaa looga joojin karaa ardayga, isaga ama iyada waa in loo qabtaa dhageysi dugsiga oo lagu casuumaa ardayga iyo waalidka/masuulka ardayga. Dugsiga waa inuu siiyaa waalidiinta / masuulada ogeysiin qoran ee dhageysiga Ingiriiska iyo luuqada looga hadlo guriga. Dhageysiga, maamulaha madaxa dugsiga ayaa maqlaa marqaatiyada oo go'aansadaa haddii ardayga laga joojinayo. Haddii ardayga ama waalidka/masuulka ku diidaan ka ganaaxa, waxay uga racfaan qaadan karaan go'aanka Sarkaalka Dhageysiga Kormeeraha guud oo gudaha 10 maalmood oo dugsi.

Mararka qaarkood waxaa laga joojin karaa dhageysiga ka hor. Tani waa ka saarid degdegan ah waxaa lagu soo rogi karaa kaliya markii ardayga uu sameeyay dambi halka ardayga joogitaanka ardayga ku soo rogo halis joogta ah ee dadka ama dhismaha ama si daran u carqaladeeyo waxbarida iyo barashada, iyo kaliya inta ka hartay maalintaas dugsiga. Ardayga waxaa laga saari karaa kaliya inta ka hartay maalinta iskuulka ee ka saarida deg degga ah. Ka saarida degdega ka hor, maamulaha ama madaxa dugsiga waa inay isku dayaan inay ogeysiiyaan waalidka. Ardayga waa in la siiyaa habeyn ku filan si amaan ah loogu qaado guriga. Dugsigu waa inuu bixiyaa ogeysiiska hadalka iyo qoraalka loo baahan yahay wuxuuna isugu yeeri doonaa dhageysiga edbinta laba (2) maalmood oo dugsi gudahood. Ka saarida degdega ah waa in lagu qoro nidaamka SIS/Aspen.

## Ka ceyrinta

KAceyrinta waa ka saarida ardayga dhismaha dugsiga, howlaha fasalka joogtada ah, iyo howlaha dugsiga in kabadan sagaal maalmood dugsi, aan xad laheyn, ama toos ah. Ardayda waa laga ceyrin karaa haysashada hub khatar ah, haysashada maandooriye, ku xadgudub shaqaalaha waxbarashada, ama dambi culus ama xukun haddii hogaamiyaha iskuulka uu go'aansado in sii joogitaanka ardayga ee dugsiga ay saameyn weyn ku yeelan doonto daryeelka guud ee dugsiga.

### Nidaamka Ka-ceyrinta

1. Xaaladdaha qaarkood, markii ardayga sameeyo dambi looga saari karo, maamulaha ama madaxa dugsiga waxay dalbi karaan ka joojinta degdega ah oo sababaha badbaadada ah.
2. Dhageysiga ka joojinta, maamulaha ama madaxa dugsiga ayaa dhageysto marqaatiyada oo baaro cadeynta. Ardayga ama waalidka/masuulka waxay keeni karaan u doode ama qareen dhageysiga. Haddii horey loo aqoonsaday ama la codsaday, dugsigu wuxuu turjubaan u fidin doonaa waalidiinta/mas'uuliyiinta aan luuqadooda koowaad ahayn Ingiriis. Dugsiga waa inuu sameeyaa duubitaanka dhageysiga oo sameeyaa duubitaanada loo heli karo waalidka ama ardayga markii la codsado.
3. Waxaa xigo dhageysiga, maamulaha ama madaxa dugsiga ayaa u diro tallo qoraal ah Maamulaha ku haboon ee Shaqooyinka eegida ee Xuquuqda Sharciga. Haddii maamulaha ama madaxa dugsiga go'aansadaan inay ka saaraan ardayga, ardayga iyo waalidka/masuulka waa in lagu ogeysiiyaa qoraal ahaan.

**Ka racfaan qaadashada Ka joojinta ama Ka ceyrinta**. Haddii ardayga ama waalidka/masuulka ku diidaan ka ganaaxa, waxay uga racfaan qaadan karaan go'aanka Sarkaalka Dhageysiga Kormeeraha guud oo gudaha 10 maalmood oo dugsi. Kormeeraha guud ayaa hogaaminaya dhamaan racfaanada cayrinta. Rafcaannada ka joojinta, Kormeeraha guud wuxuu magacaabi karaa sarkaal dhageysi.

**Inta lagu jiro iyo Kadib Muddada Ka ceyrinta**. Arday kasta oo laga eryo dugsiga in ka badan toban maalmood oo isku xigta, ha ahaado iskuulka ama dibedda, waa inuu fursad u helaa inuu helo adeegyo waxbarasho oo uu ku gaadho horumar tacliimeed xagga la kulanka shuruudaha gobolka iyo deegaanka iyada oo loo marayo qorshaha adeegga waxbarashada ee dugsiga oo dhan. Markii muddada ganaaxa ardayga dhammaato, waalidka/masuulka (ama da'da ardayga 18 ama ka weyn) waa inuu aadaa Xarunta Soo dhaweynta BPS oo dib isaga diiwaangeliyaa Boston Public Schools. Ardayga s looguma xilsaarayo dugsiga ee isaga ama iyada laga saaray illaa maamulaha ama madaxa dugsiga ku taliyaan midaan xiliga ka ceyrinta.

**Ka fiiri Succeed Boston bogga 28 wixii ku saabsan dhaqancelinta soo celinta ardaydaas ku lugta leh xadgudubyada Xeerka Anshaxa.**

## Ciqaabka Jirka

Sida waafaqsan sharciga gobolka iyo xeerka Gollaha Dugsiga, shaqaalaha dugsiga kuma ciqaabin karaan ardayga iyada oo dhufanaya, ama riixayo, ama isticmaal walba ee xooga jirka. Shaqaalaha dugsiga waxay isticmaali karaan xooga jirka macquulka ah si loo joojiyo ardayga kaliya haddii (1) waxqabadka aan -jirka aheyn ay wax ku ool aysan noqoneyn ama aan horay wax ku ool u aheyn, iyo/ama (2) waxay aaminsanyihiin tallaabada ardayga laga yaabo inay sababto dhaawaca jirka ee ardayga ama dadka kale. Xubinta ka tirsan shaqaalaha barnaamijka ee maamusha xannibaadda ayaa af ahaan ugu wargelinaysa Maamulaha/hogaamiyaha dugsiga xannibaadda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah iyo warbixin qoraal ah oo aan ka dambayn maalinta shaqada ee xigta.

Maamulaha / hogaamiyaha iskuulka waa inuu sameeyaa dadaal macquul ah si uu hadal ugu sheego waalidka ardayga xannibaada 24 saacadood gudahood dhacdada. Warbixin qoran ayaa loo diri doonaa waalidka ardayga iyada oo loo soo diri doono emayl ama boosto caadi ah ugu dambayn saddex maalmood oo dugsiga lagu xannibo. Shaqaalaha dugsi walba isticmaalo xoog aan macquul aheyn sida waafaqsan edbinta.

# Xeerarka BPS

## Xeerka Anshaxa

### Ardayda leh Curyaannimada

Xeerka Anshaxa wuxuu quseeyaa dhammaan ardayda. Waxaa jiro nidaam gaar ah, si kastaba, wixii ardayda anshaxa ee qaba curyaannimada. Waxaad ka heli kartaa nidaamkaan websaydka BPS. Waxaa lagu sharaxay Wareega Kormeeraha Guud SPE-15. Tani waa la dajisan karaa oo la daabacan karaa. Haddii aad doorbidid, dugsiga canugaaga wuxuu ku siin karaa koobiga warqadaanx iliga aad codsatid. Nidaamkaan sidoo kale waxaa ku jiro buugyaraha Xuquuqda Waalidka ee aad la heshay Barnaamijka Waxbarashada La gaareeyay (IEP).

### Sida Waalidiinta ay u Caawin Karaan

Sida waalidka, waxaad ku caawin kartaa canugaaga inuu cadeeco sharciyada oo ku haayo joogteynta badbaadada dugsiga xiliga:

- wadaagista masuuliyada dabeecada canugaaga ee dugsiga ku jiro, howlaha dugsiga maalgeliyay, iyo wadada u socodka iyo ka imaanshaha dugsiga
- u diyaarinta canugaaga inuu masuuliyad ka qaado ka qeybgalida dugsiga iyo dabeecadiisa ama dabeecadeeda gaar ah
- korinta dabeecadaha wanaagsan ee canuga ee dhinaca nafsadiisa ama nafsadeeda, kuwa kale, dugsiga, iyo bulshada
- la xiriirida shaqaalaha dugsiga ee ku saabsan canugaaga
- ka qeybgalida shirarka shaqsiga ama kooxda
- aqoonsiga in xubnaha shaqaalaha dugsiga xaq u leeyihiin inay fulliyaan xeerarka Gollaha Dugsiga Boston
- ku dhaqmayo qaab madani ama aan carqalad laheyn marka booqanayo dugsiga
- hubi in canugaaga keeno dugsiga kaliya kuwa ku haboon goobta dugsiga.

### Halkee laga Helaa Xeerka Anshaxa

- Booqo **bostonpublicschools.org/code-of-conduct**
- Booqo **bostonstudentrights.org** iyo ka dajiso app-ka mobeelka. Ee loo hormariyay ardayda, waxay soo bandhigtaa Xeerka Anshaxa oo la badelay, qaabka la fududeeyay, iyo Macluumaadka xaquuqaha ardayga iyo masuuliyada iyo illaha gargaarka sharciga.
- Xiriirka Xarunta Soo dhaweyn walba BPS (bogga 5) ama Xafiiska Kormeeraha guud (617-635-9050 ama **superintendent@ bostonpublicschools.org**) si aad u codsatid koobi daabacan.

### Dambiyada ee Ardayda laga yaabo In looga Joojiyo ama Looga saaro

**Ardayga waxaa ayaa laga yaabaa illaa kaleendarka hal sanno kaliya dambiyadaada halista ah:**

- haysashada qori halis ah, oo ay ku jiraan, laakin maka xadidna, qori ama mindi
- haysashada waxyaabaha la xakameeyay, oo ay ku jiraan laakin kama xadidna xashiishka, kookeynta, iyo heroyiinta
- weerarka shaqaalaha dugsiga
- eedeymaha dambiga culus ama xukunka

**Ardayga waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxodambiyadaas halis ah:**

- weerarka galmada
- weerarka iyo cayda ee qofka oo ku sababayo dhaawaca jirka oo muhiimka u ah isdifaacida
- halis gelinayo badbaadada jirka ama caafimaadka maskaxda/dareenka ee qof kale ee isticmaalka hajabaada ee xooga loogu xiriiriyay micnooyinka, oo ay ku jiraan cilmi farsamada. Tani waxaa ku jira xooga, sawirka, xoogsheegsiga iyo xoogshegsiga intarneetka.
- haysashada qori halis ah ee lagu mamnuucay sharciga, ama shey aan wax micno leh loo isticmaaleynin
- isticmaalka shey walba ee halis ah ama qaabka hanjabaad ah
- goobta ama isku dayayo inuu dab qabadsiiyo dhismaha dugsiga, howlaha dugsiga maalgeliyo, ama gaadiidka dugsiga bixiyo
- waxyeelayo ama xadayo hantida gaarka ah ama dhismaha dugsiga
- sameynayo hanjabaada bambada ama xoogsheegsiga/soo wargelinayo alaarmiga dabka oo been ah
- ku xadgudbayo xaquuqaha madaniga ee dadka kale
- galmo ahaan dhibaateynayn qof kale
- isticmaalista o midaab takoorka jinisyada ama qowmiyada ama luuqad fisqi ah
- jabinayo sharciyada isticmaalka la ogolaan karo ee i-meelka iyo Intarneetka
- carqaladeynayo dugsiga ama howsha fasalka, oo ay ku jiraan isticmaalka aan la ansixin ee mobeelada
- joogitaanka aaga dhismaha dugsiga ee ka xadeysan ardayda
- diidayo inuu is sheego isaga ama iyada
- faragelinayo diiwaanada dugsiga
- ka tagayo dugsiga iyada oo aan la fasaxin ama ogoynayo fasalada si xad dhaaf ah
- ku guuldareysanayo inuu ka qeybgalo ama si iswaafaqsan uga qeybgalo BPS Xarunta Succeed Boston iyada oo aan jiri cudur daar macquul ah; ama ku xadgudbayo Qeybta 7 ee Xeerka Anshaxa isaga oo ka qeybgalayo xarunta..

Xaaladaha qaarkood, ardayga waxaa si aan xad laheyn looga joojin karaa ama looga saari karaa dhaqanka aan la xiriirin dugsiga ama howlaha dugsiga, sida markii ardayga lagu eedeeyo ama lagu xukumo dambi weyn iyo maamulaha ama madaxa dugsiga go'aansadaan in joogitaanka ardayga ee joogtada ah ay carqaladeyneyso dugsiga.

OGEYSIIS: Liiska kore waxaa loogu talo galay sida jaheyn kaliya. Fadlan tixraac Xeerka Anshaxa, Qeybta 7, wixii nliis dhameystiran ee dambiyada iyo ciqaabyada.

# Isticmaalida Cilmiga farsamada ee Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxay bixisaa illaha cilmiga farsamada balaaran oo isticmaalka ardayda iyo shaqaalaha. Illahaan waxaa loo isticmaalayaa kaliya ujeedooyinka waxbarashada. BPS Xeerka Isticmaalka La ogolaan karo wuxuu tilmaamaa masuuliyada isticmaalka oo mamnuucaa howlaha marka la isticmaalayo dhammaan cilmiga farsamda, oo ay ku jiraan shabakadaha, qalabyada korontada, iyo illaha onleenka. Xeerka waxaa lagu hormariyay tallada maamulayaasha BPS, macalimiinta, ardayda, waalidiinta , jaalalka bulshada, booliska dugsiga, iyo la taliyaha sharciga BPS. Waxay quseysaa dhammaan isticmaalayaasha shabakada BPS, oo ay ku jiraan shaqaalaha, ardayda, iyo martida. Gollaha Dugsiga ayaa soo saaray AUP ee gu'ga 2014 si loo daboolo kuwa badan oo cilmiga farsamada cusub ee in dugsigeena uu isticmaalayo ama jeclaan lahaa inuu isticmaalo fasaladooda.

Arday walba waxaa laga filanayaa inuu raacaan dhammaan sharciyada iyo sharuudaha hoos lagu qoray, sidoo kale sida kuwa hadal ahaan loo siiyay macalimiinta BPS iyo maamulayaasha, iyo si loo muujiyaa muwaadinnimo wanaagsan iyo dabeecada anshaxa oo marwalba ah.

## Xeerka Isticmaalka La gali karo ee Cilmiga farsamda, Oo ay ku jiraan Interneetka: Isticmaalka Masuuliyada Ardayga

1. Waxaan masuul ka ahay akoonka kumbiyuutarkeyga iyo akoonka i-meelka. Waan fahamsannahay in fuarayaasha ay gaar yihiin oo waa inaanan la wadaagin furaheyga qofna. Waan fahamsannahay inaan masuul ka ahay howlaha oo dhan ee lagu sameeyo dhinaca akoonkeyga. Uma ogolaanayo dadka kale inay isticmaalaan magaca akoonkeyga iyo furaha, ama isku dayaan inay isticmaalaan midka dadka kale. Waan fahamsannahay in ku xadgudbayo sharciga haddii aan isku dayo inaan koronto ahaan u qabto furaha qof kale. Waan fahamsannahay inay muhiim tahay in laga baxo kumbiyuutarka dhammaadka kulan walba sida darteed isticmaale kale ma isticmaali karofuraheyga.
2. Masuul ayaan ka ahay luuqadeyda. Waxaan isticmaalayoluuqad ku haboon ee fariimaha i-meelkeyga, qoraalada onleenka, iyo xiriirada kale ee casriga ah. Ma isticmaali doonoo aflagaadada, edab darada ama luuqad kale ee aan ku habooneyn sida ay go'aansadeen maamulayaasha dugsiga.
3. Waxaan masuul ka ahay sida aan ula dhaqmo dadka kale. Waxaan u isticmaalayaa i-meelka iyo ciwaanada kale ee isgaarsiinta (tusaale ahaan boggaga, wikis, sheekeysiga, fariinta degdega, boorarka wada xaajoodka, iwm.) si masuul ah. Ma dirayo ama ma soo dhigayo fariin naceyb ama dhibaateyn ah, sameeyo takoorida ama hadalada dadka hoos u dhigayo ee dadka kale ku saabsan, ama ka qeybgalo xoogsheegsiga, dhibaateynta, ama dabeecadaha kale ee xun iyada oo aan joogo dugsiga ama meel ka baxsan dugsiga.
4. Aniga ayaa masuul ka ah isticmaalkeyga shabakada Boston Public Schools) . Waxaan u isticmaalayaa illaha cilmiga farsamada BPS si masuul ah. Ma raadinayo, maka dajisanayo, ma keydinayo, ma qeybinayo ama ma muujinayo qoraalada naceybka ku saleysan, xadgudubka ah ama galmada cad. Ma raadin doonoo, soo celina, ma keydinayo ama ma qeybinayo sawirada ama macluumaadka ku saabsan hubka iyada oo la isticmaalayo illaha cilmiga farsamada BPS illaa uu ogolaado maamulaha/macalinka sida qeyb ka ah shaqada dugsiga.
5. Masuul ayaan ka ahay dhaqankeyga ee dhammaan bogga onleenka. Waan fahamsannahay in waxa aan ku sameeyo websaydyada shabakada bulshada waa inaysan si xun u saameynin jawiga waxbarashada jawiga dugsiga iyo/ama ardayda isla socdaan, macalimiinta iyo maamulayaasha.
6. Waxaan masuul ka ahay daacad ahaanshaha anigoo onleen ah. Waan fahamsannahay in isu ekeysiinta, buufinta, ama matalaada inaad tahay qof kale waa ka mamnuuc. Tani waxaa ku jira, laakin kama xadidno, dirista i-meelka, aasaasida akoonada, ama fariimo dhigida ama tusmooyinka kale ee onleenka (tusaale ahaan qoraalada, sawirada, dhageysiga ama fiidiyaha) ee magaca qof kale.
7. Waxaan masuul ka ahay illaalinta amniga shabakada Boston Public Schools. Iskuma dayayo inaan ak maro goobaha amniga ama fiiltareeyayaasha Intarneetka, ama dhaxgalo howlgalka shabakada iyada oo la gelinayo softaweer sharci daro ah, oo ay ku jiraan feel wadaagida, softaweerada la wadaago, ama softwaeerada bilaashka ah, ee kumbiyuutarada bulshada.
8. Waxaan masuul ka ahay illaalinta dhismaha dugsiga. Waan fahamsannahay in qaribaada ay mamnuuc tahay. Tani waxaa ku jira laakin kama xadidna gelida, badelida, ama baabi'inta qalabka, barnaamijyada, feelasha, ama goobaha kumbiyuutar walba ama illaha cilmiga farsamada. Waan fahamsannahay inaan u baahannahay ogolaanshaha ka imaanayo maamulaha/macalinka dugsiga si lagu isticmaalo qalabyada korontada gaarka ah ee aan keeno dugsiga, oo ay ku jiraan laakin kama xadidno qalabyada keydinta xasuusta (tusaale. qalabyada USB).
9. Waxaan masuul ka ahay ixtiraamida hantida dadka kale ee onleenka ah. Waan hogaansamayasharciyada xaquuqda daabacaada. Ma qiyaanayo ama ma isticmaalayo koobiyeynta ama isticmaal isticmaalka dadka kale' shaqada aan jirin maxkamada ugu yeerid ama ogolaansho ku haboon. Si sharci daro ah uma dajisanayo qoraalada ku illaalsanyahay xaquuqda koobiga, oo ay ku jiraan laakin kama xadidna muusiga iyo filimaanta.
10. Waxaan masuul ka ahay raacida sharciyada dugsiga marwalboo aan wax ciqaabo. Waxaan raacayaa dhammaan jaheynada ay dajiyeen BPS iyo/ama macalimiinteyda marka ay ku daabacayaan shaqada dugsiga onleenka (tusaale ahaan websaydka, bogga, wiki, boorka wada xaajoodka, warbaahinta ama qadka fiidiyowga). Waan fahamsannahay inaysan badbaado aheyn in la soo dhigo macluumaad gaar ah ooku saabsan nafsadeyda, oo ay ku jiraan laakin kama xadidno: magaceyga, ciwaanka, lambarka taleefonka ama dugsiga. Ma soo dhigayo sawirada ardayda ee leh magacyadooda koowaad ama dambe bog walba oo onleen ah, oo ay ku jiraan laakin kama xadidna websaydyada, shabakadaha bulshada, boggaga, wikis, iyo kulamada wada xaajoodyada, iyada oo aan ogolaansho waalidka/masuul ah jirin ama ardayga (da'da 18 iyo ka weyn).

*Waxbadan ka baro*

**Badbaadada Intarneetka BPS**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ardayda iyo qoysaska ku saabsan Nidaamka Isticmaalka La Aqbali Karo:

**bostonpublicschools.org/technology**

(fiiri qeybta Xeerka Isticmaalka La ogolaan karo)

# Xeerarka BPS

## Sharuuda Daganaanshaha ee Ardayda

Kaliya ardayda ku nool Magaaladda Boston ayaa iska diiwaangelin karo oo ka qeybgali karo Boston Public Schools xeerkiiba BPS iyo waafaqsan Sharciga Guud ee Massachusetts Sadarka 76, Qeybta 5. Dadka degan ee ardayda ka hooseyso da'da 18 waa daganaanshaha sharciga ee waalidka ama masuulada ee qaba haynta jirka ee canuga. Ardayga da'da 18 ama ka weyn wuxuu aasaasi karaa daganaansho ka gooniyeysan waaladiintiisa ama waaladiinteeda ama masuulada oo ujeedooyinka ka qeybgalka dugsiga.

"Dadka dagan" waa meesha halka qofka si joogta ah ugu noolyahay. Daganaanshaha ku meelgaarka ah ee Magaaladda Boston, kaliya ujeedada ka qeybgalka dugsiga bulshada Boston, loom atixgelin "daganaansho."

Xeerka daganaanshaha ma quseeyo ardayda guri la'aanta. Wixii su'aalaha la xiriiro ardayda guri la'aanta, fadlan ka soo wac Xafiiska La talinta Sharciga, 617-635-9320.

### Cadeynta Daganaanshaha Magaaladda Boston

Si markaas la isaga diiwaangeliyo ogolaanshaha dugsi walboo bulshada Boston, waalidka ardayga ama masuulka sharciga waa inuu siiyaa labo cadeymo daganaanshaha Magaaladda Boston ee liiska hoose. Waraaqaha waa in horay loogu daabacaa magaca iyo ciwaanka hadeer ee waalidka/masuulka ardayga (ama ardayga haddii uu jiro 18 sanno ama ka weynyahay). Mas'uulka sharciga ah wuxuu u baahan yahay dukumentiyo dheeri ah oo ka socda maxkamad ama hay'ad la ansixiyey.

Dhammaan magacyada dukumiintiyada loo baahan yahay waa inay isku mid noqdaan. Haddii ay kala duwan yihiin, fadlan bixi dukumiinti sharci ah oo muujinaya magac bedelka.

Labada shey waa inaysan ka imaanin isla hal dhibic.

- Biilka korontada (ma ahan biyaha ama mobeelka) lagu taariiqeeyay gudaha 60 maalmood ee la soo dhaafay
- Heshiiska kirada hadeer, Qeybta 8 heshiiska, ama Afidheefidka Milkiilaha dhulka BPS [laga helayo **www.bostonpublicschools.org/residencypolicy** ]taariikhda sanad gudaheed
- Bayaanada hantida, lacagta guriga ee la taariiqeeyay gudaha 60-kii maalmood ee la soo dhaafay, ama hantida biilka canshuurta ee lagu taariiqeeyay gudaha sannadka la soo dhaafay
- Foomka W2 oo la taariiqeeyay gudaha sannad, ama rasiidka joornaatiga ee la taariiqeeyay gduaha 60-kii maalmood ee la soo dhaafay
- Bayaanka bangiga ama kaarka bangiga oo la taariiqeeyay gudaha 60-kii maalmood ee la soo dhaafay
- Warqada ka timid hay'ada dowlada la ansixiyay* oo la taariiqeeyay gudaha 60-kii maalmood ee la soo dhaafay.

➲ Hay'adaha dowlada la ansixiyay: Waaxyada Daqliga (DOR), Adeegyada Carruurta iyo Qoyska (DCF), Caawinta Ku meelgaarka (DTA), Adeegyada Dhalinyarada (DYS), Amniga Bulshada, xiriiro walba ee ugu horeeyo Commonwealth of Massachusetts.

### Daganaanshaha Codsadayaasha Dugsiga Imtixaanka

Wixii sharciyada gaarka ah ee ku saabsan daganaanshaha ardayda codsaneyso Magaaladda sadex imtixaano dugsi ah—Machadka Laatinka Boston, Dugsiga Laatinka Boston, iyo John D. O'Bryant Dugsiga Xisaabaha iyo Sayniska—fiiri bogga 27.

### Ku dhawaaq`ida Daganaanshaha Boston

Waaladiinta illaalada iyo masuulada sharciga ah ee ardayda Boston Public Schools, iyo ardayda da'dooda ah 18 iyo ka weyn, waa inay saxiixaan bayaanka xambaarsan xanuunka iyo ganaaxyada beensheegadka, oo sheegaya inay yihiin dad sharci ku dagan Magaaladda Boston. Waa in sidoo kale ay ogolaadaan inay ogeysiiyaan BPS haddii ay guuraan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka.

### Haddii ardayga ka guuro Boston inta lagu jiro sannad dugsiyeedka

- Ardayda dugsiga waxay joogi karaan dugsigooda BPS ee hadeer haddii ay guuraan kadib bilowga fasalka 12.
- Ardayda dugsiga barbaarinta fasalka11 ee ka guuro Boston taariiqda ama ka horeyso Abriil 30 waa laga saarayaa markiiba.
- Ardayda ku jirto dugsiga barbaarinta fasalka 11 ee ka guuro Boston kadib Abriil 30 waxay ku dhameystiri karaan sannad dugsiyeedka dugsigooda hadeer. Waa laga saarayaa BPS dhammaadka sannad dugsiyeedka.
- BPS ma siiso gaadiid ardayda ku nool meel ka baxsan Boston.

### Fullinta Sharuuda Daganaanshaha

Markii waaxda dugsiga ka shakiso in qoyska ardayga BPS ee hadeer ku noolyahay meel ka baxsan Boston, baaritaan ayaa dhacayo. BPS waxay ka shakin kartaa ardayga inuusan aheyn dadka dagan haddii, tusaale ahaan, boosto ayaa lagu soo celiyaa sabab la xiriirto ciwaan qaldan, cadeymaha ciwaanka ee uu gudbiyay waalidka aam is waafaqsaneyn ama laga shakiyo, ama fiida laga helo maamulaha/madaxa dugsiga ama waca qarsoodi ah.

Intaa waxaa dheer baaritaanada qoysaska looga shakiyay daganaanshaha, baaraha dadka dagan wuxuu sameynayaa tiro xadidan ee daganaanshaha baaritaanada ardayga waxaa lagu doortaa wareegto ee dugsiyada imtixaanka ee dugsiyada aan imtixaanka aheyn. Baaraha daganaanshaha sidoo wuxuu la shaqeynayaa hay'adaha kale ee banaanka si loo helo macluumaadka la xiriirto daganaanshaha ardayda. Maramra MBTA baarto waxaa lagu sameyn karaa ardayga looga shakiyo inuu banaanka kaga noolyahay Magaaladda oo usoo safrayo dugsiga.

### Maxaa ku dhaco ardayga ku xadgudbaa Xeerka Daganaanshaha?

Ardayga lagu helo inuu ku xadgudbay Xeerka Daganaanshaha markiiba waalaga saarayaa Boston Public Schools.

Intaa waxaa dheer ka saarida dugsiga, Boston Public Schools waxay ku soo rogeysaa ganaax ku saleysan qarashaadka adeegyada waxbarashada ee la helay oo waxaa lagu soo rogi karaa ganaacyo dheeraad ah ee qoyska, sida tallaabo sharci iyo ka haynta deeqda waxbarashada qaar iyo abaalmarinada.

Waalidka/masuulka ardayga looga saaray daganaansho la'aanta way ka racfaan qaadan karaan go'aanka. Ardayga waxaa loo ogolaan karaa inuu ku haro dugsiga inta lagu jiro nidaamka racfaanka. Fiiri bogga 9, "Udoodista Canugaaga."

**Leenka Tallada Daganaanshaha**
**617-635-9609**

Soo wac si aad u reebtid tallo qarsoodi ah ee ku saabsan ardayga ka qeybgalayo Boston Public Schools ee aan ku nooleyn Magaaladda Boston.

# Diiwaangelinta Dugsiga—Bilow xili Hore si aad wax uga Baratid Dooqyadaada!

Magaaladda Boston waxay leedahay in ka badan 120 dugsiyada bulshada, oo dhammaan leh bixino gaar ah. Sida waafaqsan xeerka shaqada Boston Public Schools (BPS), qoysaska waxay leeyihiin doorasho balaaran ee dugsiyada ee laga dooranayo. Si kastaba, ma jiro dookha dugsiga oo "la damaanad qaaday." Ardayda waxaa loogu xilsaaraa nidaamka baqtiyaa nasiibka ee mudnaanta siiyo codsadaha ee mar hore ku leh walaalaha iyo gabdhaha dugsiga.

Codsiyada diiwaangelinta iyo wareejinta ee 2022-2023 sannad dugsiyeedka bilowdo Janaayo 5, 2022 oo ardayda galeyso dugsiga K0-K1, fasalka 6, fasalka 7, iyo fasalka 9. Ardayda galeyso K2 iyo dhammaan fasalada kale diiwaandelinat iyo beddleka waxay bilaabaneysaa  Febraayo 7, 2022. Fursada ugu wanaagsan ee lagu helayo dugsiga aad rabtid, waxaan ku dhiiorgelineynaa qoysaska inay imaadaan inta lagu jiro muddada diiwaangelinta ugu horeyso ee fasalka canugaaga.

Haddii canugaaga bilaabayo dugsiga barbaarinta sannadka xiggo ama hadeer ku jiro fasalka ugu sareeyo ee laga bixiyo dugsigiisa ama dugsigeeda hadeer, waxaan ku talineynaa inaad bilowdid inaad dib u raadisid deyrtaan si aad wax badan uga baratid dooqyada dugsiga.

## Deyrta:

### Discover Boston Public Schools

- **Ogow dugsiyada aad codsan kartid**. Sida waafaqsan qorshaha shaqada dugsiga degmada, dooqyada dugsigaaga wuxuu ku saleysanyahay ciwaanka gurigaaga. Booqo DiscoverBPS.org si aad u eegtid liiska la habeeyay ee dooqyadaada dugsigaaga.
- **Ka fakar waxa aad ka raadineysid ee dugsiga**, sida barnaamijyada gaarka ah, guusha ardayga, qaabdhismeedka heerka fasalka (K0–fasalka 1, K–6, K–8, iwm.), iyo cabirka.

## Nofeembar illaa Janaayo:

- **Wax badan ka baro dugsi walba ee liiskaaga la habeeyay**. Haku tiirsan waxa aad ka maqashid saaxibada iyo xubnaha qoyskaaga. Dugsi walba waa kala duwanyahay, iyo dugsiyada way isbadeli karaan waqti kadib. Ka hel macluumaadka ugu dambeyso oo dugsi walba onleenka **DiscoverBPS.org**, **bostonpublicschools.org/schools**, iyo jaraa'idkeena  "Ogaanshaha Boston Public Schools" ee dugsiyada K-8 iyo dugsiyada sare, ee laga heli karo dabayaaqada Nofeembar ee dugsiyada, BPS Xarumaha Soo dhaweynta, laamanka Maktabada Bulshada Boston, iyo websaydkeena. Sidoo kale arag Wargelintaada Tayada Dugsiga La habeeyay (fiiri bogga 57) oo ay la jirto macluumaad sharaxan ee ku saabsan dugsi walba  DiscoverBPS.org.
- **Ka qaybqaado Bandhigga Magaalada Boston**.  Bandhigani wuxuu fursad weyn u yahay qoysaska iyo ardayda mustaqbalka inay la kulmaan Maamulayaasha iyo xubnaha shaqaalaha.  Waxay siinaysaa fursad qoysaska inay wax badan ka bartaan doorashada dugsiga, oo ay ku jiraan manhajka dugsiga BPS, barnaamijyada dugsiga kadib, ciyaaraha fudud, iyo ruuxda dugsiga.
- **Booqo dugsiyada inta lagu jiro Maalmaha Falanqeynta Dugsiga** (sharaxaadaha boggaan). Tani waa qaabka ugu wanaagsan ee lagu helayo dareenka "cimilada" dugsiga iyo filashooyinka ardaydooda.
- **Codso inta lagu jiro muddada diiwaangelinta ugu horeyso ee fasalka canugaaga galayo**. Haddii ardaygaaga uu ku cusubyahay Boston Public Schools, waxaad u baahaneysaa inaad ka codsatid Xarunta Soo dhaweynta BPS. Keen labo cadeyn gaar u ah guriga daganaanshaha(fiiri bogga 44), diiwaanka tallaalka ardayga, shahaadada dhalashada ardayga, baasaboorka ama Foomka I-94, aqoonsiga sawirka waalidka/masuulka, iyo qoraalka ka imaanayo dugsiga ugu dambeeyo ee ardayga (haddii ay quseyso).
- Wixii macluumaad dhameystiran ee sida la isaga diiwaangeliyo dugsiga, booqo **bostonpublicschools.org/register**, soo wac Xarun walboo Soo dhaweyn ah (fiiri bogga 5), ama qaado koobiga jaraa'idka dookha dugsigaaga, "Ogow Boston Public Schools," waxaa laga heli karaa dugsiyada, Xarumaha Soo dhaweynta, iyo laamanka Maktabada Bulshada Boston.

### Maalmaha Falanqeynta Dugsiga

Inta lagu jiro **Maalmaha Falanqeynta Dugsiga** –Nofeembar illaa Janaayo – dugsiyada way ku soo dhaweeyaan martida taariiqaha gaarka ah oo waxay qabaan howlo ku caawinayo waaladiinta inay sameeyaan dooqyo la ogeysiiyay ee ku saabsan dugsiga xiggo ee canugooda.

☑ Ka fiiri websaydka BPS wixii sharaxaado dheeraad ah iyo taariiqaha Falanqeynta Bulshada ee dugsi walba. Haddii aadan booqan karin waqtiyadaas, la xiriir dugsiyada si aad u weydiisid balaminta martida.

Shaqaalaha Magaaladda Boston ee waqtiga buuxo ee ah waaladiinta ama masuulada carruurta da'da dugsiga ah waxay qaadan karaan illaa afar saacadood shaqo ah inta lagu jiro Maalmaha Falanqeynta Dugsiga ee booqanayo dugsiyada. Si aad ugu qalantid faa'idadaan, shaqaalaha waa inuu haystaa canug ka diiwaangashan BPS markii ugu horeysay, ama hadeer ah ardaga BPS ee codsanayo dugsi cusub oo hal fasalada ku meelgaarka ah (dugsiga barbaarinta, fasalka 6, fasalka 7 iyo fasalka 9). Waqtigaan "waqti fasaxa la bixiyay" iyo lagama jarayo fasaxa, gaarka ah, ama waqtiga jirada. Shaqaalaha u qalmo waa inay la soo xiriiraan xafiiskooda Illaha Shaqaalaha ka hor inta aysan isticmaalin faa'idadaan.

Intaa waxaa dheer, sida waafaqsan Sharciga Magaaladda Fasaxa Dugsiga Waalidnimada Boston (Sadarka 12-13.3), waaladiinta ardayda dugsiga barbaarinta fasalka 12 waxay qaadan kartaa illaa 21 saacadaha fasaxa sannadka dugsiga ee booqashooyinka dugsiga. Waaladiinta guud waa inay isticmaalaan maalmaha fasaxa, maalmaha gaarka ah, ama magdhowga waqtiga ("ciyaarta"). Sharcigaan wuxuu quseeyaa badrooniyada shaqaaleysiiyo 25 ama shaqaale badan oo isla goobta. Waaladiinta waa inay ogeysiiyaan badrooniga booqashada qorsheysan xili hore.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri Wareegtada Kormeeraha guud BPS SUP-03, "Booqashooyinka Waalidnimada Dugsiga," ee websaydka BPS.

## Wareejinada iyo Xaaladaha Kale ee Gaarka ah

**Codsiyada Wareejinta Iqtitaarka**. Waalidka ama da'da ardayga 18 iyo ka weyn waxay codsan karaan shaqada oo dugsi kala duwan ah. Wareejinada iqtiyaarka—kuwa aan aheyn badelka ciwaanada, badbaadada, la barnaamij ah, ama sababaha edbinta—waa la codsan karaa inta lagu jirotaariikhda soo socota:

- *Fasalada K0-K2*: illaa dhammaadka Janaayo 2022
- *Fasalada 1-12*: Illaa dhammaadka Nofeembar 2021

Liisaska sugitaanka waxay dhacaan kadib taariiqahaan sidoo kale.

Si loo codsado warejinta iqtiyaarka ah, booqo Xarun walboo Soo dhaweynta BPS. Dhammaan wareejinada waxay u baahantahay aqoonsiga sawirka (aqoonsiga sawirka). Ka hor inta aadan buuxin foomka, weydii haddii uu jiro korsi laga heli karo dugsiga aad codsaneysid.

# Xeerarka BPS

## Nidaamyada Diiwaangelinta

**Wareejinada Badbaadada**. Mararka qaar waa muhiim inaad u xilsaartid ardayga dugsi ka duwan si loo hubiyo jawi waxbarasho badbaado ah oo ardaygaas ah. Wareejinada badbaadada ah waxaa lagu bilaabaa dhinaca dugsiga ardayga. (Fadlan fiiri bogga 37, Ardayda Badbaadada iyo Degdegyada.)

**Ka joojinta Mudada dheer iyo Ka ceyrinta**. BPS wuxuu u xilsaari karaa ardayda dugsiga hoose dugsi kale oo sababaha edbinta ah. Dugsiga dhexe iyo ardayda dugsiga sare waxaa loo xilsaarayaa kaliya barnaamijyo kale.

**Badelika Ciwaanka**: Haddii ardayga dhaqaaqo iyo dugsigooda hadeer uu yahay mid ka mid ah dooqyadooda guriga ku saleysan sida ku saleysan ciwaanka cusub, ardayga wuxuu ku hari karaa dugsigooda hadeer, laakin u qalmidooda ee gaadiidka baska jaalaha way saameyn kartaa. Ardayda guurto oo dugsigooda hadeer uusan ku yaalin goobta gurigooda way badeli karaan dugsiyada. Si kastaba, ardayga wuu joogteyn karaa inuu ka qeybgalo dugsigooda, oo dhinaca fasalkooda sareeyo, haddii waalidka qoraal ahaan ku ogolaado inuu gaadiid siiyo dugsiga. Haddii qoyska codsado wareejinta sabab la xiriirto ciwaan cusub, waxaan isku dayeynaa inaan u xilsaarno walaalaha isla dugsiga haddii kuraasta la heli karo.

**Ardayda Guri la'aantu Kudhacday**. Ardayda qoysaskooda guri la'aan noqdeen waxay xaq u leeyihiin inay dugsiga joogaan ay markii ugu dambeysay ka qeybgaleen, ama aadida dugsiga aaga cusub ama magaalada halka ay si ku meelgaark ah ugu noolyihiin. BPS waxay kaloo leeyihiin barnaamij u heellan bixinta ilaha iyo taageerada ardayda la soo derista hoy la'aanta. Wixii macluumaad, soo wac Shabakada Illaha Waxbarashada Guri la'aanta, 617-635-8037.

**Ardayda Ka weyn Da'da**. Ardayda da'doodu tahay 20-21 waxaa loo gudbin doonaa Xarunta Dib-u-Hawlgelinta ee BPS si ay ugala hadlaan xulashooyinka isqorista. Tani waxaa ku jiro ardayda hadeer sidoo kale sida ardayda cusub iyo kuwa iska diiwaangelinayo BPS. Si kastaba, masdaxda dugsiga waxay u ogolaadaan ardayda qaar inay ku haraan dugsiga sare ee hadeer. Ardaydu sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay racfaan ka qaataan Madaxda go'aanka iskuulka ee ay ugu diraan Xarunta Dib u Hawlgelinta iyada oo lala xiriirayo Waaxda Adeegyada Soo dhaweynta 617-635-9046.

### Xeerka Shaqada Dugsiga

BPS waxay soo saartay xeerka shaqada ardayga Guriga ku saleysan si uu ugu xilsaaro ardayda dugsiga barbaarinta oo dhinaca fasalka 8. Dhammaan dugsiyadeena sare waxay ku haraan dooqyada Magaaladda oo dhan oo ardaydeena.

### Ka hor Inta Aadan Booqan Dugsiga

Dugsiyada waxay soo dhaweeyaan martida maalmaha ugu badan dugsiga. Waxaa wanaagsan in la waco ka hor inta aadan booqan si aad u hubisid in qof diyaar kuu ah oo ku tusiiyo agagaarka oo ka jawaabo su'aalahaaga. Ogow haddii ay jiraan waqtiyo gaar ah oo balansan martida inay qaataan safarka oo la kulmaan maamulaha.

- ➲ La xiriir Xarumaha Soo dhaweynta BPS, ee ku qoran bogga 5.
- ➲ **greatschools.org/find-a-school/slideshows/3469-choosing-an-elementary-school.gs**

**Qorshaha Guriga Ku saleysan wuxuu u isticmaalaa guriga ardayga sida barta bilowga.**

- BPS waxay siineysaa liis la habeeyay ee dooqyada dugsiga ee qoys walba oo ku saleysan ciwaankooda guriga. Waxaa ku jiro dugsi walba ee gudaha hal mayla ee gurigooda u jiro iyo gurigooda, sida loogu baahanyahay, ayadoo laga fiirinaayo Shaxda Tayada Dugsiga (SQF) tier. Wax badan ka baro SQF ee www.bostonpublicschools.org/schoolquality. Tani waxay xaqiijineysaa in qoys walba uu helo dugsiyo tayo sare leh, meel kastoo ay ku nool yihiin.
- Liiskaan wuxuu sidoo kale u kori karaa, sida loogu baahanyahay, si loogu daro dugsiyada bixinayo K0, Fasalka Shaqada Hormarsan (AWC) iyo wax badan, iyo si loo hubiyo inaan ka siin karno canug walba korsi dugsiga liiskiisa ama liiskeeda ku jiro. Kuwaan waxaa loo yaqaan "Dookha Dugsiyada."
- Qoysaska waxay sidoo kale dooran karaan dugsi walboo Magaaladda oo dhan ah. Iyo qoysaska qaar waxay yeelan karaan dooqyada goboleedka, sidoo kale.
- Qoys walba wuxuu helayaa dookha ugu yaraan lix dugsiyo; inta waxay yeelanayaan inta u dhaxeyso dooqyada 10 iyo 14.
- Qorshaha guriga ku saleysan wuxuu isticmaalaa xisaab dagan, oo la mid ah baqtiyaa nasiibka; sidaas darteeda ma damaanad qaadi karno in codsade loo xilsaarayo dooqyadiisa ama dooqyadeeda ugu sareeyo
- Sida waqtiga la soo dhaafay, sabab la xiriirto kuraasta xadidan ma damaanad qaadi karno shaqada K0 ama K1.
- Ardayda codsataa dugsiga K0-K1 iyo fasalada 6, 7, iyo 9 ee Janaayo wuxuu leeyahay fursada ugu wanaagsan ee shaqada dugsiyada dooqooda ugu sareeyo. Muddada diiwaangelinta iyo beddelka waxay u bilaabmaysaa Febraayo ardayda codsanaysa K2 iyo dhammaan fasallada kale.

### Qiimeynayo Qoyska

Qorshaha Ku saleysan Guriga wuxuu ku sii socdaa inuu shaqeeyo si uu isugu hayo qoysaska. Sida, qorshaha waxaa ku jiro mudnaanta walaalaha. Iyada oo BPS aysan damaanad qaadi karin kuraasta walaalaha ee dugsi gaar ah, walaalaha waa mudnaanta ugu sareyso ee aan bixino si aan u hubino inaan sameyno dadaal walba ee gudaha xeerarka ee la isugu hayno qoysaska.

### Taageerista Ardayda Baratayaalka Ingiriiska iyo Ardayda Lixaadka la'

Qorshaha Guriga Ku saleysan wuxuu aasaasaa qeybaha bulshada ee dooqyada dugsiga si loo hubiyo in ardayda ay iska diiwaangelin karaan dugsiyada bixiyaa barnaamijyo tayo leh ee gurigana u dhow.

Ardayda Bartayaalka Ingiriiska waxay geli karaan dugsiyada ee liiska gurigooda ku saleysan sidoo kale sida dooqyada barnaamijka ee qeybtooda balaaran.

Waxay ku xirantahay baahiyadooda, ardayda qabta curyaannimada waxay u qalmi karaan inay ka doortaan fadhiyada liiska guriga ku saleysan, ama waxaa laga yaabaa in loo xilsaaro barnaamijka oo gudaha qeybta ee ay daganyihiin haddii Barnaamijkooda Waxbarashada Gaarka ah u soo waco adeegyo gaar ah ama heerka adeegyada.

Dhoor barnaamijyo ayaa weli ku haro Magaaladda oo dhan, sidoo kale.

Waad u aqrin kartaa wax ku saabsan qorshaha si aad u sharaxan oo wax ka baro dooqyada joornaalka BPS.

# Nidaamyada Diiwaangelinta

## Waa maxay "mudnaanada?"

Mararka qaar dugsiga ma lahan qolol oo arday walba ee ku qoran dooqooda. Markii tani dhacdo, kumbiyuutarka ayaa ugu xilsaaro ardayda si ku saleysan dookha iyo mudnaanada. Mudnaanta walaalaha waa mid ka mid ah mudnaanadeena ugu sareeyo, iyo mudnaanada kale waxaa ku jiro mudnaanta EEC/ELC, mudnaanta dugsiga hadeer, iyo mudnaanta Bariga Boston/Bariga Bariga ee aan mudnaanta aheyn.

- **Mudnaanta Walaalaha**
  Waxaan isku daynay inaan u xilsaarno carruurta isku qoyska isku dugsi haddii waalidka codsado. Haddii aad rabtid in carruurtaada aadaan isla dugsiga, weydii shaqaalaha Xarunta Soo dhaweynta sida loo codsado mudnaanta walaalaha. Si kastaba, mararka qaar dugsiga ma lahan boos oo dhammaan walaalaha ah ee codsada iyada; marka ma damaanad qaadi karno shaqooyinka walaalaha. Iska hubi inaad qortid doorbiditaanka walaalaha marka koowaad ee aad codsatid.
- **Joogitaanka Mudnaanta Dugsiga**
  Joogitaanka mudnaanta dugsiga waxay siisaa ardayda mudnaanta barnaamijka dugsigiisa/dugsigeeda oo in kabadan arday kale oo ka qeybgalayo dugsi ka duwan. Tusaale ahaan, ardayda hadeer ka diiwaangashan fasalka 3 ee Dugsiga Hennigan wuxuu helayaa mudnaanta fasalka 4 AWC (Koorsada Shaqada La hormariyay) korsiga Hennigan ee ka badan ardayda fasalka 3 ee ka qeybgaleyso Dugsiga Mendell ee doortay barnaamijka Hennigan AWC.
- **Mudnaanta EEC iyo ardayda ELC ee codsaneyso Fasalka**
  Ardayda dhameystireyso fasalka 1 ee Xarunta Waxbarashada Hore (ELC) ama Xarunta Waxbarashada Hore (EEC) ee aan laheyn Wadada dugsiga waxaa loo xilsaarayaa kuraasta fasalka 2 ee la heli karo ka hor ardayda inta uusan ku cusubneyn BPS ama kuwa codsanayo wareejinada dugsiyada kale ee hoose.
  Marka lagu qorayo ardaydaan kuraasta fasalka 2, oo ay ku jiraan shaqooyinka liisaska sugitaanka, xaqiiqaha aan caadiga aheyn waa la tixgelinayaa, oo ay ku jiraan muddada diiwaanka markii ardayga codsaday, mudnaanada kale, iyo lambarkooda wareegtada. Kareebidaha waxaa ku jiri karo barnaamijka korsiga ee Ardayda Bartayaalka Ingiriiska, adeegyada ardayda qaarkood ee qabtaa lixaad darrida.
- **Mudnaanta East Boston/East Boston aa aheyn**
  Sabab la xiriirto goobtooda gaarka ah, ardayda waxbarashada guud ee East Boston ee bilaabayo K2 waxay leeyihiin hubaalka shaqada East Boston, haddii ay sidaas doortaan.
  - Liisaska la habeeyay ee ardayda East Boston waxaa ku jirayo dhammaan dugsiyada East Boston.
  - Dadka dagan East Boston waxaa la siiyaa mudnaanta oo ka badan codsadaha aan East Boston degeneyn ee kuraasta East Boston. Liisaskaan la habeeyay waxaa sidoo kale ku jirayo dugsiyada qaarkood oo aan ku ool East Boston, laakin mudnaanta ma quseyneyso dugsiyadaas.
  - Maaddaama mudnaan siintani xaddidayso gelitaanka dadka aan daganeyn East Boston ee laga yaabo inay sidoo kale ku haystaan liiskooda Dugsiyada East Boston, ardaydaan waxay mudnaanteeda yeelanayaan dugsiyada aan East Boston ku oll ee liiskooda kujira si ka badan ardayda East Boston deggan.
- **Lambarada Wareegtada**
  Kumbiyuutarka wuxuu siiyaa codsi walba lambar wareegto ah. Lambarada wareegtada ah waxaa loo isticmaalaa nasiinyada "xiriirada" u dhaxeeyo ardayda leh isla mudnaanada dugsiga.

Sidee ayay tan u shaqeysaa? Aan dhahno waxaa jiro hal korsi ku haray K2 ee Dugsiga Kenny. Dhammaan codsadayaasha walaalaha leh waxaa loo xilsaaray. Sade arday dheeraad ah, oo dhammaantood mudnaanta walaalaha laheyn, u qoran Kenny sida dooqoodo koowaad. Ardayga leh lambar wareegtada ("ugu") hooseeyo ayaa loo xilsaarayaa. Ardeyda kale waxaa la gelinayaa liiska sugitaanka




## Diiwaanada Ardayga

Boston Diiwaanka ardayga waxaa ku jiro dhammaan macluumaadka la xiriirto ardayga joogteeyay qaab walba ee Dugsiyada Bulshada Boston (BPS) taas oo lagu diyaariyay sida ku saleysan magaca ardayga ama qaab ardayga si gaar ah loogu aqoonsan karo.

Qoraalka ardayga, ama diiwaanka joogtada ah, waxaa ku jiro magaca ardayga, taariiqda dhalashada, ciwaanka, sannadaha iyo fasalada la buuxiyay, iyo koorsada iyo fasalada la helay. Diiwaanka joogtada ah waxaa la hayaa 60 lixdan sanno kadib markuu ardayga ka tago nidaamka dugsiga.

Dhammaan diiwaanada kale ee ardayga waa diiwaangalin ku meel gaar ah oo la baabi'iyay todobo sano kadib marka ardaygu ka baxo nidaamka, ogeysiis qoraal ah ardayga ama waalidka / masuulka. Ardeyda dhigata iyo waalidiinta / dadka ilmaha masuulka ka ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan rikoodh ku meel gaar ah markay ka baxayaan BPS ama ka hor intaan la burburin. Waxay codsan karaan diiwaanka adoo la xiriiraya maamulka dugsigooda hadda ama maamulaha dugsiga ee dugsiga ugu dambeeyey. Waalidka / mas'uulka ama ardaygu waa inuu saxiixaa Foomka Diiwaan-gelinta Diiwaan-gelinta diiwaanka.

Waalidka arday walba, ama ardayga galay dugsiga sare ama ah ugu yaraan 14 sanno jir, wuxuu xaq u leeyahay inuu baaro diiwaanka ardayga xiliga la codsado. Waalidka ama ardayga waa inay ku helaan diiwaanka si aan ka dambeynin toban maalmood codsiga kadib, iyo waxay weydiin karaan in diiwaanka qof kale u turjumo ama badelay maamulaha. Soo wac dugsiga canugaaga haddii aad jeclaan laheyd inaad aragtid diiwaanka ardayga canugaaga. Si kastaba ha noqotee, marka uu ardaygu buuxiyo 18 sano, waalidku waa inuu haystaa oggolaansho qoraal ah oo ardayga ah si uu u kormeero ama u helo diiwaanka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee diiwaanada ardayga:

- ➲ Wareegtada Kormeereaha guud LGL-7, "Nidaamyada Diiwaanka Ardayga"
- ➲ **doe.mass.edu/lawsregs/advisory/cmr23qanda.html?section**

# Xeerarka BPS

## Diiwaanada Ardayga

### Diiwaanada Caafimaadka Ardayga

Sida waafaqsan sharciyada diiwaanka faderaalka iyo gobolka, diiwaanada caafimaadka ardayga waxay quseysaa illaalada gaarka ah ee qarsoodiga. In kastoo diiwaanka caafimaadka ardayga ee diiwaanka kumeelgaarka, ma lahan isla gelitaanka sida diiwaanka qoraalka ama kumeelgaarka ah. Guud ahaan, kaliya kalkaalisada dugsiga ayaa si buuxdo u geli karto warbxiinta diiwaanka caafimaadka ardayga ee diiwaanka kumeelgaarka ah. Wixii macluumaad oo ku saabsan sharciga u ogolaanayo macluumaadka caafimaadka qaarkood in loo siidaayo shaqaalaha dugsiga aan ka aheyn kalkaalsiada iyada oo aan jirin ogolaanshaha waalidka, fiiri Wareegtada Kormeeraha guud LGL-16, "Macluumaadka Caafimaadka Ardayga," ee websaydka BPS.

### Diiwaanada La helayo ee Ardayda Hore ee BPS

Ardayda hore ee BPS waxay heli karaan koobiga qoraalkooda ama taranskiribtiga rasmiga ah iyo cadeynta qalinjabinta adiga oo ku xareynayo codsi qoraal ahaan. Fadlan ka booqo websaydka BPS wixii sharaxaadyo iyo koobiga Foomka Qoraalka Codsiga Dugsiga: **bostonpublicschools.org/request-transcript**

### Haddii dugsigaaga sare weli furanyahay...

Buuxi Foomka Codsiga Qoraalka Dugsiga oo fakis ku soo dir ama boosto ugu soo dir dugsiga. Macluumaad xiriirka ee dugsi walba waxay ku jirtaa bogga liisaska dugsiga ee websaydka BPS.

### Haddii dugsigaaga sare uu xiranyahay...

- Soo wac Qadka Codsiga Qoraalka Dugsiyada Xiran BPS: 617-635-7327
- Daabac oo buuxi Foomka Codsiga Qoraalka ee ka imaanayo: **bostonpublicschools.org/request-transcript** and ku soo dir:
- Office of Instructional & Information Technology<br>Boston Public Schools<br>2300 Washington St., Roxbury MA 02119<br>ama fakiska: 617-635-9164
- Ka codsiga qoraalka ardayga oo onleenka ah: **bpsma.scriborder.com**

### Diiwaanada Ardayga Ka tagato Boston Public Schools

Markii ardayy ka tago Boston Public Schools si uu uga qeybgalo dugsiga aan aheyn-BPS, BPS ayaa si toos ah ugu soo dirayo diiwaanka dugsiga cusub. Niyada ku haay in markii ardayga loo wareejiyo dugsi cusub inta lagu jiro kuleelaha, waxay qaadan kartaa dhoor maalmood ama isbuuc in waaladiinta ka helaan diiwaanka dugsiga. Shaqaalaha joogo dhismaha dugsiga oo saacado walboo xadidan ee Luuliyo iyo Agoosto.

### Siideynta Macluumaadka Ardayga

Caadi ahaan, ma jiraan shaqsi ama hay'ad si sharci ah loogu ogolyahay inay ku helaan macluumaadka diiwaanka ardayga iyada oo aan jirin ogolaanshaha cusub ee qoran ee waalidka ama ardayga u qalma. Si kastaba, waxaa jiro ka reebido dhoor ah ee u ogolaanayo dugsiyada inay siidaayaan macluumaadka ardayga iyada oo aan jirin ogolaanshaha waalidka iyo mararka qaar la jirto ogeysiinta, sida lagu sheegay Jaheyntaan. Tusaalooyinka ka reebida waxaa ku jiro:

- Sida waafaqsan sharciga gobolka, markii ardayga wareejiyo dugsi cusub, diiwaanka ardayga (oo ay ku jiraan diiwaanka waxbarashada gaarka ah) waxaa lagu wareejin karaa dugsiga cusub iyada oo aan jirin ogolaanshaha waalidka, haddiiba waalidka helo ogeysiinta sannadlaha ee sharcigaan.
- Siideynta macluumaadka waxay muhiim u noqon kartaa inn lagu illaaliyo caafimaadka iyo badbaadada qofka oo waxaa laga codsan karaa Mass. Waaxda Carruurta iyo Qoysaska (DCF), Waaxda Adeegyada Dhalinyarada (DYS),sarkaalka dalacsiinta, ama fulinta kale ee sharciga ama hay'adaha waxbarashada.
- Sida waafaqsan sharciga faderaalka, dugsiga demooyinka bulshada waa inay u sii daayaan magacyada, ciwaanada, iyo lambarada taleefonka ardayda dugsiga labaad shaqaaleysiiyayaasha Milatariga Mareykanka iyo waxbarashada sare. Si kastaba, waalidka ama ardayga wuxuu leeyahay xaquuqda loogu codsanayo qoraal ahaan in macluumaadkaan AAN la siideyn. Waxaa jiro labpo qaab oo lagu xareeyo codsi:
  - Buuxi qeybta "U siideynta Macluumaadka Shaqaaleysiiyayaasha Milatariga ama Waxbarashada Sareyso" onleenka ee **bostonpublicschools.org/contact**
  - Ugu xarey codsigaaga qoraal ahaan maamulaha dugsiga ama madaxa dugsiga oo qoraal qoran ama i-meelka. Maadaamaa shaqaaleysiiyayaasha guud ahaan codsadaan macluumaadkaan horaantiid sannad dugsiyeedka, waa inaad xareysaa codsigaaga xiliga Oktoobar 1, 2021 illaa si aad uga fogaatid in lagu weydiiyo.
- Sida u farayo Sharciga Dib-u-habaynta Waxbarashada Massachusetts, degmooyinka dugsiyada dadweynaha waa in ay siiyaan dugsiyada madax banaan magacyada iyo cinwaanada ardaydooda si ay u qalqaalsadaan. Haddii aadan rabin in macluumaadkaan la siidaayo, fadlan buuxi qeybta "Siideynta Macluumaadka ee Dugsiyada Jaatarka" oneelnka ee **bostonpublicschools.org/contact**
- Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay sii daayaan macluumaadka soo socda iyadoon waalidku raalli ka ahayn: magaca ardayga, da'da, xaafadda uu deggan yahay, taariikhaha xaadiritaanka. Haddii aadan rabin in macluumaadkaan la siidaayo ogolaanshahaaga la'aantiisa, waa inaad ogeysiisaa maamulaha ama Madaxa Dugsiga xiliga Oktoobar 1, 2021. Waxaad sidoo kale ku cusbooneysiin kartaa macluumaadkan boggayaga: **bostonpublicschools.org/familyguide**.

#### Gollaha La talinta Ardeyaa Boston waxay dhaheen...

BPS waxay leeyihiin masuuliyada lagu hubinayo ardayda iyo waalidiinta inay ogyihiin wax ku saabsan xaquuqdooda lagu dooranayo ka bixitaanka. Kadib markaad ka fakartid afkaarahaaga, waxaad go'aansan kartaa in adeegyada milatariga aad rabtid. Waa inaad ogaatid qorshaha shaqaaleysiiyo waxay isticmaalaan oo daawadaan macluumaad aan dhameystirneyn ama jah wareer ah. Waxaan xaq u leenanahay inaan doorano mustaqbaladeena, laakin waxaan sidoo kale xaq u leenahay inaan ogaano waxa aan geleyno.

Sharciga Massachusetts [M.G.L. C.71, qeybta 34H iyo 603 CMR 23.07 (5) (a)] wuxuu sharaxaa nidaamyada ee dugsiyada bulshada siiyaan macluumaadka diiwaanka ardayga waaladiinta aan illaalada aheyn. Wixii Macluumaad ah, booqo: **doe.mass.edu/news/news.aspx?id=3063**

Koobiyada xeerarka BPS ee diiwaanada ardayga iyo waaladiinta' iyo xaquuqda ardayda' ee diiwaanada ardayda waxaa loo heli karaa dugsi walba. Waalidka ama ardayga wuxuu ku xareyn karaa cabasho Xafiiska Cabashada Xeerka Qoyska ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka oo xadgudubka lagu eedeeyay ee Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo xeerka Arimaha gaarka (FERPA) iyo sharciyadooda.

## Xafladaha Qalinjabinta

Qalinjabinta dugsiga sare aad ayay muhiim ugu tahay iyo dhacdo gaar ah. Dhammaan dugsiyada sare ee BPS waxay sharfaan ardaydooda qalinjabineyso xaflado inta lagu jiro taas oo lasiiyo dibloomada, deeqda waxbarashada, iyo aqoonsashada kale. Kaliya ardayda biixyay dhammaan sharuudaha dalacsiinta dugsiga sare BPS oo buuxiyay sharuudaha Go'aaminta Kartida ee imtixaanada ELA, xisaabta, iyo sayniska iyo cilmiga farsamada/injineernimada MCAS waxay ka qeybqaadan karaan tababarka qalinjabinta dugsiga sare oo helaan dibloomada. Ardayda aan buuxin sharuudaha qalinjabinta laga yaabo inaysan ku "socon dhinaca masraxa" oo helaan warqad cad oo ku jirto dibloomada.

Waxaa kaliya ee ku jiro sadex kareebid kaliya ee xeerkaan:

1. Ardayda buuxiyay labada sanno ee barnaamijka shaqdaa farsamada ee Madison Park oo helay **Shahaadada Kartida** wuu ka qqeyb qaadan karaa xafladaha qalinjabinta.
2. Ardayda waxbarashada gaarka ah ee qabo curyaannimada weyn oo ah 22 sanno jir oo ka baxayo dugsiga sare si ku saleysan da'dooda iyo Helida hadafyada IEP waxay helayaan **Shahaadada Ka** qeybgalka iyo sidoo kale waxaa loo ogolyahay inay ka qeybqaataan.
3. Ardayda kale ee lixaad la'a ee buuxiyaa sharuudahaan waxay dooran karaan inay ka qeybqaataan:
   - Ardayda aan laheyn wax ka badan sagaal cudur daar ka hor sannad dugsiyeedka
   - Ardayda qaadatay Fasalka 10 MCAS ugu yaraan sadex waqti oo maado walba ee ardayga uusan baasin, ama xareeyay ugu yaraan labo xilal oo "qiimeynta kale"
   - Ardayda dhameystirtay fasalka 12 sanno oo joogsi wanaagsan sida lagu qeexay IEP oo buuxiyay dhammaan heerarka dugsiga iyo heerarka aan waxbarashada aheyn ee BPS.

Dugsiyo badan waxaay qabtaan dhammaadka sannadka kulan lagu aqoonsanayo ardayda laga dalacsiiyay dugsiga barbaarinta, fasalka 5, iyo fasalka 8. Si kastaba ahaate, **dabaaldagyadaan ma ahan qalinjabin**. Dugsiyada waxaa looga digayaa inaysan ugu yeerin qalinjabin, la soo bandhigayo "dibloomada," oo ardayda loo xirayo koofiyado iyo taashash.

Dhammaan ardayda markii laga reebo ardayda sannadkoodii ugu dambeeyay ee ka qalinjabinayo dugsiga sare waxaa laga filanayaa inay ka qeybgalaan dugsiga illaa (180ka) maalmood ee ugu dambeyso—xittaa haddii xaflada dhammaadka sannadka ay dhacdo ka hor maalinta ugu dambeyso ee dugsiga—iyo waxaa lagu calaameynayaa "maqan" haddii aysan ka qeybgalin.

## Layli

Macalimiinta Boston Public Schools waxay aaminsanyihiin in markii ardayga ku isticmaalo waqti shaqooyinka layliga ay tahay wax ku ool ah, waxay aad ugu badanyihiin inay gaaraan guusha waxbarashada. Layliga wuxuu dhisaa shaqada fasalka wuxuuna ku dhiirageliyaa hormarinta anshaxa iyo masuuliyada shaqsiga. Waxay sidoo kale sare u qaadaa iskaashiga iyo xiriirka u dhaxeeyo qoysaska iyo dugsiga iyo dugsiga.

Xittaa ardayda BPS waa inay lahaadaan shaqooyinka layliga maalin walboo dugsi ah. Fiiri bogga 18 (dugsiga hoose), bogga 20 (dugsiga dhexe), iyo bogga 22 (dugsiga sare) ee jaheynada layliga. Macalimiinta ayaa masuuul ka ah u xilsaarida layliga.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan layliga, ama haddii adiga iyo canugaaga uu walaacyo qabo ee ku saabsan qiyamka ama tirada layliga loo xilsaaray, la xiriir macalinka marka koowaad, kadib Maamulaha ama Madaxa Dugsiga.

## Soo daahitaanka

Dhammaan ardayda waxaa laga filanayaaa inay imaadaan dugsiga waqtigiisa maalin walba. Ardayda timaado kadib bilowga maalinta way soo dhaahday. Waa inay raacaan nidaamyada soo daahitaanka dugsiga si markaas loogu tigeliyo inay joogeen maalinta. Dugsiyada sare waxay u xisaabin karaan soo daahitaanka xad dhaafka ah sida maqnaasho. Ka fiiri bogga 14 wixii macluumaad ah.

Waa xeerka Guddiga Dugsiga Boston (la ansixiyay Maajo 24, 2006) ayaa sheegayo in ardayda soo daahdo waa qasab in loo ogolaadaa soo gelitaanka dhismaha dugsiga oo aan laga reebin. Madaxda dugsiga iyo masuulada waa inay agaataa (a) eegida xeerarkooda faajitaanka hadeer oo ay la jirto Gollaha Aaga Dugsigooda, (b) cawaaqiibta macquulka ah ee lagula xaalamayo daahitaanka ardayga iyo dhiirogelinta suurtogalka ah ee lagu dhiirogelinayo illaalinta waqtiga, iyo (c) u hogaansanaanta kormeerid u dhow oo ay la jiraan xeerarkaan.

### Gollaha La talinta Ardeyaa Boston waxay dhaheen...

Xeerka xaadirka iyo daahitaanka wuxuu ku saabsanyahay ixtiraamka ardayda iyo waxbarashadooda. Maamulka BPS wuxuu arkay inay qalad aheyd in la ciqaabo ardayda soo daahdo iyada oo laga celiyo dugsiga. Dugsiyada waxay u baahanyihiin inay joogteeyaan inay hormariyaan dhiirogelino wanaagasan ee ka dhigeyso ardayda inay RABOODAAN inay dugsiga imaadaan; tusaale ahaan, iyada oo la hormarinayo dhaqanka dugsiga oo aad ku adkeysaneysid caawinta ardayda soo daahday badelkii xiritaan ama ciqaab. Ardaydna waxay u baahanyihiin in loo mujiyo sida ay waxbarashada muhiimka ugu tahay–iyaga imaanayo waqtigeeda.

## Sanduuqyada Ardayda

Dugsiyada dhexe iyo dugsyada sare waxay u xilsaaraan sanduuqyada arday walba si ay ugu keydsadaan saadadkooda dugsiga iyo alaabaha gaarka loo leeyahay. Sanduuqyada looma heli karo ardayda dugsiga dhexe ee qaar ka mid ah dugsiyada K-8. Dugsiga ayaa siiyo sanduuqyada iyo furayaasha. Ardayda ma isticmaali karaan qufaladooda gaarka ah.

Muhiim ayay u tahay waaladiinta iyo ardayda inay fahmaan in sanduuqyada ku harayaan hantida Boston Public Schools iyada oo ardayda ay isticmaalayaan. Shaqaalaha dugsiga waxay xaq u leeyihiin inay baaraan sanduuqyada iyo shey walboo gaar ah ee ku jiro gudaha sanduuqa (sida jeebabka jaakada).

# Xeerarka BPS

Shaqaalaha dugsiga waxay baaraan dhammaan sanduuqyada ugu yaraan haljeer sannadkiiba oo nadiifin guud ah. Waxay sidoo kale ka baaraan sanduuqyada marka ay ka shakiyaan badbaadada ama dhibaatooyinka amniga. Shey walboo sharci daro ah, la mamnuucay, ama sheeyada halista imaan karto, ama cadeynta dambiga la helay inta lagu jiro baaritaanka sanduuqa waxaa la siinayaa maamulada ku haboon.

Ka hubi Sharciyada Ku saleysan Dugsiga wixii sharaxaadyo dheeraad ah ee nidaamyada sanduuqyada.

## Taleefonada Mobeelka

Xeerka Boston Public Schools ee taleefonada mobeelka waxaa loo naqshadeeyay inay hubiso in isticmaalka mobeelada aysan carqaladeynin wax barida iyo barashada inta lagu jiro maalinta dugsiga. Xeerkaan wuxuu u qalmaa dhammaan ardayda u diiwaangashan dugsiyada BPS ee heerar walba, oo ay ku jiraan dugsiyada duuliyaha iyo dugsiyada jaatarka Horace Mann.

1. Ardayda waxaa loo ogolyahay inay isticmaalaan mobeelada kaliya inta lagu jiro waqtiyada:
   - saacadaha dugsiga ka hor iyo kadib ee banaanka ama gudaha dhismaha dugsiga;
   - kadib howlaha dugisga ama ciyaaraha, kaliya ogolaanshaha tababaraha, macalinka, ama agaasimaha barnaamijka;
   - ee howlaha maqribka ama dhammaadka isbuuca ee gudaha dhismaha dugsiga
   - ee fasalka, iyo ogolaanshaha macalinka, oo ujeedooyinka waxbarashada
2. Isticmaalka teleefonada mobeelada oo ujeedooyin walba—oo ay ku jiraan wacitaanada taleefonka, fariimaha qoraalka, iyo shaqooyinka kale—lama ogolo waqti kaloo xun ee sababaha dugsiga
3. Mobeelada waa inaan la arkin inta lagu jiro maalinta dugsiga
4. Mobeelada waa in gabi ahaanba la damiyaa (ma ahan in si sahlan loo aamusiyaa ama nooca gariirka) inta lagu jiro maalinta dugsiga

**Gollaha La talinta Ardeyaa Boston waxay dhaheen…**
Mobeelada muhiim ayay u yihiin arday badan oo u baahan inay la xiriiraan qoyska ama shaqooyinka dugsiga kadib. Waan u baahannahay iyaga–laakin ma rabno inay qeybiyaan waxbarashada qofna. Xeerka mobeelka BPS waxaa loo hormariyay oo iyo ardayda si ay ku dhaqmaan cadaalad dheelitiran ee u dhaxeyso ixtiraamida jawiga waxbarashadeena iyo ixtiraamida xaquuqda ardayda.

Ciqaabyada ardayda ku xadgudubtaa xeerka waxay ahaaneysaa sida xigta:

- **Dambiga koowaad**: Mobeelka waa lagala wareegayaa oo la celinayaa dhammaadka maalinta dugsiga.
- **Dambiga labaad oo joogtada ah**: Mobeelka waa lala wareegayaa oo kaliya loo celinayaa waalidka ama masuulka ardayga. Ardayga ma keeni karo mobeel dugsiga oo xasuusiyaha sannad dugsiyeedka.
- **Ku xadguudbka celcelinta ah ee xeerka**: Ardayda waxaa lagu soo rogi karaa tallaabada edbinta dheeraadk ah, oo si joogta ah u waafaqsan Xeerka Anshaxa.

## Laabta Gaarka ah

Waa murugo labadaba iyo shaqaalaha dugsiga markii sheeyada qiimaha leh ee gaarka ah, sida dahabka, boombalaha, ama korontooyinka, waxay ku lumeen ama lagu xaday dugsiga. Waxaan si xoogan kugu dhiirogelinayaa qoysaska inay hubiyaan in carruurta aysan keenin sheeyada qiimaha leh dugsiga.

Haddii sheeyo noocaas sababaan carqalad, Sharciyada Dugsiga Ku saleysan waxay u ogolaan kartaa  shaqaalaha inuu ka qaado alaabta ardayga marka uu dugsiga joogo. Sharciyada Dugsiga Ku saleysan sidoo kale waxay sheegayaan in sheeyada qaar aan la keenin dugsiga marka koowaadba.

Waxaan sameyneynaa dadaal walba oo lagu celinayo dhammaan alaabaha gaarka loo leeyahay ardayga ama waalidka. Si kastaba ahaate, masuul kama noqon karno badelida alaabaha lumay ama la xaday, ama u magdhabida qoyska ee qiimaha alaabtaas.

## Kaararka Wargelinta

Dugsiyada waxay sameeyaan kaararka wargelinta dhammaadka muddo walboo la buundeeyay. Guud ahaan, dugsiyada hoose iyo fasalada K–5 ee dugsiyada K–8 waxay leeyihiin sadex mudoo buundeyn ah. Dugsiyada dhexe inta badan, fasalada 6–8 ee dugsiyada K–8, iyo dugsiyada sare waxay leeyihiin afar muddo buundeyn ah. Qaar kamid ah dugsiyada K–8 waxay codsan karaan inay lahaadaan hal nooc oo muddada buundeynta oo dhammaan heerarka fasalka. Waxaad ka heleysaa muddooyinka buundeynta 2021–2022 gudaha gadaasha daboolka Jaheyntaan. Gollaha Aaga Dugsiga waxay ka codsan karaan jadwalka muddooyinka buundeyn  kala duwan midka lagu aasaasay xafiiska dhexe.

Caadi ahaan, ardayda waxay u keenaan kaarkooda wargelinta guriga si waalidka ama masuulka u saxiixo. Ardayda ayaa kadib ku soo celiyo macalinka. Dugsiyada qaarkood waxay ku siiyaan kaararka wargelinta Open House ama shirarka waalidka-macalinka.

Bartamaha muddada buundeyn walba, dugsiyada waa inuu ula soo diraan ogeysiimada digniinta guriga ee ardayda halista ugu jiray dhacitaanka.

Si aad u ogaatid sida canugaaga u hormarayo, ka soo wac dugsiga si aad u balansatid shirka waalidka-macalinka. Xarumaha Soo dhaweynta BPS ayaa kaala talin karo si aad ula yeelatid kulan guul ah macalinka canugaaga. Waxay ku qoranyihiin bogga 5. Sidoo kale fiiri bogga 10, “Diyaarinta Kulanka Waalidka-Masuulka oo Wax ku ool ah.”

Qoysaska waxay sidoo kale ka kormeeri karaan hormarka waxbarashada canugooda onleenka oo dhinaca SIS-ka degmada (Nidaamka Macluumaadka Ardayga) Bogga Qoyska. Booqo **bostonpublicschools.org/SIS** for details. Wixii macluumaad dheeraad ah sidoo kale waxaa laga helayaa dugsigaaga.

## Ciyaaraha

Waxaa jiro fursado badan ee ardayga dugsiga dhexe BPS iyo dugsiga sare si ay uga qeybqaataan ciyaaraha. Ciyaaaraha BPS waa xubinta Ururka Ciyaaraha Ishdaxgalka aqoonyahanada Massachusetts (MIAA), iyo barnaamijyadeeda ciyaaraha waa inay u hogaansanaataa dhammaan xeerarka MIAA. Si aad uga qeybqaadatid, arday walba ciyaaryahan ah waa inuu si guul ah u baasaa baaritaanka jirka oo gudaha 13 bilood ka hor bilowga xiliga ciyaar walba, saxiixay foomka ogolaanshaha waalidka, oo joogteeyo heerka u qalmida barta isku celceliska (GPA) iyo heerka xaadirka.

**Fursadaha Ciyaaraha ee BPS**

- **Deyrta** - Wadanka Oo dhan, Hogaaminta jiibinta, Kubada cagta, Ciyaarta, Kubada laliska
- **Qaboobaha** - Kubada koleyga, Kubada Barafka, Orodka Gudaha, Dabaasha, Lagdinta
- **Gu’ga** - Beesboolk, Orodka Banaanka iyo Garoonka, Baloonig Jilicsan, Kubada laliska, Teeniska

Sharciga Massachusetts wuxuu u baahanyahay in dhammaan ardayda ciyaartoyada iyo waaladiintooda, sidoo kale sida tabarayaasha, jaheeyayaasha ciyaaraha, kalkaalisada dugsiga iyo dhaqaatiirta, inay bartaan wax ku saabsan cawaaqiibta dhaawacyada madaxa iyo gabagabada oo illaa barnaamijyada tababarka iyo qoraalada qoran. Waalidka tabaruca iyo waaladiinta/masuulada ardayga ka qeybqaadanayo howsha ciyaarta waxbarashada ka baxsan wuxuu macluumaad badan ka helayaa dugsigooda. Qoraalka sharciga waxaa laga heli karaa: **www.malegislature.gov/Laws/GeneralLaws/PartI/TitleXVI/Chapter111/Section222**.

Macluumaad badan ee ciyaaraha BPS waxaa laga heli karaa dugsiyada iyo websaydka BPS, **bostonpublicschools.org/athletics**.

## Joojinada Dugsiga

Dhacdada, BPS waxay u baahan kartaa inay xirto dugsiga sababtoo ah cimilo daran ama xaalad degdeg ah. Waxaan xiriirineynaa macluumaadka joojinta ee qaababkaan:

- Wacitaanada taleefonka tooska ah ee guryaha ardayda
- Saldhigyada raadiyowga iyo talefeshinka ugu badan, bilaabanayo 5:30 a.m.
- Khadka Leenka Duqa Magaalada 311
- Xafiiska Dhexe BPS 617-635-9000
- Websaydka BPS **bostonpublicschools.org**
- Baraha BPS Twitter (**@bostonschools**) iyo Facebook (**@bostonpublicschools**) akoonada
- Webysaydka Magaaladda Boston **www.cityofboston.gov/snow** *
  *soo ogeysiiyo degdegyada barafka, barafka baakinada, iyo joojinada dugsiga oo taleefon ahaan ama i-meel ahaan.

Wax walba oo go'aankeena yahay ee la xiriiro furitaanka dugsiga, waalidka wuxuu sameyn karay go'aanka ugu dambeeyo oo haddii ay badbaaado tahay in canugooda dugsiga aado. Haddii waalidka go'aansado inuu ku hayo canuga guriga sababtoo ah walaacyada badbaadada, maqnaanshaha waalaga cudurdaaranayaa markii waalidka soo diro qoraal. (Fadlan fiiri bogga 14, "Xeerka Dalacsiinta: Ka qeybgalka.")

- ➲ **Haddii dugsiyada la xiro**: Maalinta waxaa la sameynayaa dhammaadka sannad dugsiyeedka.
- ➲ **Haddii cimilo xun jirto inta lagu jiro maalinta dugsiga**: Kala dirida waxay noqoneysaa waqtiga joogtada ah.
- ➲ **Barnaamijyada dugsiga kadib**: Markii dugisga la joojiyo, dhammaan barnaamijyada dugsiga kadib ee dugsiyada BPS, dhacdooyinka ciyaaraha BPS, iyo fasalada maqribka iyo dhacdooyinka sidoo kale waa la joojiyay.

Oo sharciga gobolka, sannad dugsiyeedka ee ardayda waa inay ahaataa 180 maalmood. Sida waafaqsan heshiiska Ururka Macalimiinta Boston, maalinta ugu dambeyso ee dugsiga waa inaysan ka daahin Juun 30. Haddii ay muhiim tahay, waxaa saxeynaa kaleendarka BPS si aan ugu hogaansano sharuudahaan. Waxaad heleysaa macluumaadka katimid dugsiga canugaaga.

## Xeerka Jawiga Tubaakada aan laheyn

Haysashada, isticmaalka iyo bandhigida dhammaan waxyaabaha tubaakada iyo muqaadaraadka oo ay kujiraan qaacinta elctronikada ah waa ka mamnuuc dhismaha dugsiga, iyo gudaha 50 fiit ee dhismaha dugsiga marwalba, iyo sidoo kale dhammaan howlaha dugsiga maalgeliyo, xarunta ka baxsan. "Dhismaha dugsiga" waxaa ku jiro dhismooyinka, xafiisyada, baqaarada, garoomada ciyaaraha, basaska dugsiga iyo baabuurta, qeybaha baakinka, dhinacyada lagu lugeeyo/wadooyinka lagu lugeeyo, iyo dhismo walboo ku saleysan sharciga



maxkamada BPS. Xeerkaan wuxuu quseeyaa dhammaan shaqsiyaadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha dugsiga iyo martida. Ku xadgudbayaasha waxay quseyn kartaa ganaax. Ardayda ku xadgudubtaa xeerka waxaa laga qaadi doonaa tallabada edbinta sida lagu tilmaamay Xeerka Anshaxa iyo/ama buugyaraha dugsiga. Fiiri Wareegtada Kormeeraha guud SHS-18 ee xeer dhameystiran.

## Daryeelka Buuggaagta iyo Agabyada Kale

Dugsiyadeena waxay ku siiyaan ardayda buuggaagta qoraalka iyo qalabyada kale ee ay ugu baahanyihiin dugsiga, lacag la'aan. Buuggaagta qoraalka iyo maktabada buuggaagta waxaa iska leh BPS.

Qoraalada buuggaagta inta badan hadda waxaa lagu isticmaalayaa dugsiyadeena oo xaalad wanaagsan ayay ku jiraan. Buuggaag cusub waxaa la iibsadaa sannad walba sida loogu baahanyahay. Ardayda waxaa laga filaayaa inay ku soo celiyaan xaalad wanaagsan. Dhammaan qoraalada buuggaagta ee guriga ay u qaataan ardayda guriga waa in laljaldiyeeyaa.

Haddii ardayga uu waxyeeleyso ama uu lumiyo buug ama hantida kale ee dugsiga, ardayga ama waalidka waxaa laga rabaa inay bixiyaan badelaada. Qoysaska waa inay ka warqabaan buuga qoraalaad u qaalisanyihiin.

## Labisyada Dugsiga

Boston Public Schools ma lahan labiska dugsiga oo Magaaladda oo dhan. Si kastaba ahaate, ma lahan xeerka Labiska Dugsiga. Sida waafaqsan xeerka, Gollaha Aaga Dugsi walba waa inuu doortaa mid ka mid ah sadex dooq:

- ma jiro labiska dugsiga;
- labiska iqtiyaarka ama xeerka labiska; ama
- qasabka (loo baahaanyahay) labiska ama xeerka labiska.

Xitaa haddii dugsiga canugaaga uu leeyahay xeerka labis qasab ah, waxaad xaq u leedahay inaadan ka qeybqaadan. Si aad aad u sameysid midaan, u dir warqad maamulaha oo sheegeyso sababta canugaaga uusan uga qeybqaadaneynin. Shaqaalaha dugsiga waa inay u ogolaadaan ardayda aan xirneyn labisyada inay ka qeybgalaan dugsiga.

## Helitaanka Biyo Cabitaanka

Sharicga, dugsiyada waa inay sameeyaan biyo ay cabi karaan ardayda oo dhan inta lagu jiro maalinta dugsiga oo lacag la'aan ah. Dhammaan ardayda kadib illaha biyaha ama qaboojiyaha biyaha, oo ay ku jiraan kafeega ama aagaga halka ardayda ay ku cunnaan inta lagu

# Xeerarka BPS




jiro waqtiyada cuntada. Dhammaan ilaha biyaha ee loo isticmaalo cabitaanka iyo diyaarinta cuntada ama adeegyada caafimaadka waa la tijaabiyaa sanadkiiba. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan badbaadada biyaha iyo helitaanka, kala xiriir Waaxda Caafimaadka iyo Fayo qabka, 617-635-6643, ama booqo **bostonpublicschools.org/water**.

## Xeerka Ardayda Uurka le iyo Waalidnimada

DArdayda uurada iyo nuujiyawaxay leeyihiin xaquuqaha waxbarashada iyo waxbarashada kale ee lagu tilmaamay Wareegtada Kormeeraha guud EQT-08 si looga caawiyo uurada iyo nuujiya inay dhameystiraan dhammaan sharuudaha koorsada ee guriga dugsigooda. Sida qeyb ka ah xeerkaan, dhammaan dugsiyada leh fasalo walba 6-12 waa inuu u xilsaaraa xafiis Xeerka Ardayga Dhalmada iyo Waalidnimada filanayo oo masuul ka ah xiriirinta wax ku saabsan xeerka oo gudaha bulshada dugsiga.

## Ka qeybgalka Ardayga iyo Dowladnimada

Mid kasta oo ka mid ah Dugsiyada Dadwaynaha ee Boston dhexe iyo sare (oo ay ku jiraan dugsiyada degmada, dugsiyada imtixaanka, kulli dugsiyada kale, kuwa pilotka ah , iyo kuwa charter-ka ee degmada) waa inay lahaadaan qorshaha ka qaybqaadashada ardaygavoo qoran oo diiwaangelinaya fursadaha ardayda si ay u qaataan kaalinta hoggaaminta gudaha fasallada iyo bulshada guud ee dugsiga, sida lagu sheegay Toddobada Muhiimka ah BPS ee Dibuhabeyn Iskuulka oo Dhameystiran. Iyada oo qayb ka ah nidaamkan, dugsi sare kasta waa inuu sidoo kale yeeshaa dowlad arday ah oo shaqeyneysa oo ku hawlan. Dugsiyada Dhexe waxaa lagu dhiirigelinayaa inay haystaan dawladda ardayda. Hoggaamiyeyaasha ardayda ee ku jira qeybtaan waxay matalayaan asxaabtooda iyagoo u adeegaya sida lataliyayaal, cilmi baarayaal, iyo kaqeybgalayaasha nidaamka go'aan qaadashada ee heer dugsi iyo heer degmo. Xukuumadda ardaydu waxay u adeegtaa si ay ugu hawlgeliso ardayda barashada dimoqraadiyada iyo hoggaaminta.

Maamulka ardayga waa inuu muujiyaa kala duwanaanshaha ardayga dugsiga ku jior ee la xiriirto lab/dheddig/qowmiyada, jinsiga, heerka fasalka, barnaamijka waxbarashada (tusaale ahaan, waxbarashada guud, luuqad gaar ah iyo labada luuqad), iyo xaqiiqahaa kale. Tirada ka qeybqaatayaasha waxay ku xirantahay cabirka dugsiga. Waxa lagu talyaya waa 10-15 arday. Small Learning Communities (SLCs) waxaa sidoo kale lagu dhiirogelinayaa inay hormariyaan maamulada ardaygooda, oo ay la jirto matalaadaha SLC walba oo aasaasayo maamulka ardayga ee degmada oo dhan.

Maamulaha/madaxa dugsiga, oo ay la jirto tallada ardayga, waa in loogu xilsaaraa hal taliyayaasha kulliyada ama ka badan si ay u kormeeraan maamulka arday walba. Madax kasta oo Dugsi wuxuu mas'uul ka yahay hubinta in dowladda ardaygu ka dhismo dugsigooda. Fiiri Wareegtada Maamulka Ardayga FAM-3.

Gollaha La talinta Ardayga Boston (BSAC) waa hay'ada hogaamiyayaasha ardayda Magaaladda oo dhan oo matalayo dugsiyadooda quseeyo. BSACwaa gaariga koowaad ee ka qeybgalka dhalinyarada ee BPS oo u adeegaa sida codka ardayda ee Gollaha Dugsiga Boston. BSAC sidoo kale waxay hubisaa in ardayda lagu daray go'aan iyo xeerka sameynta ee saameeyo noloshooda iyo waaya aragnimada waxbarashada. BSAC sidoo kale waxay hubisaa in ardayda lagu daro go'aan qaadashada iyo dejinta siyaasadaha saamaynta ku leh noloshooda iyo khibradooda waxbarasho. Fiir Wareegtada Koreemaraha guud FAM-06.

Ardayda BPS waxay leeyihiin xaquuqyo badan iyo masuuliyadaha intaa waxaa dheer kuwa lagu sharaxay jaheyntaan. Xeerka Anshaxa BPS Waxaa ku jiro liis dhameystiran. Wax kabaranayaan wax ku saabsan xaquuqda ardayga iyo masuuliyadaha webyadkaan: **www.bostonstudentrights.org**

➲ Wixii Macluumaad Dheeraad ah:
Maamulaha Hawlgelinta Ardayda, 617-635-9446

## Toddoba Muhiim ee BPS Dibuhabeynta Dugsiyada

**Muhiimadda Aasaasiga ah - Tilmaamo wax ku ool ah**
Isticmaal waxqabadyo waxtar leh oo dhaqan ahaan ku habboon oo abuuraya jawi iskuul oo wada shaqeyn oo hagaajiya barashada ardayda, kor u qaada ka qaybgalka ardayga, oo ku kordhisa aqoonta iyo khibradaha hore ee ardeyga.

**Muhimadda Labaad -Shaqo Ardeyga iyo Macluumaad**
Fiiri shaqada iyo macluumaadka ardayga si loo wanaajiyo barista iyo horumarinta xirfadeed.

**MuhiimaddaSaddexaad - Horumarinta Xirfadlaha**
Maalgali horumarinta xirfadeed si loo hagaajiyo waxbarista.

**Muhiimadda Afraad - Hoggaan wadaag ah**
La wadaag hogaaminta si loo sii wanaajiyo hagaajinta waxbarashada.

**Muhiimadda Shanad - Khayraadka**
Jihee Kheyraadka si ay u taageeraan hagaajinta barashada iyo horumarinta waxbarashada ardayda.

**Muhiimadda Lixaad - Qoysaska & Bulshada**
La shaqeynta qoysaska iyo bulshada si ay u taageeraan barashada ardayda iyo ka qaybgalka.

**Muhiimadda Todobaad - Hawlgal Sareeya**
Joogtee heerar sare ee hufnaan, waxtarka iyo sinnaanta hawlaha.

# Illaha Badan ee Qoysaska

## Xeerka Arday Walbaa Inuu guuleysto (ESSA).

W aa maxay Sharciga Guusha Arday Kasta?

Xeerka Ku Guuleysiga Ardey kasta (ESSA) ayaa waxaa saxiixay sharci Madaxweynaha Obama sannadka 2015. ESSA waxaa ku jiro bixinada ku caawineyso hubitaanka guusha ardayda iyo dugsiyada oo hubisaa fursada oo dhammaan ardayda Mareykanka ah. ESSA...

- Waxay u qabataa ardayda oo dhan heerarka waxbarashada sareyso.
- U diyaarisaa dhammaan ardayda guusha kulliyada iyo shaqada.
- Siisaa carruur badan gelitaanka dugsiga hore.
- Waxay damaanad siisaa in tallaabooyinka arday lagu caawinayo la qaado, iyo dugsiyadooda, hormariso.
- yareysaa culeyska tijaabada iyada oo la joogteynayo macluumaad sannadlaha eoo waalidiinta iyo ardayda.
- Sare u qaado hal abuurka oo maalgelisaa waxa shaqeynayo.

ESSA waxaa ku jiro sagaal 'Qoqodb, inta badan siiyo maalgelin gobolada iyo degmooyinka dugsiga. Tan ugu weyn waa Qodob I, oo maalgeliyo barnaamijyada sare loogu qaadayo guusha waxbarashada ee ardayda hormarsan. Taas beddelkaada ah maalgelinta, gobolada iyo degmooyinka gobolka waa inay u hogaansamaan sharuudaha sharciga. ESSA waxay siisaa gobolada dabacsanaan ka badan inta ay sameysay sharcigii hore ee lagu dajinayo heerarkooda ee lagu cabirayo waxqabadka dugsiga iyo ardayga.

## Siee ayay ESSA u saameyneysaa Boston Public Schools?

Qorshaha gobalka Massachusetts ee hufnaanta dugsiga iyo taageerada ee looga baahan yahay sharciga Every Student Succeeds Act (ESSA) waxaa ansixisay Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka bishii Abriil sanadkaan 2018. Macluumaad dheeri ah oo kusaabsan nidaamkaan hufnaanta ee cusub waxaa lagusoo daabici doonaa webseetka degmada iyo iskuulka ee Hufnaanta iyo Caawimaada oo ah **www.doe.mass.edu/accountability**.



## La xisaabtanka Dugsiga

Dugsiyada BPS waxaa la xisaabtanta DESE wixii kusaabsan natiijooyinka ardayda iskuulkooda dhigta. Natiijooyinkaan waxaa kamid ah sida ardaydu uga guul keenaan Ingiriisiga, xisaabta, iyo imtaxaanaadka sayniska; inta ay le'egtahay kobaca ay kasameeyeen Ingiriisga iyo xisaabta; guusha kagaareen kuwo Ingiriisi Baradka sifiican ugu hadla ingiriiska; xadiga boqolkiiba ardayda sida xad dhaafka ugu googooya dugsiga (maqnaanshaha 10% ama kabadan maalmaha casharada). Tilmaamahaan waxaa lamarinayaa dhamaan dugsiyada, laakiin dugsiyada sare waxay leeyihiin natiijooyin dheeri ah oo ay masuul kayihiin, ayna kujiraan heerka qalin jabinta ee dugsiga sare, heerka wadashaqaynta dheeriga ah, heerka ardayda dugsiga kabaxda, iyo cadadka boqolkiiba ardayda dhamaysa koorsada dheeriga ah iyo Fasalka meelaynta dheeriga ah.

Dugsiyada iyo degmooyinka ayaa markaa lagu meeleeyaa qaybaha xisaabtanka iyadoo lagu saleynayo horumarka ay dugsiyadu sameynayaan iyo nooca taageerada ama gargaarka ay ka heli karaan DESE.



## Waxbarashada Carruurnimada hore

K0, K1 iyo K2 ee in badan oo Dugsiyada Dadweynaha Boston waxaa aqoonsan Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yar (NAEYC). Aqoonsiga NAEYC waa nidaam shahaadaysan oo iskaa wax u qabso ah. Maamulayaasha iyo macallimiinta K0, K1 iyo K2 ee dugsiyada NAEYC ay aqoonsan tahay waxay heleen tababar khaas ah si loo hubiyo in ay la kulmaan heerarka heerbeegga qaran ee waxqabadka ugu fiican iyo bixinta barnaamij tayo sare leh.

- ➲ Macluumaad dheeri ah iyo liiska dugsiyada NAEYC ay aqoonsan tahay **www.bpsearlylearning.org/naeyc-accreditation**
- ➲ Su'aalaha dheeraadka ah oo ku saabsan aqoonsiga NAEYC Qeybta Carruurnimada Hore ee 617-635-9063.

# Illaha Badan ee Qoysaska

## Kaararka Warbixinta Dugsiyada iyo Degmada

Sannad kasta, gobolada iyo degmooyinka oo idil waa in ay kaararka warbixinta u qoondeeyaan dugsi kasta. Kaararka warbixintan way ka duwan yihiin kaararka warbixinta ardayga ee kuu sheegaya sida ugu wanaagsan ee ilmahaagu dugsiga u qabtay. Sida kaadhka warbixinta ardaygu u muujiyo sida ay ku yihiin fasalada kala duwan, kaararka warbixinta iskuulada iyo degmadda waxaa loogu talagalay inay muujiyaan sida dugsigu ama degmadu ay wax u qabtaan meelo kala duwan.

**Kaarka Warbixinta Dugsiga** waxaa ku jira macluumaad ku saabsan:

- Fursadaha tacliineed ee uu heli karo ardaygu
- qadarka lacagta ku baxday cunnug kasta
- imisa macallimiin ayaa ruqsad u haysta inay baraan waxa ay baranayaan ama imisa ayaa loo tixgeliyaa waayo-aragnimo (waxbarayey ugu yaraan saddex sano)
- sida wanaagsan ee ardayda dugsiga canugaaga sameeyay wareega ugu dambeeyo ee imtixaanada gobolka oo dhan ee farshaxanka luuqada Ingiriiska iyo xisaabta
- sidee kooxyada kala duwan ayay ku sameeyeen imtixaamada:
    - ardayda ka imaatay kooxyada jinsiyada iyo qowmiyada
    - ardayda u qalanta qado bilaash ah oo la dhimay
    - ardayda leh xadidnaata aqoonta luuqada Ingiriiska
    - ardayda ku jirto fasalada waxbarashada gaarka ah
- boqolkiiba ardayda ee ku jirto mid walba ee kooxyada hoose ee qaato imtixxaanka
- sida dugsiga degmada iyo gobolka ku sameeyay guud ahaan imtixaanka
- heerarka qeybgalka iyo edbinta
- heerarka ka qalin jabinta ee dugsiyada sare.

**Kaarka Warbixinta Degmadu** sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan sida dhammaan kooxaha kala duwan ee ardayda ay ku sameeyeen imtixaanada gobolka oo dhan marka la barbardhigo celceliska dhammaan ardayda gobolka.

### Maxay kaararka wargelinada dugsiyada iyo degmada muhiim u yihiin?

Kaararkaan wargelinta waxay siisaa waaaldiinta macluumaad loogu caawinayo inay go'aan ka gaaraan waxnbarashada canugooda ka hor sannad dugsiyeedka xigga.

### Sidee ayaan u heli karaa koobiga kaararka wargelinta dugsiga canugeyga iyo degmada?

Dugsiyada waa inay soo diraan kaararka wargelinta dugsiga waaladiinta, email ahaan ama iyaga oo la siinayo ardayda inay guriga geeyaan. Dugsiyada waa inay siiyaan waalidiinta kaararka wargelinta degmada iyo dugsiga haddii ay weysdiistaan. Waxaa sidoo kale laga heli karaa Xarumaha Soo dhaweynta.

### Halkee ayaan ka heli karaa caawinta akhrinta ee kaararka wargelinta dugsiga canugeyga iyo degmada?

Kaararka wargelinta waa inay ahaadaan waalidka-saaxib la ah oo ku siiso macluumaad qaab sahlan ee la fahmayo. Weydii maamulaha dugsiga haddii aadan wax ka fahmin kaarka wargelinta.

## Xarumaha Caafimaadka ku saleysan Dugsiga

**Koorso kale oo Kuliyada ah (Caafimaadka Maskaxda Kaliya)★**
617-635-8865

**Blackstone Elementary**
South End Health Center
617-425-2000

**Akadeemiyada Hogaaminta Bulshada ee Boston / Dugsiga Sare ee New Mission★**
617-910-2333

**Boston Latin Academy★**
617-534-9930

**Dugsiga Sare Brighton★**
617-534-9958

**Dugsiga Sare Burke★**
617-534-9954

**Dugsiga Sare Charlestown**
North End Waterfront Health
617-643-8000

**Dugsiga Sare East Boston**
EBNHC
617-568-4877

**Gardner Pilot Academy**
Charles River Community Health Center
617-783-0500

**Jackson/Mann K-8 School**
Charles River Community Health Center
617-783-0500

**Madison Park Technical Vocational High School★**
617-534-9965

**Snowden International School at Copley★**
617-534-9967

**TechBoston Academy**
Codman Square Health Center
617-825-9660

**Young Achievers K-8 School**
Xarunta Caafimaadka Bulshada ee Mattapan
617-296-0061

★Xarumaha caafimaadka ee ku saleysan dugsiga oo ay gacanta ku hayaan Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston. Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Jeremiah Woodbury, Agaasimaha
Qaybta Ilmaha iyo Caafimaadka Dhalinyarada ee BPHC
617-534-5198

**schoolhealth@bphc.org**

**bphc.org/programs** > Child Adolescent & Family Health

# Xeerka Ka qeybgalka Waalidka

Waaladiinta waxay muhiim u yihiin guusha carruurtooda ee dugsiga. Dugsiyada Qodob I waa inay lahaadaan Xeerka Ka qeybgalka Waalidka, oo ku hormarsan oo ay ansixiyeen waaladiinta. Xeerka waa inuu aqriyaa sida waaladiinta ay uga qeybgalayaan sida jaalalka waxabarshada carruurtooda. Qorshahaan waa in la eegaa marwalba inta badan sida walaacyada waalidiinta u badelmaan. Waaladiinta waa in lagu daraa hormarinta, eegida, iyo qiimeynta xeerka.

### Macluumaadtee ayaa ku jirto Xeerka Ka qeybgalka Waalidka?

Xeerka waa inuu daboolaa sadex aag muhiim ah:

(1) hormarinta xeerka, (2) masuuliyada la wadaagay ee guusha ardayga, iyo (3) kartida macalimiinta iyo waalidiinta inay wada shaqeeyaan si ay u caawiso dhammaan ardayda inay buuxiyaan hadafyada waxbarashada.

- **Hormarinta xeerka**. Xeerka waa inuu dhahaa sida waalidiinta ay uga qeybgalayaan hormarinta Xeerka Ka qeybgalka Waalidka. Waa inay sharaxdaa sida waalidiinta talo uga siiyaan iyo ansixinta xeerka iyo qorshaha barnaamijka Qodob I. Tusaale ahaan, waa inay jirtaa qorshaha lagala tashanayo waalidiinta go'aamada weyn ee ku saabsan sida loo isticmaalo lacagta Qodob I. Xeerkaan waa inuu dhahaa sida dugsiga u taageero waalidiinta inay ka qeybgalaan kulamada muhiimka ah ee ku saabsan Qodob I, sida iyada oo la siinayo gaadiidka, cuntada, iyo daryeelka caruurta.
- **Masuuliyada la wadaagay**. Xeerka waa inuu ku jiro Iskujirka Dugsiga-Guriga ee dhahaa sida dugsiga ula shaqeeyo waalidiinta si ay uga caawiyaan ardayda inay hormaraan waxbarasho ahaan. Xeerka waa inuu siiyaa hadafyada isku jirka. Waa inuu sidoo kale dhahaa sida waalidiinta iyo dugsiga u aasaaso si wado jir ah. (Wixii sharaxaadyo dheeraad ah ee isku darka, fadlan fiiri bogga 59, "Isku jirka Dugsiga-Guriga.")
- **Macalimiinta xirfadaha iyo cilmiga iyo waaladiinta**. Xeerka waa inu sheegaa baahida tababarka iyo macluumaad waalidiinta iyo macalimiinta. Waaladiinta waa inay fursad u helaan inay wax ka bartaan:
  - heerarka iyo hadafyada waxbarasho ee gaarka ah ardayda waxaa laga filayaa inay gaaraan
  - sida loo cabiro horumarka ardayga
  - sida ardayda loo qiimeyn doono
  - sida waalidku ula shaqeyn karo macalimiinta si loo horumariyo guusha ubadkooda
  - agabka iyo fursadaha tababarka ee la heli karo si looga caawiyo waalidiinta inay la shaqeeyaan carruurtooda.

Marwalboo suurtogal ah, waalidiinta waa inay ka qeyb ahaataa kulamada tababarka shaqaalaha. Markasta oo ay suurtagal tahay, waalidiintu waa inay qeyb ka noqdaan fadhiyada tababarka shaqaalaha.

### Yaa qoro xeerka?

Dugsiyada waa inay ugu qeybgaliyaan qoraal ahaan waalidiinta Xeerka Ka qeybgalka Waalidka. Dugsiga canugaaga wuxuu kulan qabanayaa bilowga sannad dugsiyeedka si uu talladaada u heli.

### Sidee ayaan u helaa koobiga Xeerka Ka qeybgalka Waalidka ee dugsiga canugeyga?

Weydii maamulaha canugaaga ama xafiiska waalidka dugsiga oo koobiga xeerka. Xeerka waa inuu sahlanaadaa fahamkiisa. Haddii aad u baahantahay caawinta lagu fahmayo xeerka, weydii maamulaha canugaaga. Xeerka waxaa loo turjumay luuqado kale markii laga saaro Ingiriis.

### Sidee ayaan uga qeybgali karaa qoraal ahaan Xeerka Ka qeybgalka Waalidka dugsiga canugeyga?

Dugsiga waa inuu sharaxaa barnaamijka Qodob I ee kulanka sannadlaha—inta badan loogu yeeron Open House—oo waaladiinta. Dugsiyada inta badan waxay ku qabtaan Open House horaanta sannad dugsiyeedka. Dugsiga waa inuu waalidiinta ugeysiiyaa inay xaq u leeyihiin inay ka qeybgalaan oo ogeysiiyo sida ay uga qeybqaadan karaan dugsiga oo guud ahaan, iyo qoraal ahaan Xeerka Ka qeybgalka Waalidka. Haddii aadan ka qeybgali karin kulankaan, ka qeybgalkaaga weli muhiim ayuu u yahay—canugaaga iyo dugsiga. Soo wac maamulaha oo weydii sida aad uga qeybqaadan kartid.

# Is-Afgaradka Dugisga-Guriga

